

# Qaabdhismeedka Aqoonta iyo Kartida ee Minnesota ee Xirfadlayaasha Carruurnimada Hore:

## Daryeelka Carruurta Qoyska

Mashruucan waxaa la suurta geliyey iyadoo la adeegsanayo maaliyad federaali ah, 93.434 - ESSA Deeqda Horumarinta Preschool Preschool-ka Dhalashada illaa Shan (Development Grants Birth through Five). Waxyaabaha ku jira waxaa mas'uuliyadooda leh qorayaasha mana matalaan aragtida rasmiga ah ee Xafiiska Daryeelka Caruurta, Maamulka Caruurta iyo Qoysaska, ama Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha Maraykanka.

MINNESOTA

# Qaabdhismeedka Aqoonta iyo Kartida ee Minnesota ee Xirfadlayaasha Carruurnimada Hore:
## Daryeelka Carruurta Qoyska

Mashruucan waxaa la suurta geliyey iyadoo la adeegsanayo maaliyad federaali ah, 93.434 - ESSA Deeqda Horumarinta Preschool Preschool-ka Dhalashada illaa Shan (Development Grants Birth through Five). Waxyaabaha ku jira waxaa mas'uuliyadooda leh qorayaasha mana matalaan aragtida rasmiga ah ee Xafiiska Daryeelka Caruurta, Maamulka Caruurta iyo Qoysaska, ama Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha Maraykanka.

MINNESOTA

# Mahadnaq

Qaabdhismeedka Aqoonta iyo Kartida ee Minnesota waa mashruuc ay leeyihiin Waaxaha Waxbarashada, Adeegyada Aadanaha iyo Caafimaadka ee Minnesota iyo la-hawl-wadaagyadooda. Boqolaal daneeyayaal ah oo matalayay daryeelka caruurnimada hore iyo barnaamijyada waxbarashada oo kala duwan ayaa bixiyay rayi celin ku saabsan dukumeentiga kartida muhiimka ah ee la soo saaray 2004. Saddex kooxood oo latalin ah ayaa isku soo daray rayi celin waxayna soo saareen saddex nooc: mid loogu talagalay daryeelaya ee waxbaraya dhallaanka iyo socod baradka, mid loogu talagalay dadka daryeelaya carruurta aan da'da iskuulka gaarin (preschool), iyo mid loogu talagalay bixiyeyaasha daryeelka carruurta qoyska.

Waxaanu si weyn ugu mahadcelineynaa shaqada iyo wax ku biirinta ay sameeyeen xubnaha soo socda ee kooxaha la-talintu:

**Kooxda La-talinta Preschool-ka (ilmaha aan weli gaarin da'da iskuulka)**

- Sharon Bergen, Minnesota Association for the Education of Young Children
- Katy Chase, Minnesota Licensed Family Child Care Association
- Jeanne Dickhausen, Head Start Collaboration
- Diane Etling, Minnesota Department of Health
- Lora Kussman, Department of Human Services
- Kelly McKown, St Paul College/Access
- Nedra Robinson, St Paul College and Minnesota Association for Early Childhood Teacher Educators
- Cheryl Smoot, Minnesota Department of Health
- Sandra Williams, Minnesota Tribal Resources for Early Childhood Care
- Roz Zuest, Child Care Aware

**Kooxda La-talinta Dhallaanka iyo Socod baradka**

- Ada Alden, Minnesota Association for Family and Early Education
- Michele Dockter, Minnesota Department of Education
- Ann Edgerton, University of Minnesota Child Care Center
- Diane Etling, Minnesota Department of Health
- Michelle Fallon, Minnesota Association for Infant & Early Childhood Mental Health
- Vicki Hawley, Center for Early Education and Development
- Donna Henning, Head Start
- Lora Kussman, Department of Human Services
- Janice LaFloe, Bush Fellow
- Mary Ann Marchel, University of Minnesota, Duluth
- Sandy Masgai, Family Child Care
- Nedra Robinson, St Paul College and Minnesota Association for Early Childhood Teacher Educators
- Mary Santelman, Montessori Training Center
- Shelly Tollefson, Minnesota Association for Education of Young Children
- Cory Woosley, Child Care Aware

**Kooxda La-talinta Daryeelka Carruurta Qoyska**

- Deloris Friske, Family Child Care Provider
- Pat Gentz, Family Child Care Provider
- Jackie Harrington, Family Child Care Provider
- Mary Ksiazek, Family Child Care Provider
- Natalie Marose, Family Child Care Provider
- Sandy Masgai, Family Child Care Provider
- Misty McKinley, Family Child Care Provider
- Mary Muhs, Rasmussen College
- Tammy Oveson, Family Child Care Provider
- Wendy Prokosch, Family Child Care Provider
- Stephanie Reuss, Family Child Care Provider
- Linda Schesso, Family Child Care Provider
- Vicki Shofner, Minnesota Licensed Family Child Care Association
- Shirell Smith Kerney, Family Child Care Provider
- Dana Smith, Minnesota Licensed Family Child Care Association
- Michelle Thole, Family Child Care Provider
- Sheryl Warner, Family Child Care Provider

Intaa waxaa dheer, liistada waxaa la sameeyay iyadoo la aqoonsanayo mawduucyada guud ee laga helay wada-hadallada ay qabteen daryeel bixiyeyaasha dhaqan ahaan, juquraafi ahaan iyo barnaamij ahaanba kala duwan ee Minnesota. Kooxaha ka qaybqaatay doodaha dabeecadaha waxaa ka mid ah: macallimiinta dhallaanka, macallimiinta ilmaha aan weli gaarin da'da iskuulka, tababareyaasha, bixiyeyaasha daryeelka carruurta qoyska, daryeel bixiyeyaasha waalidka ah, la taliyayaasha caafimaadka dhimirka, shaqaalaha bulshada iyo macallimiinta kulliyadaha tacliinta sare. Mahadnaq gaar ah dhammaan shaqaalaha barnaamijka Head Start ee Community Action Partnership ee Degmooyinka Ramsey iyo Washington in ay ka qaybqaateen.

# Tusmada


**Mahadnaq** 2

**Hordhac** 6

Nooca Daryeelka Carruurta Qoyska ee Qaabdhismeedka Aqoonta iyo Kartida 7
Isku dhafka Halbeegyada iyo Kartiyaha 8
Aasaaska 9
Xeerarka Hogaaminaya 9
Adeegsiga 10
Habaynta Qaabdhismeedka 10
Dabeecadaha/Astaamaha 13
Qaabdhismeedka Aqoonta iyo Kartida ee Minnesota ee Xirfadlayaasha Carruurnimada Hore: La shaqaynta dhallaanka iyo socod baradka 15
2020 Wax ku kordhinta lagu sameeyey Qaabdhismeedka Aqoonta iyo Kartida 16

**Nuxurka Aagga I: Koritaanka iyo Barashada Caruurta** 20

Halbeegga PELSB 20
Kartiyaha 21

**Nuxurka Aagga II: Waayo aragnimada Waxbarasho ee Korriin ahaan Haboon** 26

Halbeegga PELSB 26
Kartiyaha 27

**Nuxurka Aagga III: Xiriirka Qoysaska** 46

Halbeegga PELSB 46
Kartiyaha 46

**Nuxurka Aagga IV: Qiimaynta, Qiyaasidda iyo ku Habboonaysiinta Shakhsiga** 53

Halbeegga PELSB 53
Kartiyaha 53

**Nuxurka Aagga V: Horumarka Taariikhiga ahaa iyo ka Casriga ah ee Waxbarashada Carruurnimada Hore** 59

Halbeegga PELSB 59
Kartiyaha 59

**Nuxurka Aagga VI: Xirfadle ahaanshaha** 61

Halbeegga PELSB 61
Kartiyaha 62

**Nuxurka Aagga VII: Caafimaadka, Badbaadada iyo Nafaqada** **72**

Halbeegga PELSB 72

Kartiyaha 72

**Nuxurka Aagga VIII: Ku-dhaqan loo marayo Khibrada Caafimaad*** **80**

Halbeegga PELSB 80

Kartiyaha 80

**Nuxurka Aagga IX: Daryeel iyo Hab Dhaqan ka Warqaba Dhaawaca Masiibada** **82**

Kartiyaha 83

**Nuxurka Aagga X: La shaqaynta caruurta ku Hadla Luqadaha Badan ee aan gaarin da'da iskuulka iyo qoysaskooda** **92**

Kartiyaha 93

**Eraybixinta** **104**

* "Ku dhaqan loo marayo Khibrada Caafimaad" ayaa lagu daray nooca Daryeelka Carruurta ee qoyska si ay u muujiyaan waayo-aragnimada bixiyayaasha daryeelka carruurta qoyska ee haysta ama laga yaabo inay sii wataan waxbarasho sare halkaas oo waayo-aragnimada kiliinikada looga baahan yahay. Tani waxay sidoo kale khusayn kartaa indho indheynta loo raadsado ujeedooyinka horumarinta xirfada shaqo ama loogu talagalay dadka arka muhiimada ay leedahay indha indhaynta goobaha kale xitaa haddii aysan raadsanaynin sii wadashada waxbarashada sare. Indho indhaynta waxaa lagu samayn karaa booqashooyinka kombiyutarka lagaga qaybqaadanayo, muuqaal fiidyow ahaan ama booqashada goobaha kale ee FCC.

# Hordhac

Minnesota waxay leedahay taariikh qani ah oo ah bixinta adeegyada joogtada ah/sii socda ee loogu talagalay carruurta iyo qoysaska. Dhacdooyinkii ugu dambeeyay ee gobolka iyo kuwa qaranku ayaa waxay dhiirigaliyeen horumarinta nidaam dhammaystiran oo si fiican la isugu duway oo ah barnaamijyada iyo adeegyada iyada oo ujeedadu tahay in dhammaan carruurtu helaan bilaw wanaagsan ee ay u baahan yihiin si ay ugu guulaystaan iskuulka iyo nolosha.

Hal qodob oo lagama maarmaanka u ah siinta carruurta yaryar khibrado dhiirigelinaya oo kor u qaadaya korriinkooda ayaa ah hubinta in dadka daryeela oo wax bara carruurtu ay yihiin kuwo si wanaagsan u diyaarsan oo warqab ah. Dadka la shaqeeya carruurta yaryar waxay ku yimaadaan boosaskooda shaqo duruufo nololeed oo kala duwan, iyagoo leh heerar waxbarasho oo kala duwan iyo heerar khibrado kala duwan. Nidaamka horumarinta xirfadeed ee Minnesota wuxuu u baahan yahay inuu ahaado mid ballaaran oo loogu adeego kooxdan kala duwan. Tan ugu muhiimsan, waxay u baahan tahay inay bixiso waayo-aragnimo waxbarasho oo wanaajinaysa xirfadaha qofka oo la socodsiisa horumarka cilmi-baarista iyo hababka ugu wanaagsan.

Nidaamka horumarinta xirfada ee Minnesota waxa uu ku salaysan yahay qaab qaran oo aqoonsan tababbarka iyo waxbarashada dhaafsiisan shuruudaha aasaasiga ah ee lagama maarmaanka u ah horumarinta natiijooyinka loogu talagalay carruurta yaryar. Qaabkani waxa uu xuddun u yahay shan waxyaabood oo muhiim ah: aqoonta asaasiga ah; hubinta tayada; wacyigelinta iyo helitaanka; u qalmitaanka, shahaadayinta iyo waddooyinka loo marayo; iyo maalgelinta. Mid ka mid ah yoolalka aasaasiga ah ee nidaamkani waa in la hubiyo in fursadaha waxbarasho ee loogu talagalay dadka la shaqeeya carruurta yaryar ay saldhig u yihiin halbeegyada anshaxa iyo tayada sare.

Qaybta aqoonta ee aasaasiga ah ee nidaamku waxay xooga saaraysaa in bixiyayaasha daryeelka caruurnimada hore ay u baahan yihiin in lagu qalabeeyo aqoon, karti, qalab iyo kalsooni si ay si wax ku ool ah ula shaqeeyaan carruurta iyo qoysaska. Dadka la shaqeeya carruurta yaryar waa inay si fiican ugu yaqaanaan korriinka carruurta iyo aragtiyaha waxbarashada.

Waxay u baahan yihiin in ayna ogaan oo kaliya inay ogaadaan xikmadda aragtida laakiin sidoo kale hababka iyo xeeladaha lagu ansixiyay cilmi-baaris. Aasaaskan waxa la wanaajiyey marka lagu daro awoodda lagu muujinayo xirfadaha looga baahan yahay shaqada sida goobta lagu sheegay. Qaabdhismeedka Aqoonta iyo Kartida Minnesota ee Xirfadlayaasha Carruurnimada Hore: la shaqaynta dhallaanka iyo socod baradku waxay si cad u qeexaysaa waxyaabaha laga filayo ee ay bixiyayaasha carruurnimada hore u baahan yihiin inay ogaadaan iyo waxayna u baahan yihiin inay awoodaan in ay sidaas sameeyaan.

Saddex nooc oo waayo-aragnimada waxbarasho ah ayuu ka kooban nidaamka Horumarinta Xirfadeed ee Minnesota: koorsooyin ku salaysan in lagu helo dhibco (credit); tababar aan dhibco lahayn; iyo caawimo farsamo oo ka kooban waxbarashada xiriirka ku salaysan sida latalinta/hagitaan, tabobarida ama latalinta. Qaabdhismeedka Aqoonta iyo Kartida ee halkan lagu sharraxay waxay noqon karaa qaabdhismeed guud oo lagu saldhig u ah dhammaan noocyada khibradaha waxbarasho.

Kobcinta Xirfada Xirfadlaha Waxbarashada Carruurnimada Hore: Qaamuuska Tababarka iyo Kaalmadaha Farsamada. Xuquuqda daabacaadda © 2011 Ururka Qaranka ee Waxbarashada Carruurta Yaryar, Ururka Qaranka ee Khayraadka Daryeelka Carruurta & Wakaaladaha Gudbinta.

*Qaabdhismeedka Aqoonta iyo Kartida Xirfadlayaasha Carruurnimada Hore: Daryeelka Carruurta Qoysku waxa uu qeexayaa halbeegyada, ama waxa laga filayo, ee ku saabsan waxa ay dadka waxbaraya oo daryeelaya carruurta yaryari u baahan yihiin in ay ogaadaan. Waxa kale oo ay sharraxaysaa kartiyahaa qeexaya muujinta xirfadaha cayiman ee loo baahanyahay. Daryeel bixiyeyaasha waxay muujiyaan kartiyahaa siyaabo kala duwan.*

**Dukumeentiga waxaa loogu talagalay in loo isticmaalo laba siyaabood oo aasaasi ah:**

1. kuwa abuuraya ujeedooyinka waxbarasho ee fursadaha waxbarasho oo ay ku jiraan barnaamijyada waxbarashada, kaalmada farsamada iyo tababarka;
2. waxaa loogu talagalay in ay isticmaalaan dadka la shaqeeya carruurta yaryar marka ay qiimaynayaan xirfadahooda oo ay ka shaqeeyaan sidii ay u horumarin lahaayeen.

Intaa waxaa dheer, maamulayaasha barnaamijka, kormeerayaasha shaqaalaha adeega tooska ah, lataliyayaasha caafimaadka iyo shati bixiyaasha ayaa u arki doona dukumeentiga in uu yahay mid faa'iido leh marka ay aqoonsadaan xirfadaha loo baahan yahay oo ay ka caawinayaan inay wax baraan dadka ay la shaqeynayaan.

Iyada oo aan loo eegin booska ama goobta qofka, dadka la shaqeeya carruurta yaryar iyo qoysaska ayaa waxay leeyihiin waxyaabo badan oo ay wadaagaan oo ay u baahan yihiin inay ogaadaan oo ay tahay in ay awoodaan inay sameeyaan. Abuuritaanka Qaabdhismeedka Aqoonta iyo Kartida, waxaa ka fikiritaan lagu bixiyey waxyaabahan la wadaago iyadoo isla markaasna la aqoonsanayo xirfadaha gaarka ah ee looga baahan yahay jagooyinka shaqada iyo goobaha qaarkood.

Tusaale ahaan, waxaa jira xirfado iyo karti ay u baahan yihiin dadka la shaqeeya carruurta da'da iskuulka ka hor (saddex ilaa shan sano jir) IYO dhallaanka iyo socod baradka (dhalasho ilaa saddex). Waxaa kale oo jira xirfado khaas ah oo ay u baahan yihiin dadka la shaqeeya dhallaanka iyo socod baradku sida aqoonta iyo kartiyahaa hubinaya ku xirnaanta sugan ee dhallaanku la yeesho xubnaha qoyskooda. Labada xirfadoodba waxay u baahanyihiin in lagu daro nuqul loo qoray barayaasha dhallaanka iyo socod baradka.

Waxaa suurtogal ah in la soo saaro noocyo dheeraad ah oo ah Qaabdhismeedka Aqoonta iyo Kartida. Marka la abuuro noocyo dheeraad ah, waa in lagu dadaalaa sidii loo ilaalin lahaa waxyaabahan ay wadaagaan. Noocyo dheeri ah ayaa laga yaabaa in ku daro qaybo kartiyaha xirfadeed ee loogu talagalay dadka qaadanaya doorarka iyo mas'uuliyadaha u baahan waxbarasho dheeraad ah

# Nooca Daryeelka Carruurta Qoyska ee Qaabdhismeedka Aqoonta iyo Kartida

Tirada faraha badan ee carruurta yar yar ee Minnesota, ee ay waalidkood ama dadka masuulka ka ah ay shaqeeyaan, ayaa lagu daryeelaa waxna lagu baraa guryaha FCC. Bixiyeyaasha daryeelka carruurta qoyska ee la shaqeeya ayaa waxay noqon karaan kuwo saamayn weyn ku leh u diyaarinta iskuulka iyo nolosha. Bixiyeyaasha FCC waxay si gaar ah u bixiyaan:

- Daryeel iyo waxbarasho ay ku siiyaan carruurta yaryar deegaan guriga oo kale ah
- Goob ay gooni u wada joogi karaan carruurta hal qoys ka timid
- Cabbir kooxo tiro yar oo da' isku dhafan leh
- Daryeel joogto ah oo sii socda laga bilaabo dhallaanka ilaa da'da iskuulka

Si ay u bixiyaan adeegyadan, bixiyeyaasha FCC waxay u baahan yihiin xirfado badan oo la mid ah kuwa uu u baahan yahay qof ku bixiya daryeel iyo waxbarasho xarun ama goob iskuul ku salaysan. Intaa waxaa sii dheer, waxaa jira dhinacyo badan oo kala duwan oo ku saabsan goobta FCC oo u baahan xirfado gaar ah iyo kartiyaha dadka waaweyn ee ka dhex shaqeeya.

- Sababtoo ah daryeel bixiyeyaasha FCC waxay daryeelaan oo wax baraan carruurta laga bilaabo dhalashada ilaa da'da iskuulka ee hore, waxay u baahan yihiin inay si fiican ugu saleeyaan aqoonta korriinka ilmaha ee da'dan ballaaran. Waxay u baahan yihiin inay aqoon u yeeshaan sida qoysasku u koraan oo ay u awood u yeeshaan inay taageeraan xiriirka waalidka iyo ilmaha ee caafimaadka qaba.
- Carruurtu waxay u koraan hab ku salaysan qoyskooda, dhaqamadooda, iyo bulshooyinkooda. Inta ay xubnaha qoysku ay yihiin kuwa ugu muhiimsan uguna saamaynta badan, xiriirada caruurtu la leeyihiin dadka kale waxay sidoo kale saameeyaan koriinkooda. Xiriirka lala sameeyay Bixiyaha Daryeelka Carruurta Qoyska ayaa wuxuu noqon karaa qof qaangaar ah oo la aamini karo, oo bixiya sii wadida iyo saldhig badbaado leh oo ilmuhu ku sahamiyo waxn ka baran karo.
- Carruurnimada hore waa wakhti koritaan xoog badan. Sidoo kale waa wakhti nuglaansho qotodheer. Horumarka waxaa si dhab ah u dhaawici kara aan ahayn keli daahinta ama naafanimada, laakiin sidoo kale tirada waayo-aragnimada xaaladaha xun ee carruurnimada Daryeelka naxariista kobcinta iyo warqabka ah ee la siiyo carruurta koriimadoodu halis ku jirto ayaa waxay ka caawin kartaa ilmaha inuu yeesho adkeysi oo waxayna noqon kartaa wax ka ilaaliya waayo-aragnimada qaarkood.
- In si dhow loola shaqeeyo carruurta iyo qoysaskooda, mararka qaarkood muddo sanado ah, ayaa waxay dhalin kartaa shucuur badan. Daryeel bixiyeyaasha FCC waxay u baahan yihiin inay ka fikiraan dareenkooda, falcelintooda, iyo dabeecadahooda iyo sidoo kale midda dadka kale si ay u noqdaan kuwa ugu waxtarka badan.
- Marka ay daryeelayaan xubnaha qoyska ama saaxiibada qoyska, bixiyeyaasha FCC waa inay ahaadaan kuwo xasaasi u ah oo isu dheelitira baahiyaha qoyskooda iyo kuwa carruurta ay daryeelayaan.
- Inta badan, daryeel bixiyeyaasha FCC waxay keligood la shaqeeyaan carruurta yaryar waxayna dareemi karaan go'doon gaar ahaan horraanta xirfaddooda. Waa inay garanayaan oo ay awoodaan inay daryeelaan baahiyahooda gaarka ah oo ay ku jiraan is-qiimaynta iyo is-hagidda korriinka xirfadeed.
- Inkasta oo qoysasku inta badan ay doortaan FCC sababta oo ah jawiga guriga oo kale, gurigu sidoo kale wuxuu leeyahay khataro aan laga helin meesha si gaar ah loogu talagalay daryeelka iyo waxbarashada kooxda da' gaar ah. Daryeel bixiyeyaasha FCC waxay u baahan yihiin inay ka warqabaan walaacyadan gaarka ah oo ay qaadaan tallaabo ay ku tirtirayaan khataraha.
- Bixiyeyaasha FCC kama masuul ah oo keliya daryeelka iyo waxbarashada carruurta yaryar; waxay mas'uul ka yihiin socodsiinta ganacsi yar oo guuleysta. Tani waxay u baahan tahay awooda suuq geynta, miisaaniyada, xafidida diiwaanada saxda ah iyo ka faa'iidaysiga dhaqamada ganacsi ee ku haboon.

# Isku dhafka Halbeegyada iyo Kartiyaha

Qaabdhismeedkani waxa uu muujinayaa is-waafajinta u dhexeeya shatiga Guddiga Barayaasha Xirfadlaha ah iyo Halbeegyada (PELSB) iyo kartiyaaha ugu muhiimsan ee lagu kasbado goobta shaqada. Halbeegyada ayaa qeexaya waxyaabaha laga filayo ee ku saabsan waxa daryeel bixiyayaasha carruurnimada hore u baahan yihiin inay ogaadaan oo ay qeexaan natiijooyinka barashada ee dadka ku jira barnaamijyada horumarinta xirfadeed. Kuwaas waxaa lagu dejiyay Xeerka Maamulka Minnesota ee 8710.3000 oo halkana lagu soo celiyay. Xeerka waxaa ku jira halbeegyada dhallaanka iyo socod baradka, ka hor dugsiga hoose iyo dugsiga hoose. Marka laga hadlayo carruurta dhalashada ilaa fasalka 3, sharcigu wuxuu isticmaalaa "carruurta yaryar." Maaddaama luqadda qaanuunka dib loogu adeegsanayo halkan, waxaad arki doontaa ila erey-bixintan. Dukumeentigu wuxuu diirada saarayaa waxa ay noqon doontaa in lala shaqeeyo carruurta aan weli gaarin da'da iskuulka.

Kartidu waxay qeexaysaa muujinta xirfadaha iyo awoodaha loo baahan yahay si si hufan looga shaqeeyo goobta. Qaabdhismeedkan, kartiyaha waxaa ayaa loo habeeyey si ay si barbar ah ula sinmaan halbeegyada PELSB. Halbeegyada Caafimaadka, Badbaadada iyo Nafaqada ayaa lagu daray maadaama aysan heerarka PELSB ee aaggan ayna ka jirin.

Halbeegyada iyo kartiyuhu way isku xiranyihiin. Si loo dhimo soo noqnoshada, waxaanu go'aansanay in aanu ku darno kartida halbeeg la xiriira. Kartiyaha ayaa sidoo kale loo safay si jiif ah si ay u muujiyaan horumarka xirfadeed marka barayaashu helaan khibrad. Xirfadaha muhiimka ah ayaa lagu daray; dukumeentiga kuma jiraan xirfad kasta oo qofka goobta jooga uu u baahan karo.

## Aasaaska

Minnesota markii ugu horreysay waxay abuurtay kartiyaha daabacaaddii 2004 Kartida ugu Muhiimka ah ee Minnesota ee Waxbarashada Carruurnimada Hore iyo Xirfadlayaasha Daryeelka ee la shaqeeya carruurta dhalashada ilaa siddeed iyo qoysaskooda. Tan iyo markaas, wax badan ayaa laga bartay horumarka maskaxda, xeeladaha waxbarida oo waxtar leh, nafaqada iyo cayilka iyo sidoo kale u adeegida carruurta leh baahiyaha caafimaad ee gaarka ah iyo baahiyaha dareenka bulshada. Waxa kale oo jiray isbeddelo ku yimi qaab-dhismeedka bulshada iyo goobta carruurnimada hore. Dib u eegistan ayaa loo baahan yahay si loo muujiyo isbeddeladan iyo horumarkan.

Si loo diyaariyo dib u eegistan, boqollaal qof ayaa afti ra'yi ururin lala sameeyay waxaana la wareystay dhowr kooxood oo isticmaalay dukumeentiga. Rayi celintu waxay muujisay baahida loo qabo kartiyaha caafimaadka oo adag, sharraxaad wanaagsan oo ku saabsan xirfadaha loo baahan yahay si loola shaqeeyo carruurta qaxootiga, muhaajiriinta iyo bulshooyinka Maraykanka ee cusub, kartiyaha la cusboonaysiiyay ee ku salaysan cilmi-baarista ugu dambaysay ee hadda, oo ka kooban dib ugu soo celcelin yar. Rayi celinta muhiimka leh ayaa lagu soo daray daabacaadan. Qoraalada iyo dukumeentiyada kartida ee gobolada kale ayaa dib loo eegay si loo helo aragtiyo dheeraad ah.

Dukumeentiyo dhowr ah ayaa ahaa khayraadka muhiimka ah ee horumarinta qaabdhismeedkan, oo ay ku jiraan: Tusiyeyaasha Horumarka ee Carruurnimada Hore: Halbeegyada Waxbarashada Carruurnimada Hore ee Minnesota, Ururka Qaranka ee Waxbarashada Carruurta Yaryar (NAEYC) Halbeegyada Barnaamijyada Diyaarinta Xirfadlayaasha Carruurnimada Hore, iyo Hagayaasha Halbeegyada Waxqabadka Caafimaadka iyo Badbaadada Qaranka ee loogu talagalay Barnaamijyada Daryeelka iyo Waxbarashada Carruurnimada Hore. Ka eeg liiska khayraadka dukumeentiyada waxtar leh oo dheeri ah.

## Xeerarka Hogaaminaya

Dhowr mabaadi ayaa haga dukumeentigan.

- Shaqaale aqoon sare leh, xoog shaqo oo si fiican u diyaarsan ayaa si fiican ugu qalabaysan inay la shaqeeyaan carruurta yaryar waxayna u horseedaa natiijooyin wanaagsan oo caruurtu gaaraan.
- Daryeel bixiyeyaashu waxay u baahan yihiin xirfado, aqoon iyo taageero si ay u dhistaan khibrad.
- Xirfadaha, aqoonta iyo taageerada waxaa lagu kasbadaa samaynta khibrado badan oo kala duwan.
- Waaya-aragnimada waxbarashada waxaa ka mid ah fasallada waayo-aragnimada lagu qaato dhibcaha, waayo-aragnimada waxbarashada aan lagu qaadanin dhibcaha, kaalmo farsamo iyo waayo-aragnimo nololeed oo kala duwan.
- Daryeel bixiyeyaashu waxay u baahan yihiin fursado ay ku howlgeliyaan wixii ay barteen iyo sidoo kale dib u milicsi shaqsiyeed iyo mid la hagayo si ay u horumariyaan hab dhaqankooda.
- Horumarinta xirfadeed ee qorshaysan ee ula kac ah ayaa ah qayb ka mid ah koritaanka joogtada ah ee shakhsiga iyo horumarka.

## Adeegsiga

Dukumeentigan waxaa loo isticmaali karaa:

- Kor u qaadida caruurnimada hore in ay tahay xirfad leh cilmi la aqoonsan yahay.
- Si loo aqoonsado fikradaha muhiimka ah iyo xirfadaha horumarinta xirfadeed.
- Si loo qorsheeyo ujeedooyinka waxbarasho ee bixinta horumarinta xirfadeed kuwaas oo xoogga saaraya aqoonta gaarka ah iyo kartiyaha.
- Si la isugu-dubbarido oo loo dhiso nuxurka horumarinta xirfadda si loo fududeeyo wareejinta iyo heshiisyada qeexidda.
- Si loo aqoonsado baahiyaha horumarinta xirfadeed oo loo qorsheeyo tababar koox dad ah, deegaan ama gobol.
- Si loo qiimeeyo bixin hadda ah oo ah dhammaan qaybaha tusmada iyo heerarka kartida.
- Is-qiimaynta baahiyaha horumarinta xirfadeed oo loo soo saaro qorshe shaqsiyeed.
- In la abuuro sharaxaad shaqada.

Qaabdhismeedka waxa isticmaali doona nidaamka bixinta tababbarka aan dhibcaha lahayn ee Child Care Aware si ay u habeeyaan, u aqoonsadaan oo ay ugu xayeysiiyaan wax bixinta iyadoo la eegayo aagga iyo heerarka. Diiwaanada tababbarka ee ay dabagasho Develop (Korriin) ee Xarunta Horumarinta Xirfadlayaasha ee Minnesota waxa ku jiri doona aagagga mawduuca/nuxurka iyo heerarka uu qofku qaatay. Qaabdhismeedku waxa kale oo uu wargelin doonaa Qiimaynta Baahiyaha Tababarka Shakhsiyeed ee dib loo eegay (ITNA) taas oo ay hadda isticmaalaan bixiyeyaasha daryeelka carruurtu si ay qiimayn ugu sameeyaan aqoontooda iyo xirfadahooda awoodaha kala duwan una qorsheeyaan horumarkooda xirfadeed ee sii socda.

Tababarayaasha la ansixiyay waxay isticmaali doonaan qaab-dhismeedka si ay u horumariyaan ujeedooyinka waxbarashada marka ay naqshadaynayaan koorsooyinka. Tababarka ay soo saartay Waaxda Adeegyada Aadanaha waxa lagu salayn doonaa halbeegyada iyo kartida lagu qeexay qaab-dhismeedka. Machadyada Tacliinta Sare (IHE) ayaa mas'uul ka ah hubinta in ardaydu ay aqoon u leeyihiin Guddiga Halbeegyada Waxbarashada ee ku jira qaab-dhismeedka. Isticmaalka Qaabdhismeedka Aqoonta iyo Kartida ayaa lagu dhiirigelinayaa naqshadeynta koorsooyinka IHE iyo in lagu soo bandhigo dukumeentiga shaqadooda koorsada.

## Habaynta Qaabdhismeedka

Tobanka qaybood ee uu ka koobanyahay ee u dhigma halbeegyada PELSB ayaa loo isticmaalaa in lagu habeeyo qaabdhismeedka. Meelaha mawduucyada/nuxurku ka kooban yahay waxay caawinayaan sharraxaadda iyo ka doodista halbeegyada iyo kartida; ficil ahaan u samaynta, aagagga nuxurku way isku xiranyihiin oo midba midka kale ayuu ku tiirsan yahay. Carruurtu way ka faa'iidaan marka dadka waaweyn ee la shaqeeyaa ay wax badan ka bartaan:

- Horumarka iyo Barashada Ilmaha: Daryeel bixiyuhu waxa uu fahmaa aragtiyaha horumarka, cilmi baarista iyo hababka ugu wanagsan ee lagu caawinayo caruurta in ay helaan xirfado jireed, bulsho, shucuureed, luqad, garasho iyo xirfado hal abuur leh; waxa uu fahmayaa kala duwanaanshiyaha shakhsiyaadka ah iyo hababka loo maro waxbarashada; waxa uu fahmayaa doorka muhiimka ah ee qoyska, hiddaha dhaqanka iyo bulshada; oo uu fahmayaa xiriir ka dhexeeya hiddaha dhaqanka, luqada, iyo fikirka.
- Waaya-aragnimada Waxbarasho ee Ku Haboon ee Korriinka: Daryeel Bixiyuhu wuxuu dejiyaa oo ilaaliyaa deegaan badbaado iyo caafimaad leh, oo uu qorsheeyaa oo fuliyaa waayo-aragnimo waxbarasho oo kala duwan oo ku habboon korriinka kuwaaso kor u qaada garashada, bulshaynta iyo shucuurta, jidhka, iyo korriinka hal abuur leh iyo horumar.

- Xiriirka Qoysaska: Daryeel bixiyehu waxa uu aasaasaa oo ilaaliyaa xiriirada wada shaqayneed oo wanaagsan ee ay la leeyihiin qoysaska si loo daboolo baahiyaha carruurta.
- Qiimaynta, Qiyaasta iyo ku Habboonaysiinta Shakhsiga: daryeel bixiyuhu wuxuu eegaa, diiwaan geliya oo qiimeeyaa xirfadaha carruurta si uu u garto meelaha ay ku wanaagsan yihiin, baahiyaha iyo hababka ay wajahaan barashada si loo qorsheeyo hawlaha, isdhexgalka iyo deegaanka ku habboon; waxayna qiimeeyaan oo ay qiyaasaan tayada barnaamijka iyadoo la isku dayo in si joogto ah loo horumariyo barnaamijka.
- Horumarka Taariikhiga ahaa iyo ka Casriga ah ee Waxbarashada Carruurnimada Hore: Daryeel bixiyuhu waxa uu fahmayaa sida dhacdooyinka taariikhiga ah iyo saamaynta xaaladaha guud ay u saameeyaan ku hab dhaqanka hadda iyo xaaladaha hadda taagani sida ay u saameeyaan carruurta, qoysaska iyo barnaamijyada.
- Anshaxa Xirfadlenimada: Daryeel bixiyuhuu waxa uu u arkaa waxbarashada iyo horumarinta joogtada ah dadaal iyo mas'uuliyad soconaya nolosha xirfada shaqo oo dhan; wuxuu ugu adeegaa carruurta iyo qoysaska si xirfad leh; wuxuu iskaashi la sameeyaa dadka kale.
- Caafimaadka, Badbaadada iyo Nafaqada: Daryeel bixiyuhu wuxuu uu dejiyaa oo ilaaliyaa deegaan iyo manhaj hubinaya caafimaadka, badbaadada iyo nafaqada ilmo kasta oo bixiya waayo-aragnimada kor u qaadaysa caafimaadka ugu fiican, badbaadada, nafaqada, jir ahaan, iyo horumarka shucuureed ee bulsho oo taageeraya hab dhaqan caafimaad qaba oo nolosha oo dhan ah.
- Ku dhaqan loo marayo Khibrada Caafimaad: Baruhu wuxuu ku dabaqaa dhaqamada waxbarista ee waxtarka leh ee waayo-aragnimada iyo moodeelada barnaamijka oo kala duwan.
- 2020 Daryeel iyo Hab Dhaqan ka Warqaba Dhaawaca Masiibada.
- 2020 La shaqaynta Caruurta iyo Qoysaska ku Hadla Luuqadaha Badan.

Qaybaha nuxurka qaarkood ayaa loo sii kala qaybiyay qaybaha barashada. Tusaale ahaan, aagga nuxurka ee loo yaqaano Waayo aragnimada Waxbarasho ee Korriin ahaan Haboon ayaa lagu sii jebiyay qaybaha barashada oo ay ku jiraan: koriinka garaadka, horumarka bulshaynta iyo shucuurta, korriinka jirka iyo horumarka hal-abuurka.

Mid kasta oo ka mid ah aagagga nuxurku/mowduucyadu wuxuu ka kooban yahay saddex heer oo kartiyaha ah. Heer kastaa waxa ku jira oo uu ku sii dul dhisanyahay kartiyaha heerkii ka horeeyay. Heerarku waxay qeexayaan horusocodka xirfadaha halkii ay ka qeexi lahaayeen heerarka waxbarashada. Sida ay carruurtu ugu koraan heerar shakhsi ahaaneed ee ay ugu xoog badan yihiin meelaha qaarkood ee horumarka ah, daryeelbixiyeyaashu waxay isku arki doonaan heerar kartiyeed oo kala duwan iyadoo ku xiran awooddooda, waxbarashadooda hadda iyo waaya-aragnimadooda. Marka ay daryeel bixiyayaashu qiimeeyaan xirfadahooda, waxay heli doonaan meelo ay horumariyaan. Dib u milicsigan waxa loo isticmaali karaa in lagu sameeyo qorsheyaasha horumarinta xirfadeed. Heerarku waa:

**Heerka 1: Wuu Daahfuraa** - Daryeel bixiyeyaasha heerka daahfurka/sahamintu waxay ku cusub yihiin goobta carruurnimada hore ama waxay ku cusubyihiin fikrad carruurnimada hore ah. Heerkan, daryeel bixiyeyaashu wax bay akhriyaan, wax bay tijaabiyaan oo wax ayey ka soo qaataan waaya-aragnimadooda si ay ugu daraan shaqadooda carruurta. Daryeel bixiyeyaashani waxay sahaminayaan fikradaha oo ay bilaabayaan inay aqoonsadaan tilmaamayaasha koritaanka iyo horumarka. Waxay u fiirsadaan carruurta si ay marka horeba indhahooda ugu bartaan waxa ay carruurtu yihiin iyo waxa ay tahay in ay ka filaan iyaga. Heerkan, daryeel bixiyeyaashu inta badan waxay ku tiirsan yihiin habraacyada loo qoray iyo habraacyada ay ku bartaan fasalka ama ka akhriyaan buug. Waxay bilaabayaan inay aqoonsadaan xirfadaha ay u baahan yihiin si ay si wax ku ool ah u daryeelaan oo wax u baraan carruurta yaryar. Si ay u koraan, waxay raadiyaan waayo-aragnimo waxbarasho ay ku jiraan la hadalka daryeel bixiyeyaasha kale, qaadashada fasallo iyo dib u milicsiga khibradahooda.

***Sheekada Patricia:*** *Patricia waxay hadda bilaabaysaa ganacsigeeda daryeelka carruurta qoyska. Waxay tiri, "Waxaa jira wax badan oo ay tahay in la barto. Waxaan la kulmay qaar ka mid ah daryeel bixiyeyaasha kale ee bulshadayda waxayna u badanahay inay ku wareereen su'aalaha badan ee aan waydiiyo. Aad bay ii deeqsiiyiin u ahaayeen inay ila wadaagaan fikradaha iyo agabka. Daryeel bixiye ayaa gaar ahaan, garabkeeda i gelisay oo ila wadaagaysaa khibradeeda. Waxay iga caawisay inaan ogaado waxa aan ku samaynayo hal will oo yar oo ay dhib kala kulmaan kala reebitaanka hooyadii. Waxaan qaatay fasallo, waxaan fiiriyay qoraallada Facebook, oo waxaan sameeyay qaar ka mid ah waxyaabo la mid ah kuwa aan xasuusto inaan samayn jiray carruurnimadaydii. Bilaabidda ayaa waxay u baahnayd xoogaa tijaabo iyo khalad ah ka barasho ah markii aan ogaanayey wixii aan samayn lahaa maalin kasta iyo sidii aan gurigayga uga dhigo mid u shaqeeya ganacsigayga sidoo kale. Mid ka mid ah caqabadahayga ugu weyn waa barashada dejinta xuduudaha iyo xeerar shaqaynaya. Waxaan sidoo kale u baahanahay inaan helo foomamka xisaabinta iyo diiwaangalinta oo aniga ii shaqeeya. Mararka qaarkood, waxay noqon kartaa arrin walbahaar leh. Laakiin waan soo fahmayaa oo waan ogahay in ay tani tahay wax aan doonayo in ay noqoto xirfaddaydu. "*

**Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa -** Baraha ku jira heerka labaad waxay yaqaanaan waxa laga filayo carruurta marka ay joogaan heerarka kala duwan ee koritaanka iyo sida kor loogu qaado waxbarashada. Waxay bilaabayaan inay diiradda saaraan baahida gaarka ah ee carruurta. Waxay sameeyaan xallinta badan oo dhibaatooyinka ah heerkan marka loo eego heerka koowaad,oo iyaga oo helaya taageero iyo hagitaan, waxay ka fikiraan khibradahooda iyo waxqabadkooda si ay u horumariyaan hab dhaqankooda. Barayaasha ku jira heerkani waxay la wadaagaan macluumaadka xubnaha qoyska wax ku saabsan qiimaynta iyo sida ay ugu xirantahay agabka iyo hawlaha la bixiyo si kor loogu qaado koritaanka. Wuxuu aqoonsadaa kala duwanaanshaha shakhsi ahaaneed ee carruurta waxayna uga jawaabaan si habboon; Wuxuu hubiyaa in carruurtu badbaado qabaan, caafimaad qabaan, oo ku raaxaysanayaan waayo-aragnimada wakhtiga cuntada iyaga oo si fiican u nafaqaysan; wuxuu hubiyaa in goob dhaqan iyo luqad ahaanba warqab ah; oo uu ka qayb qaataan hawlaha horumarinta xirfadeed.

***Sheekada Angelique*** *: Angelique ayaa tiri, "Hadda maadaama oo aan dhaafay aasaaska, waxaan diiradda saari karaa ilmo kasta wax badan. Waxaan ogahay hawlo badan waxaanan ku beegi karaa waxa ilmuhu u baahan yahay inuu barto. Waxaa ii fududaaneysaa in aan wax ka beddelo qorshahayga maalinta si aan u sahamiyo waxa uu ilmuhu xiiseeyo. Hadda waxaan runtii ka fikiraa ficilladayda iyo hawlaha aan qabto iyo in ay shaqeeyeen; Waxaan ka fikiraa sida ay carruurtu iiga falceliyaan iyo hawlaha aan bixiyo; oo waxaan ka fikirayaa waxa aan samayn lahaa si aan wax uga beddelo haddii aan mar kale sameeyo wax la mid ah. Waxaan dareemayaa inaan haysto diyaarinta qolalka iyo meelaha kaydinta ee u shaqeeya ganacsigayga iyo qoyskayga labadaba. Waxaan ogaaday inaan weli u baahanahay inaan tijaabiyo siyaabaha aan wax uga dhigi karo inay shaqeeyaan mark ay carruurtu sii korayaan ama ilmo cusub ku soo biiro kooxda. Wali waxaan jeclahay in aan la hadlo daryeel bixiyeyaasha kale ee bulshadayda laakiin waxaan doonayay in aan si rasmi ah uga qaybqaato. Waxaan la xiriiray kooxda taageerada daryeel bixiyayaasha deegaanka iyo ururka xirfadleyda oo aan si joogto ah u tagaa kulamadooda. Waxaan awoodaa inaan la haadlo, la wadaago macluumaad, la xaliyo dhibaatada oo aan wax badan ka barto kooxdan asxaabta shaqo ah. Waxaan si adag uga shaqeeyay buug-gacmeedka waalidka sidaa darteed waxaan ku kalsoonahay inaan helay xeerar wanaagsan. Waxa kale oo aan dareemaa in aan*

*si kasii wanaagsan u fahmay miisaaniyada oo hadda waxaan awoodaa in aan meel gooni ah u dhigo kharashyada soo socda iyo mustaqbalkayga. Waan jeclahay inaan aado fasalka laakiin aan doorto fasallo iyo tababaro ku habboon waxyaabo gaarka ah ee aan ka shaqeynayo."*

**Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaaa -** Daryeel bixiyeyaasha heerkan ahi waxay si hal abuur leh u naqshadeeyaan deegaankooda iyo waaya-aragnimadooda waxbarasho. Waxay si miyirqab leh ugu jawaabaan carruurta oo ay la qabsadaan qorshahooda. Waxay ku tusaaleeyaan, hagaan oo baraan dadka waaweyn ee kale ee guriga daryeelka carruurta qoyska. Waxay qaadaan mas'uuliyadda in ay ula socdaan cilmi-baarista oo ay ka shaqeeyaan si ay u waafajiyaan dhaqankooda iyo hababka ugu wanaagsan. Daryeel bixiyeyaasha naqshadeeya oo hoggaamiya waxay sii wadaan inay dejiyaan yoolalka horumarkooda xirfadeed oo ay ballaariyaan fahamkooda. Waxay qiimeeyaan oo doortaan manhaj ku salaysan cilmi-baaris iyo waxa ay ka yaqaanaan carruurta ku jirta kooxdooda; waxay sameeyaan oo ay falanqeeyaan qiimaynta waxayna u isticmaalaan macluumaadkan si ay u hagaan daryeelka iyo waxbarashada; waxay la xiriiraan oo ay la shaqeeyaan qoysaska; waxayna yaqaanaan hawl-wadaagyada bulshada iyo sida loo agaasimo adeegyada carruurta hadba sidii loo baahdo. Si muhiim ah, bixiyayaashani waxay isticmaalaan habab rasmi ah iyo kuwo aan rasmi ahayn si ay u qiimeeyaan una horumariyaan barnaamijkooda.

***Sheekada Barbara:*** *Barbara waxay tidhi, "Sanadihii la soo dhaafay, waxaan soo qaatay tiro hawlo iyo fikrado ah oo aan ka soo qaatay manhajyo kala duwan. Hadda waxaan kala soo bixi karaa waxa ugu fiican waxa aan bartay. Sababtoo ah waxaan helay xeelado iyo fikrado hawleed kala duwan, waxaan si ka sii dabacsan oo hal abuur leh u dabooli karaa baahiyaha isbeddelaya ee shakhsiyaadka iyo kooxdayda. Isla sidaas oo kale ayaa run u ah kaydinta diiwaanka iyo xisaabinta. Waxaan bartay dhowr qalab oo hadda waxaan sameeyay wax aniga ii shaqeeya. Waxaan ka fikiraa inta wax ee aan ka bartay dadka kale bilowgii xirfadeyda, waxaana aaminsanahay in la joogo wakhtigii aan dib u caawin lahaa xirfada shaqo. Markaa waxaan bilaabay tabobar si aan dadka kale ula wadaago waxa aan aqaano oo waxaana ka baaraan degayaa (waxaan ku soo noqday heerka koowaad ee horumarinta xirfadayda ee aaggan) sidii aan u noqon lahaa tababare la ansixiyay diiwaankayaga. Waxa aan si mutadawacnimo ah isugu xilqaamay in aan ka mid noqdo kooxda qorshaynta ee shirka daryeelka carruurta qoyska ee deegaankayaga.*

## Dabeecadaha/Astaamaha

Intaa waxaa dheer, xagga aqoonta iyo xirfadaha loo baahan yahay, daryeel bixiyeyaasha ugu waxtarka badani waxay leeyihiin dabeecado tayo gaar ah. Dabeecadaha ayaa lagu tilmaamay inay yihiin u janjeeritaanka ama u leexsanaanta in loo dhaqmo dhaqmo siyaabo gaar ah. Dabeecadahani waxay saameeyaan sida dadku ula falgalaan dadka kale. Kuma jiraan liiska halbeegyada ama kartiyaha sababtoo ah waxaa loo tixgeliyaa "xirfado jilicsan" oo adkaan kara (laakiin aan ahayn kuwo aan macquul ahayn) in la baro iyo/ama la cabbiro. Astaamahani waa muhiim in la aqoonsado waana la xoojin karaa. Dhawr, laakiin aan dhammaantood ahayn, ayaa hoos ku taxan oo loogu talagalay in qofku naftiisa dib ula milicssado.

Liistada waxaa la sameeyay iyadoo la aqoonsanayo mawduucyada guud ee laga helay wada-hadallada ay qabteen daryeel bixiyeyaasha dhaqan ahaan, juquraafi ahaan iyo barnaamij ahaanba kala duwan ee Minnesota. Kooxaha

ka qaybqaatay doodaha dabeecadaha waxaa ka mid ah: macallimiinta dhallaanka, macallimiinta ilmaha aan weli gaarin da'da iskuulka, tababareyaasha, bixiyeyaasha daryeelka carruurta qoyska, daryeel bixiyeyaasha waalidka ah, la taliyayaasha caafimaadka dhimirka, shaqaalaha bulshada iyo macallimiinta kulliyadaha tacliinta sare. Inkasta oo kooxaha dhaqan ahaan kala duwani ay isticmaaleen kelmado isku mid ah si ay u qeexaan dabeecadaha la rabo, waxay u qeexeen habab kala duwan oo mid walba lagu muujiyo.

- Waa mid naxariis badan, u nugul baahida dadka kale iyo dareen shucuur ahaan la heli karo.
- Wuxuu leeyahay dareen kaftan wuxuuna noqon karaa mid cayaar badan.
- Waxa uu leeyahay xiisayn caruurnimada oo kale.
- Waxa uu noqon karaa mid dabacsan, hal-abuur leh oo khayraad waxtar leh.
- Wuxuu waydiiyaa su'aalo, muujiyaa xiisaha waxbarashada wuxuu ka tarjumayaa dhaqamada hadda jira si ay u wanaajiyo hab dhaqanka.
- Wuxuu jecel yahay carruurta wuxuuna aaminsan yahay inay awood u leeyihiin inay wax bartaan.
- Wuxuu qabaa rajo marka uu la kulmo caqabado.
- Wuxuu iskaashi la yeeshaa dadka kale.
- Wuxuu aad u xiiseeya la shaqaynta carruurta yaryar.
- Wuxuu u muujiyaa ixtiraam naftiisa iyo dadka kaleba.
- Wuxuu qiimeeyaa oo qaddariyaa kala duwanaanshaha; waa qof aan la yaabin.
- Wuxuu muujiyaa daacadnimo heer sare ah.
- Wuxuu u furanyahay fikradaha iyo qaaciidooyinka cusub.

Bixiyeyaasha Daryeelka Carruurta Qoyska ayaa aqoonsaday dhowr dabeecadaha ganacsiga ah oo dheeraad ah. Daryeel bixiyeyaasha ayaa sheegay inay u baahan yihiin (in ay noqadaan) qof:

- Aragti dheer
- Khatarta u bareera
- Go'aan qaatayaal ah
- Horay u jeed ah
- Abaabulan
- Joogto ah
- Hal-abuur ganacsi le
- Daacadnimo leh
- Dhab ay ka tahay
- Hadle/xiriiriye wanaagsan ah

Intaa waxaa dheer, dhowr caadooyin shaqo oo guud ayaa ka caawiya qofka inuu si guul leh ula shaqeeyo carruurta yaryar:

- Waa mid wakhtiga ilaaliya oo masuul ah.
- Wuxuu daryeelaa nadaafadda shakhsi ahaaneed oo u labbistaa si ku habboon hawsha.
- Wuxuu filaya oo ku jawaabaa dabacsanaan isbeddelka joogtada ah.
- Wuxuu la shaqeeyaa dadka kale iyo in uu yahay xubin koox ahaan.
- Aqbalaa rayi celinta wax ku oolka ah oo uu wax ka bartaa khaladaadka.
- Si habboon ayuu wax u dhegaystaa oo uga jawaaba.

# Qaabdhismeedka Aqoonta iyo Kartida ee Minnesota ee Xirfadlayaasha Carruurnimada Hore: La shaqaynta dhallaanka iyo socod baradka

Noocani wuxuu diiradda saarayaa halbeegyada iyo kartiyahaa ay u baahan yihiin daryeel bixiyeyaasha kula shaqeeya carruurta guryaha daryeelka carruurta qoyska. Dukumeentiga waxaa loogu talagalay inay isticmaalaan daryeel bixiyeyaasha, tababarayaasha iyo barnaamijyada waxbarashada diyaarinta. Halbeegyada Guddiga Waxbarista (Board of Teaching) (BOT) oo ku jira dukumeentigan ayaa waxay isticmaalaan ereyga "macallin" si ay u muujiyaan dadka qaata shatiga waxbaridda. Dhammaan kuwa la shaqeeya carruurta "wax bay u baraan" siyaabo badan. Erayga "daryeel bixiye ayaa la bedelay noocaan.

Ereyo badan ayaa loo isticmaalaa in lagu qeexo dadka ku bixiya daryeelka iyo waxbarashada guryahooda sida: bixiyeyaasha daryeelka carruurta ee shatiga leh, daryeelayaasha iyo barayaasha daryeelka carruurta qoyska. Dadkan u heellani waxay qabtaan shaqooyin badan marka ay gudanayaan waajibaadkooda. Waxay daryeelaan, koriyaan oo ay wax baraan carruurta yaryar, oo ay taageeraan oo ay la iskaashadaan waalidiinta, waxay bixiyaan adeegga cuntada, waxay ilaaliyaan deegaanka oo ay ka shaqeeyaan ganacsi yar. Kooxda la talintu waxay ku taliyeen in "Bixiyaha daryeelka carruurta qoyska la isticmaalo inta badan dukumeentiga oo dhan" milkiilaha ganacsiga yar" loo isticmaalo qaybta ganacsiga.

Erayga "qoysaska" waxaa ku jira waalidiinta, mas'uuliyiinta, walaalaha, awoow/ayeeyada, xubnaha qoyska ee korinta ku meelgaarka ah, iyo dadka kale ee ku lug leh daryeelka iyo waxbarashada ilmaha. "Waalidiinta iyo dadka masuulka ka ah" waxaa loo isticmaali doonaa in lagu tixraaco kuwa sharci ahaan mas'uulka ka ah ilmaha.

Noocyada dheeraadka ah ee qaabdhismeedka waxaa ka mid ah: Qaabdhismeedka Aqoonta iyo Kartida Minnesota ee Xirfadlayaasha Carruurnimada Hore: La shaqaynta dhallaanka iyo socod baradka; Qaabdhismeedka Aqoonta iyo Kartida Minnesota ee Xirfadlayaasha Carruurnimada Hore: La shaqaynta Carruurta da'da iskuulka kahor ee Barnaamijyada Xarunta iyo Barnaamijyada iskuulka; iyo Xirfadaha Muhiimka ah ee Da'da Iskuulka ee Minnesota loogu talagalay Xirfadlayaasha la shaqeeya da'da iskuulka iyo Daryeelka Dhalinyarada ee la shaqeeya carruurta da'doodu tahay 5 ilaa 12 iyo qoysaskooda. Kuwaas waxaa laga heli karaa bogga Waxbarashada Hore ee websaydka Waaxda Waxbarashada ee Minnesota. Halbeegyada iyo kartiyaha maamulayaasha iyo tababarayaasha ayaa ka baxsan xadka mashruucan.

Dhammaan dadka isticmaalaya dukumeentigan waa inay fahmaan baahida carruurta ka imanaysa dhaqan, luqado, dhaqan-dhaqaale iyo deegaano kala duwan. Dood dheer ka dib, waxaa la go'aamiyay in xirfadaha loo baahan yahay in lagu daro carruurta ka soo jeeda asal kala duwan iyo sidoo kale kuwa naafada ah iyo qaba baahiyaha daryeelka caafimaadka in lagu dhex dari doono dukumeentiga oo dhan. Mawduucyadani waxay lagama maarmaan u yihiin dhammaan dhinacyada shaqada ee carruurta iyo qoysaska.

# Khayraadka

Dukumeentigani waa mid ka mid ah khayraad badan oo loo abuuray daryeel bixiyeyaasha Minnesota. Waxay la jaan qaaday agabka kale ee ay soo saareen Waaxaha Waxbarashada , Adeegyada Aadanaha iyo Caafimaadka ee Minnesota oo ay ku jiraan halbeegyada waxbarashada carruurnimada hore ee Minnesota, qalabka hagaha xirfada ee kombiyuurka lagaga qaybqaadanayo, diiwaanka shabakada xirfada shaqo iyo horumarinta xirfadda. Si aad u heshid macluumaad dheeri ah, khayraad iyo hagitaan, la xiriir Xarunta Horumarinta Xirfadlayaasha iyo Daryeelka ka Warqaba Carruurta ee Minnesota. Khayraad dheeraadka ah ayaa ku jira dhamaadka dukumeentigan.

# 2020 Wax ku kordhinta lagu sameeyey Qaabdhismeedka Aqoonta iyo Kartida

Iyada oo ku salaysan rayi celin ka timid xirfadlayaasha daryeelka carruurnimada hore iyo waxbarashada ee ku jira xirfada shaqo iyo isbeddelada uu sameeyey Gobolka Minnesota, saddex qaybood oo dheeraad ah ayaa lagu daray si loo wanaajiyo dukumeentiga Qaabdhismeedka Aqoonta iyo Kartida. Qaybahani waxay hagi doonaan oo ka caawin doonaan xirfadlayaasha daryeelka carruurnimada hore iyo waxbarashada aqoonta iyo xirfadaha ay u baahanyihiin si ay carruurta iyo qoysaska u siiyaan waxbarasho tayo leh: Mas'uuliyadda Hiddaha Dhaqanka iyo hab-dhaqanka, Habdhaqan iyo Daryeel warqab u ah Dhaawaca masiibada, iyo La shaqaynta Caruurta iyo Qoysaska ku Hadla Luqadaha Badan.

## Mas'uuliyadda Hiddaha Dhaqanka iyo hab-dhaqanka

Dhaqanku waa muraayada uu qofkasta oo bini aadam ahi ku fahmo kulana xiriiro adduunka. Waxay saamaynaysaa fahamka qofka ee wakhtiga, xiriirka, iyo sida loo wajaho hawsha gacanta ku jirta. Xirfadle carruurnimada hore ahaan waa lama huraan iyo mas'uuliyaddeena inaan fahamno muraayadda hiddaha dhaqameed ee qofka iyo sidoo kale carruurta iyo qoysaska aan kula kulanno la dhaqankeena isdhexgalka maalinlaha ah.

Nidaamyada Aqoonta Qoyska iyo Bulshada ayaa ah hababka lagu gudbiyo dhaqanka oo lagu xaqiijinta. Nidaamyadan waxaa ka mid ah siyaabaha carruurta, iyo qoysaska iyo bulshooyinka ay ku dhex jiraani, u bartaan oo ay ula macaamilaan adduunka. Tusaale ahaan, horumarinta dabeecadda, caddaaladda iyo mas'uuliyaddu waa hantida muhiim ah oo nolosha oo dhan joogaya oo ka dhex jira nidaamka aqoonta qoyska iyo bulshada waxayna si xooggan ula xiriiraan sinnaanta.¬

Fikradahani waxay si weyn uga dhex muuqdaan nolosha carruur badan oo midab leh, waxayna ogaadaan marka qiyamka sinnaantu uusan ka dhex muuqan waayo-aragnimada xirfadlayaasha carruurnimada hore. Arrimaha sinnaanta ayaa waxay soo muuqdaan horraanta nolosha da' yarta iyada oo soo maraysa waaya-aragnimada waalidiinta, awoow/ayeyaasha, walaalaha waaweyn, xubnaha qoyska ee kale, iyo asxaabta. Aqoonta iyo kartida la xiriirta nidaamyadan aqoonta qoyska iyo bulshada ayaa udub dhexaad u ah ku daritaankan waxayna ku dhex jiraan dhammaan qaybaha mawduuca/nuxurka ee dukumeentiga.

Xirfadlayaasha daryeelka carruurnimada hore ee bixiya daryeelka carruurta qoyska ayaa ku jira goobo kala duwan. Daryeel bixiyeyaasha qaarkood ayaa keligood shaqeeya, halka kuwa kalena laga yaabo in ay leeyihiin shaqaale wakhti dhiman ah. Qaarkood waxay ku yaalaan Minnesota Qaybaha Kore halkaas oo helitaanka adeegyadu u baahan yihiin safarka masaafo aad u dheer. Kuwo kale waxaa laga yaabaa in ay joogaan aagagga magaalooyinka, laakiin si sahlan ayna u heli karin gaadiid. Inkasta oo qaar badan oo ka mid ah kartiyahan ay ku jiri karaan tixraaca dadka wada shaqeeya, asxaabta shaqada, ama shaqaalaha, waxaa loo qaabaysan karaa si ay ugu habboonaadaan duruufaha daryeel bixiyeyaasha keligood shaqeeya. Tusaale ahaan, kartida u baahan wada hadal ama waxqabad lala yeesho qofka aad wada shaqaynaysaan ama saaxiibada shaqada ayaa waxay ku qabsoomi kartaa taleefoon iyada oo hawlaha si madaxbanaan loo samaynayo iyo wakhtiyo loo qoondeeyay si ay isula kulmo

## Daryeel iyo Hab Dhaqan ka Warqaba Dhaawaca Masiibada Nuxurka Aagga IX

Dhammaan carruurta iyo qoysaska ka qaybqaata daryeelka caruurnimada hore iyo waxbarashada iyo adeegyada kale ee carruurnimada hore waxay la yimaadaan waayo-aragnimadooda iyaga si la mid ah sida ay sameeyaan dadka bixiya adeegyadan. Waayo-aragnimadaasi waxay qaabeeyaan fahamka iyo rajada laga filayo cilaaqaadka,

in dunidu tahay meel ammaan ah oo lagu sahamiyo oo wax lagu barto, in aynu nahay u qalano daryeelka iyo caawinta, iyo sida ay u korayso maskaxda carruurta yaryar. Nasiib darro, dhaawaca masiibada iyo heerarka sarreeya ee welwelka ayaa dhammaantood ah kuwo aad u badan waxayna si xun u saamayn karaan korriinka maskaxda, oo ay ku jiraan awoodda aan u leenahay in aan maaamulno shucuurta dareenka iyo hab dhaqanka, xiriirrada iyo waxbarashada. Marka loo eego cilmi-baarista ay samaysay Waaxda Caafimaadka ee Minnesota in ka badan kala bar dadka reer Minnesota waxay la kulmeen ugu yaraan hal ACE (tilmaamaysa toban waayo-aragnimo carruurnimo oo suurtogal ah inay buuxiso qeexida dhaawaca masiibada), oo kuwa, in ka badan kala bar ayaa la kulmay laba ama in ka badan oo ah ACE. Carruurta yaryar ayaa ah kuwa ugu nugul saamaynta xun ee dhaawaca masiibada iyo kuwa ugu adkeysiga badan saamaynahan xun marka uu jiro cilaaqaad ka celinaya; sababtoo ah ilmaha yar maskaxdiisu si xawli ah ayey u koraysaa.

Xirfadlayaasha carruurnimada hore waxay la falgalaan carruurta yaryar iyo waalidkood wakhti xasaasi ah, keliya aan ahayn oo kaliya horumarka carruurta, laakiin sidoo kale horumarinta xiriirka waalidka iyo ilmaha. Ka warqabka saamaynta dhaawaca masiibadu ku leedahay korriinka iyo hab dhaqanka carruurta ayaa waxay fududayn kartaa awoodda daryeelayaasha si ay u tarjumaan dabeecadda iyo ka jawaabista siyaabaha kor u qaadaya adkaysiga iyo kabashada, aan ahayn oo kaliya carruurta iyo waalidkood, laakiin sidoo kale naftooda.

Aagga Mawduuca ee Daryeelka iyo Dhaqanka Warqabka u ah Dhaawaca masiibada waxaa loogu talagalay in lagu qeexo halbeegyada iyo waxyaabaha laga filayo ee ku saabsan aqoonta iyo xirfadaha lagama maarmaanka u ah dadka la shaqeeya dhallaanka, carruurta yaryar, qoysaskooda iyo daryeel-bixiyeyaasha laga yaabo inay la kulmeen dhaawaca masiibada. Dhaqannada ugu wanagsan waa inay ahaadaan kuwo korriinka warqab ka ah, warqab ka ah dhaawaca masiibada iyo mid xiriirka ku saleysan si kor loogu qaado adkeysiga carruurta, iyo sidoo kale adkeysiga qoysaskooda iyo daryeel bixiyeyaasha. Ka warqabka calaamadaha dhaawaca masiibada ee carruurta, qoysaska iyo nafteena ayaa kor u qaadaysa awoodeena in aan si wanagsan ugu daboolno baahiyaha dadka aan la shaqayno iyada oo loo marayo xiriirada taageerada iyo u gudbinta ilaha bulshada ee dhaawaca masiibada.

Marka nuxurka aaggan lagu dabaqayo Daryeelka Carruurta Qoyska, waa in la aqoonsado in daryeel bixiyeyaasha FCC ay inta badan ku shaqeeyaan meel gooni ah oo ay daryeelaan kooxo da' faran badan. Iyadoo KCF-da warqabka u ah dhaawaca masiibadu ay khuseeyaan dhammaan goobaha daryeelka carruurnimada hore iyo waxbarashada, gudaha FCC waxay si gaar ah muhiim ugu tahay daryeel bixiyeyaasha inay iska kaashadaan nidaamyada oo ay aqoonsadaan taageerada naftooda marka loo baahdo si looga hortago dhaawaca masiibada la isugu gudbiyo iyo ka daalitaanka.

Following are some resources which may be helpful:

- La talinta Caafimaadka Dhimirka ee Carruurnimada Hore ayaa waxaa laga heli karaa dhammaan 87-da degmo iyo gudaha labada qaran ee qabaa'ilka. La taliyeyaashu waa xirfadlayaasha caafimaadka dhimirka ee qandaraas kula jira Gobolka Minnesota oo khibrad u leh horumarka carruurta yaryar iyo adeegyada carruurnimada hore. Lataliyayaasha ECMH waxay bixiyaan adeeg lacag la'aan ah gudaha daryeelka carruurnimada hore iyo deegaan waxbarasho si ay u taageeraan horumarka dareenka bulshada-shucuurta ee carruurta yaryar. DHS-ECMH@state.mn.us
- Xarunta Daryeelka Carruurta ee loo Dhan yahay waxay bixisaa horumarinta xirfadeed ee cilaaqaadka ku salaysan oo bilaash ah (RBPD) oo ay ku jiraan taageero, tababar, tusaalayn, iyo khayraadka barnaamijyada daryeelka carruurta ee Minnesota oo dhan. www.inclusivechildcare.org
- Qalabka Dhaawaca Masiibada iyo Soo Kabashada ayaa si gaar ah loogu talagalay dhallaanka iyo xirfadlayaasha carruurnimada hore waxaana ku jira khayraadka warqabka u ah dhaawaca masiibada, agab kabashadu ay udub dhexaad u taahay si ay kaaga taageerto shaqada aad la leedahay daryeel bixiyeyaasha carruurta ah dhalmada kahor ilaa da'da 6. Waxaa hoy u ah Ururka Minnesota ee Caafimaadka Maskaxda

ee Carruurta, khayraadka waxaa ka mid ah daabacado, fiidiyowyo, muuqaallo, cutubyo waxbarasho qoto dheer iyo tababarro kaydsan oo dheeraad ah. www.macmh.org/toolkit

- The National Children's Traumatic Stress Network (Shabakadda Qaranka ee Welwelka Dhaawaca Masiibada ee Carruurta) Sha www.nctsn.org
- Xarunta loogu talagalay Ilmaha Soo Koraya https://developingchild.harvard.edu/

## La shaqaynta Caruurta iyo Qoysaska ku Hadla Luuqadaha Badan Nuxurka Aagga X

Si la mid ah sida dhammaan carruurta yaryar, carruurta ku hadasha luqadaha badan waxay soo galaan goobta daryeelka carruurnimada hore iyo waxbarashada iyagoo leh aqoon badan. Waxay horeba wax badan ugu barteen guriga iyo bulshadooda dhexdeeda. Waxay diyaar u yihiin inay waxbarashada ku sii wataan deegaan daryeel iyo jawaab celin leh. Barayaashu waxay fahmaan in marka lala shaqaynayo dhammaan carruurta, gaar ahaan carruurta ku hadasha luqadaha badan, ay lama huraan tahay:

- In la fahmo baahidooda waxbarasho ee gaarka ah
- In laga fikiro sida caqiidada shakhsi ahaaneed ee ku saabsan dhaqanka iyo luqadda ay ula mid noqon karto, ama uga duwan yihiin, kuwa carruurta iyo qoysaska aan u adeegno.
- In loo doodo ka qaybgelinta xoogga ku salaysan, oo diiradda saaraya luqadda
- In kor loo qaado sinnaanta, deegaan dhaqanahaan ku habboon dhammaan carruurta ku hadasha luqadaha badan
- In uu yaqaano sida loogu xirmo WIDA Halbeegyada ama Halbeegyada Horumarinta Luqadda carruurnimada Hore ee Minnesota iyo Tilmaamayaasha Horumarka ee Carruurnimada Hore ee Minnesota
- La shaqaynta Caruurta iyo Qoysaska Luqadaha badan ku hadla oo ah aag/mawduuc cusub ayaa ka caawinaysa xirfadlayaasha daryeelka carruurnimada hore iyo waxbarashada inay fahmaan waxa ay u baahan yihiin inay ogaadaan oo ay awoodaan inay sameeyaan marka ay la shaqaynayaan carruurta luqadaha badan ku hadasha iyo qoysaskooda oo ay u adeegsadaan Waxqabadyada Muhiimka ah ee Sannadaha Hore ee WIDA in ay yihiin barta ay barayaashu ka galaan inta ay ka fikirayaan shaqadooda.

Way caddahay in "Carruurta la siiyo fursad ay ku horumariyaan aqoonta laba ama in ka badan oo luqadood horraanta noloshooda ay ka faa'iideysanayaan awooddooda ay ku wada xiriiraan in ka badan hal luqad..." (National Academies of Sciences, 2017, p.148). Si kastaba ha ahaatee, cilmi baaris xaddidan oo ku saabsan saamaynta cayiman ee barnaamijyada ECE ay ku leeyihiin horumarinta MLL kuwa ah dhallaanka iyo socod baradka ayaa jirta wakhtigan (Academies National Sciences, 2017). Sababtan awgeed, kartiyaha loogu talagalay La shaqaynta Carruurta iyo Qoysaska ku Hadla Luuqadaha Badan waxay ahaanaysaa sida ay tahay la shaqaynta caruurta aan da'da iskuulka gaarin (Preschoolers). Xirfadlayaasha carruurnimada hore ee daryeela oo wax bara dhallaanka iyo socod baradku waa inay tixraacaan mawduuca korriinka guud, horumarinta luqadda oo ay u adeegsadaan aqoontooda carruurta ku jirta daryeelka, iyagoo sidoo kale tixgelinaya aqoonta iyo kartiyaa la xiriiraa Bartayaasha Luqadaha Badan (MLL) iyo qoysaskooda.

Wixii macluumaad dheeraad ah:

Akadeemiyada Qaranka ee Sayniska, Injineeriyadda, iyo Caafimaadka. (2017). Kor u qaaddida guusha waxbarasho ee carruurta iyo dhalinyarada baranaysa Ingiriisiga: Mustaqbalo rajo leh. Madbacadda Akademiyada eeQaranka.
https://doi.org/10.17226/24677

---

Ku daritaanada waxaa la suurta geliyey iyadoo la adeegsanayo maaliyad federaali ah, 93.434 - ESSA Deeqda Horumarinta Preschool Preschool-ka Dhalashada illaa Shan (Development Grants Birth through Five).

Ka qaybqaatayaasha wax ku biirinta 2020:

*Mas'uuliyadda Hiddaha Dhaqanka & hab-dhaqanka*

- Betty Emerita, Development & Training, Inc
- Richard Chase, Wilder Research

*Daryeel & Hab Dhaqan ka Warqaba Dhaawaca Masiibada*

- Jane Ellison, LMFT, IMH-E (IVC)
- Michelle Fallon, LICSW, IMH-E Mentor, Infant and Early Childhood Mental Health Consultant.

*La shaqaynta Caruurta iyo Qoysaska ku Hadla Luuqadaha Badan.*

- Patricia Blanco, M. Ed. WIDA Professional Learning Specialist
- Lorena Mancilla, PhD Director of WIDA Early Years

1

# Nuxurka Aagga I:
# **Koritaanka iyo Barashada Caruurta**

## Halbeegga PELSB

***Bixiyaha daryeelka carruurta qoyska ee carruurta yaryar waa in uu fahmayo horumarka iyo waxbarashada caruurta.***

Daryeel bixiyuhu waa inuu fahmo:

- saldhigga cilmi baarista iyo hab dhaqanada ugu wanaagsan waxbarashada carruurnimada hore.
- horumarka jireed, bulsho, shucuureed, luqadda, garasho, iyo hal-abuurka carruurta yaryar laga bilaabo dhalashada ilaa da'da siddeed.
- sida ay carruurta yaryar ugu kala duwan yihiin korritaankooda iyo waxbarashadooda, iyo hababka taageeraya kala duwanaanshahan.
- aragtiyada ugu waaweyn ee korriinka iyo waxbarashada carruurnimada hore iyo saamaynta ay ku leeyihiin u adeegsiga carruurta yaryar laga bilaabo dhalashada ilaa da'da siddeed iyo qoysaskooda.
- fikradaha "ka mid ahaanshaha" iyo "isku xirnaanta qoyska" in ay muhiim u yihiin horumarka carruurta yaryar.
- in carruurta sida ugu wanaagsan loo fahmo iyada oo loo eegayo xaaladda qoyska, dhaqanka, iyo bulshada.
- xiriirka ka dhexeeya dhaqanka, luqadda, iyo fikirka iyo shaqaynta luqadda hooyo ee horumarinta carruurta yaryar.

## Kartiyaha

### A. Fahamka Koritaanka Carruurta

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| I.A.1 | Wuxuu aqoonsadaa dhammaan dhinacyada horumarka oo ay ku jiraan jir ahaan, bulshaynta iyo dareenada/shucuureed, haqaynta garaadka (qorshaynta, abaabulka, iyo la socodka dabeecadaha ku jihaysan yoolka), garashada, hal-abuurka iyo luqadda | Wuxuu doortaa oo adeegsadaa dhaqanka ugu wanaagsan ee hadda jira, cilmi-baarista ku saleysan, iyo dhaqamada hiddaha dhaqanka ee ku habboon si loo dhiirrigeliyo aasaaska horumarka oo ay ku jiraan jir ahaan, bulsho ahaan iyo shucuur ahaan, shaqaynta garaadka, garashada, hal-abuurka, iyo luqadda | Wuxuu naqdiyaa oo u faahfaahiyaa shaqaalaha, shaqaalaha, qoysaska iyo xubnaha bulshada aragtiyaha waaweyn iyo hababka ugu wanaagsan ee cilmi-baaris ku salaysan iyo dhaqamada hiddaha dhaqanka ee ku habboon ee la xiriira caafimaadka carruurta iyo korriinka jirkooda, luqadda, akhris-qoraalka, garashada, bulshaynta iyo shucuurta, shaqaynta garaadka iyo horumarka hal-abuurka |
| I.A.2 | Wuxuu qeexaa sida horumarka hal meel ahu uu u saameeyo horumarka meelaha kale | Wuxuu bixiyaa tusaalayaasha xiriirka ka dhexeeya caafimaadka carruurta iyo korriinka jirkooda, luqadda, akhris-qoraalka, garashada, bulshaynta iyo shucuurta, iyo horumarka hal-abuurka | Wuxuu u sharaxaa shaqaalaha, qoysaska iyo bulshada aragtiyaha waaweyn iyo cilmi baarisyo la xiriirta saamaynta ay horumarka hal meel ahi ku leedahay meel kale iyo sidoo kale sida kala duwanaanshiyaha horumarka ay u saameeyaan qoyska, dhaqanka, luuqada iyo deegaanku |
| I.A.3 | Wuxuu aqoonsada horumarku ku yimaado qaabab la saadaalin karo kuwaas oo lagu aqoonsaday halbeegyada waxbarashada carruurnimada hore | Wuxuu bixiyaa tusaalayaal horumarka jireed, bulsho, shucuureed, garasho iyo luqadeed ee lagu aqoonsaday halbeegyada waxbarashada hore | Wuxuu u sharaxaa halbeegyada waxbarashada carruurnimada hore shaqaalaha, qoysaska iyo xubnaha bulshada |
| I.A.4 | Wuxuu aqoonsadaa waxbarashada ku jirta ciyaarta dhexdeeda, isdhexgalka dadka kale, iyo marka ilmuhu sahamiyo agagaarka | Wuxuu bixiyaa tusaalayaal waxa ay carruurtu ku bartaan ciyaarta, isla falgalka dadka kale iyo sahaminta agagaarkooda | Wuxuu u sharaxaa shaqaalaha, qoysaska iyo bulshada ujeedada laga leeyahay hababka ula kaca ah ee hababka waxbaridda ee caddaynta ku salaysan oo ay ku jiraan cilaaqaadka badbaado ah, xasilloon, kobcin leh, ciyaarta, isdhexgalka kooxaha tirada yar, xalinta dhibaatada, iyo sahaminta. ¬ |

## B. Fahamka Waxyaabaha Saameeya Koritaanka Carruurta

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| I.B.1 | Wuxuu qeexaa sida waayo-aragnimada carruurnimada hore ee carruurta yaryar ay u saameeyaan koritaankooda iyo horumarkooda | Wuxuu sheegaa muhiimada waayo-aragnimada carruurnimada hore iyo xiriir ilmaha iyo waalidku u leedahay horumarinta maskaxda iyo aasaaska shaqo fulinta (qorshaynta, abaabulka, iyo la socodka dabeecadaha ku jihaysan yoolka)¬ | Wuxuu falanqeeyaa oo adeegsadaa fahamka aragtida hadda jirta iyo cilmi-baarista lagu sameeyo kor u qaadista waxbarashada iyo horumarka carruurta |
| I.B.2 | Wuxuu qeexaa sida carruurtu ugu koraan heerkooda shakhsiyeed iyo marka la eego macnaha guud ee dhaqankooda iyo qoyskooda | Wuxuu bixiyaa tusaalayaal ku saabsan sida dhaqanka, luqadda iyo xoogga qoyska iyo caqabaduhu u saameeyaan horumarinta xirfadaha | Wuxuu falanqeeyaa saamaynta/duufsiga qodobada deegaanka, sifooyinka qoyska, hiddaha dhaqanka iyo luqadaha, iyo hababka kala duwan oo wax lagu barto ay ku leeyihiin horumarka wuxuuna ka adeegsadaa macluumaadka si uu u sameeyo hadafyada shakhsiga loo dejiyey oo wax lagu baro |
| I.B.3 | Waxa uu aqoonsan yahay in carruurtu ay u baahan yihiin saldhig adag xagga luqadda guriga iyo dhaqanka | Wuxuu muujiyaa muhiimada ay leeyihiin luqada guriga iyo dhaqanku isagoo siinaya fursado waxbarasho oo luqadda guriga ah si kor loogu qaado horumarka guud | Wuxuu milicsadaa oo uu aqoonsadaa muhiimada luqadda guriga iyo dhaqanka in ay saldhig u yihiin barashada iyo barashada luqadaha dheeraadka ah; waxa uu horumariyaa howlo waxqabadyo barasho oo taageeraya oo ku dhex daraya afka iyo dhaqanka guriga |
| I.B.4 | Wuxuu aqoonsadaa ku muujinta dabeecadaha ee welwelka iyo dhaawaca masiibadaa | Wuxuu bixiyaa tusaalooyin cawaaqibka koritaaneed ee ka yimaada welwelka iyo dhaawaca masiibada; qodobda difaaca, adkeysiga iyo horumarinta caafimaadka maskaxda; iyo muhiimada ay leeyihiin cilaaqaadka daryeel naxariis le oo lala yeesho qof qaan-gaar ah | Wuxuu baraa qoyska iyo xubnaha bulshada doorka welwelku ka qaato horumarka carruurta yaryar |

## C. Aqoonsiga Kala Duwanaanshaha Shakhsiyeed

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| I.C.1 | Wuxuu u fiirsada kala duwanaanshaha horumarka iyo kartida | Wuxuu qeexaa marxaladaha dhalmada kahor, uurka, dhalashada, dhalmada kadib iyo korriinka ilmaha wuxuuna sharxayaa baaxadda ballaaran ee horumarka habboon | Wuxuu u sharaxaa shaqaalaha, qoysaska iyo bulshada in ay jiraan horumar balaadhan oo haboon oo kala duwan iyo in heerarka shakhsiyeed ay inta badan saameeyaan qoyska, dhaqanka, luqadda iyo deegaanku |
| I.C.2 | Wuxuu aqoonsadaa oo aqbala qaababka waxbarasho ee shakhsiyeed, asalka dhaqameed iyo kartida dhammaan carruurta | Wuxuu fuliyaa dhaqamada ixtiraamka leh oo ay ku jiraan qaabka barashada shakhsiyeed ee ilmaha, asalka dhaqameed, iyo awoodaha waxbarasho | Wuxuu falanqeeyaa, qiimeeyaa oo qorsheyaa isaga ooku salaynaya qaababka barasho ee shakhsiga, macluumaad sax ah oo ku saabsan sooyaalka dhaqameed ee carruurta ee kooxda iyo kartida ee ilma kasta |

2020

## D. Mas'uuliyadda Hiddaha Dhaqanka iyo hab-dhaqanka

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| I.D.1 | Wuxuu aqoonsadaa dhammaan dhinacyada horumarka oo ay ku jiraan jir ahaan, bulshaynta iyo dareenada/shucuureed, haqaynta garaadka (qorshaynta, abaabulka, iyo la socodka dabeecadaha ku jihaysan yoolka), garashada, hal-abuurka iyo luqaddu ay ku xiriirsanyihiin hiddaha dhaqanka Fiiri dukumentariga filimka, "Babies," (http://www.focusfeatures.com/babies)<br><br>a) Wuxuu qeexayaa sida rajada la filayo ee korriinka khaas ahi uu si weyn ugu kala duwanaan karo dhaqamada kala duwan<br><br>b) Wuxuu aqoonsadaa oo magacaabaa qaar ka mid ah filashooyinka kobaca hab dhaqan ahaan ku salaysan ee ka horumarsan halbeegyada Maraykanka ee loo tixgeliyo in ay "caadi" ka yihiin gudaha dhaqankaas. | Wuxuu doortaa oo adeegsadaa dhaqanka ugu wanaagsan ee hadda jira, cilmi-baarista ku saleysan, iyo dhaqamada hiddaha dhaqanka ee ku habboon si loo dhiirrigeliyo aasaaska horumarka oo ay ku jiraan jir ahaan, bulsho ahaan iyo shucuur ahaan, shaqaynta garaadka, garashada, hal-abuurka, iyo luqadda.<br><br>Wuxuu ku daraa dhaqamada waxtarka leh ee ku salaysan cilmi baarista ee ay soo saareen ama ay aqoonsadeen cilmi-baarayaasha midabka leh ee **asal ahaan dhaqanka kasoo jeeda**<br><br>a) Wuxuu diyaariyaa waayo-aragnimo waxbarasho oo u sahlaysa carruurta ka kala socota bulshooyinka dhaqamada kala duwan inay ku dul dhistaan waxyaalaha ku wanaagsan iyo rajooyinka laga qabo koritaanka ee ay aqoonsadeen cilmi-baarayaal asal ahaan dhaqanka kasoo jeeda<br><br>b) Wuxuu bixiyaa tusaalayaal siyaabaha laga filashooyinka korriinka dhaqan ahaan ay ugu dhexjiraan manhajka iyo xeeladaha waxbaridda labadaba wuxuuna wax uga beddelaa habkooda si habboon si ay ugu habboonaato baahiyaha ilma kasta | Wuxuu la abuurtaa dadka ay goobta ka wada shaqeeyaan, qoysaska iyo xubnaha bulshada la qabsiga lagu sameeyo aragtiyaha waaweyn iyo hababka ugu wanaagsan ee cilmi-baaris ku salaysan iyo dhaqamada hiddaha dhaqanka ee ku habboon ee la xiriira caafimaadka carruurta iyo korriinka jirkooda, luqadda, akhris-qoraalka, garashada, bulshaynta iyo shucuurta, shaqaynta garaadka iyo horumarka hal-abuurka¬<br><br>a) Wuxuu sharaxa cilmi-baarista ku salaysan waxa lagu xoog badanyahay ee ku saabsan korriinka ee ay sameeyeen cilmi-baarayaasha midabka ah marka uu la kulmo waalidiinta iyo shaqaalaha oo uu weydiiyaa fikrado ku saabsan sidii loogu dari lahaa barnaamijka<br><br>b) Wuxuu naqshadeeyaa, talo soo jeedin u sameeyaa, oo u doodaa tababbarka horumarinta xirfadeed ee filashooyinka korriinka dhaqan ahaan ku salaysan iyo sida loo aqoonsado loona dhiso |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| I.D.2 | Wuxuu dhiirigeliaa horumarinta dabeecadda ee ilmo kasta, oo ay ku jiraan qiyamka sida daacadnimada, aaminimada, ixtiraamka, caddaaladda, iyo masuulnimada<br><br>Wuxuu u fiirsadaa oo uu qeexi karaa sida qiyamka gaarka ah loogu muujiyay xaalado dhaqameed kala duwan | Wuxuu horumariyaa oo taageeraa dhisidda dabeecadda isaga oo xoojinaya qiyamka carruurta iyo qoysaska kala duwan ee ku jira goobta fasalka<br><br>Wuxuu diyaariyaa waxqabadyo waxbarasho oo muujinaya sida qiyamka loogu muujiyo xaalado dhaqameed kala duwan | Wuxuu tusaaleeyaa oo ku tababaraa horumarinta dabeecadda, iyagoo la kaashanaya qoysaska si ay u samaystaan xeerarka fasalka iyo barnaamijka ee muujinaya qiyamkan |
| I.D.3 | Wuxuu aqoonsadaa xirfadaha bulsheed ee ay qiimeeyaan bulshooyinka dhaqamada kala duwan<br><br>Wuxuu dhiirigeliyaa xirfadaha bulshada ee carruurtu ay u baahan doonaan inay si **wanaagsan ula falgalaan shabakadaha dhaqanka iyo bulshada** | Wuxuu dhiirigeliyaa oo taageeraa xirfadaha bulshada ee carruurtu ay u baahan doonaan inay si wanaagsan ula falgalaan shabakadahooda dhaqanka iyo bulshada<br><br>Wuxuu diyaariyaa waxqabadyada fasalka oo ay ku jiraan muujinta iyo ka doodista xirfadaha bulsho ee gaarka ah ee goobaha dhaqameed kala duwan | Wuxuu muhiimada siiyaa la wadaagista macluumaadka shaqaalaha iyo asxaabta shaqada siyaabo lagu aqoonsado loona horumariyo xirfadaha bulshada ee carruurta bulshooyinka dhaqamada kala duwan ay u baahan doonaan inay si wanaagsan ula falgalaan shabakadahooda dhaqanka iyo bulshada |
| I.D.4 | Wuxuu aqoonsadaa oo magacaabaa **qiyamka asaasiga** ah ee ay haysaan qoysaska ka soo jeeda bulshooyinka dhaqamada kala duwan iyo siyaabaha kala duwan ee dhaqan ahaan loo sheegi karo qiyam isku mid ah | Wuxuu doortaa xeelado kala duwan oo lagu taageero laguna dhiirigaliyo carruurta marka ay muujinayaan qiyamka qoyska ama bulshada | Wuxuu la abuuraa shaqaalaha, asxaabta shaqada, iyo qoysaska xeelado kala duwan oo loogu talagalay in qiyamka loogu soo daro barnaamijka iyo in loo dabaaldego |
| I.D.5 | Wuxuu tilmaamaa astaamaha carruurta yaryar ee aagga juqraafiyeed iyo kala astaamaha kala soocaya kooxaha dhaqameed ee kala duwan<br><br>Wuxuu ku dhaqmaa **aqoonta dhaqamada kala duwan** iyo xirfadaha si fiican ula shaqeeya carruurta ka soo jeeda dhaqamo kala duwan | Wuxuu u qorsheeyaa waxqabadyada fasalka kuwaas oo ka imanaya waayo-aragnimada carruurta ka soo jeeda haqamada kala duwan ee lagu matalo fasalka<br><br>Wuxuu tusaaleeyaa aqoonta dhaqamada kala duwan iyo xirfadaha si fiican ula shaqeeya carruurta ka soo jeeda dhaqamo kala duwan | Wuxuu la abuuraa waalidiinta iyo shaqaalaha xeelado wax ku ool ah oo lagu wadaagayo macluumaadka kooxaha dhaqama ee ku jira barnaamijka iyo aqoonsashada fikradaha wanaagsan<br><br>Wuxuu hagaa oo tababaraa shaqaalaaha ka socda dhaqamada kala duwan iyo xirfadaha si fiican ula shaqeeya carruurta ka soo jeeda dhaqamo kala duwan |

2

# Nuxurka Aagga II:
# **Waayo aragnimada Waxbarasho ee Korriin ahaan Haboon**

## Halbeegga PELSB

***Bixiyaha daryeelka carruurta qoyska ee carruurta yaryar waxay qorsheeyaan, naqshadeeyaan, oo fuliyaan khibradaha waxbarasho ee ku habboon korriinka.***

### A. Buuritaanka Khibrad Barasho Wanaagsan: Guud ahaan

Daryeel bixiyuhu waa inuu fahmo:

- korriinka garashada, bulshaynta iyo shucuurta, korriinka jir iyo hal-abuurka iyo sida horumarka iyo waxbarashadu isugu xiran yihiin.
- Koriinka dhallaanka iyo socod baradka iyo saamaynta ay ku leedahay waxbarashada iyo korriinka carruurta yaryar.
- sida loo abuuro oo loo ilaaliyo deegaan jir ahaan iyo nafsi ahaan badbaado leh iyo jawi waxbarasho caafimaad leh oo loogu talagalay carruurta yaryar taas oo:
    - in uu qiro saamaynta uu goobtu, jadwalku, hawlaha joogtada ahi iyo kala beddelku/ kala guurku uu ku leeyahay carruurta oo u isticmaala khibradahan si kor loogu qaado horumarka iyo waxbarashada carruurta.
    - in uu qiro cawaaqibka koritaaneed ee ka yimaada welwelka iyo dhaawaca masiibada, qodobda difaaca iyo adkeysiga iyo horumarinta caafimaadka maskaxda iyo muhiimada ay leeyihiin cilaaqaadka taageeradu.
    - aqoonsada caafimadka aasaasiga ah, nafaqada iyo maaraynta badbaadada carruurta yaryar, oo ay ku jiraan hababka ku saabsan jirrooyinka carruurnimada iyo cudurrada faafa (eeg sidoo kale Caafimaadka, Badbaadada iyo Nafaqada).
    - Isticmaalka hababka qiimaynta caafimaadka ee ku haboon iyo sida loogu taliyo u gudbinta caafimaadka bulshada iyo adeegyada bulshada ee ku haboon marka loo baahdo (eeg sidoo kale Caafimaadka, Badbaadada iyo Nafaqada).
    - Aqoonsada calaamadaha murugada niyadeed, xadgudubka iyo dayaca ilmaha ee carruurta yaryar oo ay ogaadaan mas'uuliyadda iyo hababka looga warbixiyo xadgudubka ama dayacaadda la ogyahay ama la tuhunsan yahay.
- Sida loo qorsheeyo loona hirgeliyo manhaj ku habboon hab dhaqannada waxbaridda ee ku salaysan aqoonta korriinka ee carruurta yaryar, bulshada, iyo hadafyada manhajka iyo nuxurka oo ay ku jiraan sida loo isticmaalo:
    - hababka koriinka ku haboon oo ay ku jiraan ciyaarta, mashruucyada kooxo tiro yar, su'aalo waydiin furan, wada hadal kooxeed, xalinta dhibaatada, wax ku barashada

iskaashiga iyo waayo-aragnimada waydiinta si ay u caawiyaan carruurta horumarinta xiisaha, xaliyaan dhibaatooyinka, iyo go'aano u qaataan.

- aqoonta taxanaha horumarka si loo abuuro loona hirgeliyo waayo-aragnimo waxbarasho oo isku dhafan oo macno leh iyadoo la adeegsanayo fikradaha carruurta, baahiyaha, xiisaha, dhaqanka iyo waayo-aragnimada guriga.

## Kartiyaha

1. Habaynta Deegaanka

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.A.1.1 | Wuxuu muuqaal ahaan abuuraa jawi isku dhafaya baahiyaha barnaamijka daryeelka carruurta iyo baahiyaha qoyska daryeel bixiyaha | Wuxuu wax ka bedde aa deegaanka marka carruurtu koraan iyo marka qoysas cusub lagu daro barnaamijka | Wuxuu qiimeeyaa oo si joogto ah u hagaajiyaa deegaanka si uu u muujiyo falsafada barnaamijka oo uu wax uga qabto baahiyaha gaarka ah ee carruurta iyo qoyska daryeel bixiyeyaasha |
| II.A.1.2 | Wuxuu u habeeyaa meesha si ballaadhan si | Wuxuu xaqiijiyaa ka mid ahaaanshaha, dhammaan dhinacyada barnaamijka, carruurta naafada ah, carruurta leh baahiyaha daryeel caafimaad oo gaarka ah iyo kuwa ka soo jeeda asal dhaqameed iyo afaf kala duwan | Wuxuu qiimeeya, qiyaasaa oo si joogto ah u wanaajiya deegaanka si loo hubiyo in ay dhaqan ahaan iyo luqad ahaanba ay ka warqab tahay oo ay kor u qaadayso ixtiraamka kala duwanaanshaha iyada oo lagu soo darayo kala duwanaanshuhu in uu yahay qayb ka mid ah casharrada caadiga ah iyo habraacyada joogtada ah |
| II.A.1.3 | noocyo kala duwan oo hawlo waxqabadyo ah oo ay ku jiraan adeegsiga murugada waawayn, dhaqdhaqaaqa iyo hawlaha muusikada | Wuxuu u meeleeyaa alaabta guriga iyo albaabada si loo abuuro meelo loogu talagalay hawlo kala duwan, si loo ilaaliyo kooxaha da'aha kala duwan iyo in loogu ogolaado koox ahaan, lammaane ahaansho iyo meel gooni asturan ah | Wuxuu abuuraa filashooyin cad wuxuuna bixiyaa tilmaamo muuqaal ah si loogu qoondeeyo meelaha qaar hawlo iyo da'aha qaarkood |
| II.A.1.4 | Wuxuu u diyaariyaa hawlo xoogaa isku dhex qasan iyo sidoo kale hawlo aan qasnayn oo la bixiyo marka ay joogaan carruur da'da ku habboon | Wuxuu qorsheeyaa jadwalka si loogu ogolaado kormeerka ku habboon da'da iyo korriinka carruurta inta lagu jiro dhaqdhaqaaqyada isku qasan | Wuxuu bixiyaa waxqabadyo isku qasan inta lagu jiro maalintii; aagga waa la ilaalinayaa oo si fudud ayaa loo nadiifiyaa |

## 2. Doorashada iyo Isticmaalka Qalabka, Alaabta iyo boombalooyinka

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.A.2.1 | Wuxuu doortaa oo mudnaanta siisaa soo iibsashada qalabka, agabka, alaabta carruurtu ku ciyaarto iyo alaabada guriga iyadoo lagu salaynayo cilmi-baaris iyo baahiyaha carruurta | Wuxuu ku soo daraa qalabka, agabka, alaabta carruurtu ku ciyaarto iyo alaabada guriga ee nadiifta ah oo si wanaagsan loo daryeelay, oo keenaa guriga daryeelka carruurta qoyska | Wuxuu Jadwal u sameeyaa kala wareejinta qalabka, agabka iyo alaabta carruurtu ku ciyaarto |
| II.A.2.2 | Wuxuu aqoonsadaa, soo doortaa oo muhiimada siiyaa qalabka, agabka iyo alaabta carruurtu ku ciyaarto ee furfuran oo loo isticmaali karo in ka badan hal qaab iyo ay isticmaaali karaan in ka badan koox hal da' ah. | Wuxuu ku hagaa carruurta inay adeegsadaan qalabka, alaabada iyo alaabta carruurtu ku ciyaarto oo isticmaal furan iyagoo u fududaynaya ama kordhinaya caqabadda si ay u daboolaan baahidooda | Wuxuu u sharaxaa shaqaalaha iyo xubnaha qoyska siyaabaha badan ee qalabka isticmaaalka furan, alaabta lagu ciyaaro loo isticmaalo iyo barashada natiijada ka dhalata |
| II.A.2.3 | Wuxuu doortaa oo siiyaa carruurta alaabta ay ku ciyaaraan iyo qalabka kor u qaada korriinka iyo horumarka | Wuxuu bixiyaa alaabta lagu ciyaaro iyo agabka oo taageeraya korriinka iyo horumarka qofka | Wuxuu ku sii dul dhisaa oo kobciyaa danaha gaarka u ah qofka ah isagoo siinaya alaabta ciyaarta iyo agab ku habboon |

## 3. Daryeelka Albaabada iyo Deegaanka

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.A.3.1 | Wuxuu aqoonsadaa agabka iyo alaabta ciyaarta ee ku habboon da' kasta iyadoo maskaxda lagu hayo badbaadada | Wuxuu abaabulaa oo soo bandhigaa agabka iyadoo badbaadda maskaxda lagu hayo si ay u noqdaan kuwo la heli karo oo carruurtu ay ka dooran karaan oo ay si madax bannaan u isticmaali karaan | Wuxuu qaabeeyaa kaydinta iyo habaynta joogtada ah si ay carruurtu uga caawiyaan nadiifinta iyo meel dhigista alaabada |
| II.A.3.2 | Wuxuu ku dhiirigeliyaa carruurta inay ka caawiyaan daryeelka deegaanka ee gudaha iyo dibadda | Wuxuu carruurta kala hadlaa daryeelka deegaanka gudaha iyo dibadda wuxuuna ku dhiirigeliyaa inay caawiyaan | Wuxuu ku daraa daryeelka gudaha iyo dibaddaba qorshaha joogtada ah, jadwalka iyo manhajka |

4. Abuuritaanka Deegaan Barasho Wanaagsan (Sidoo kale eeg: Kor u qaadida Horumarka Shucuurta Dareenka)

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.A.4.1 | Wuxuu la dhisaa cilaaqaad wanaagsan ilmo kasta; wuxuu muujiyaa kalgacal jireed oo ku jira gudaha xuduudaha xirfadeed ee ku habboon | Wuxuu abuuraa oo uu ilaaliyaa xiriir daryeel oo togan oo uu la yeesho ilma kasta | Wuxuu xoojiyaa cilaaqaad samaan , daryeela leh, kobcinta oo uu la yeesho ilma kasta |
| II.A.4.2 | Wuxuu xaqiijiyaa ixtiraamka loo hayo oo ka warqabaa dhammaan dhinacyada barnaamijka, carruurta naafada ah, carruurta leh baahiyaha daryeel caafimaad oo gaarka ah, iyo kuwa ka soo jeeda asal dhaqameed iyo afaf kala duwan | Wuxuu xaqiijiyaa ka mid ahaanshaha, dhammaan dhinacyada barnaamijka, carruurta naafada ah, carruurta leh baahiyaha daryeel caafimaad oo gaarka ah iyo kuwa ka soo jeeda asal dhaqameed iyo afaf kala duwan | Wuxuu qiimeeya, qiyaasaa oo si joogto ah u wanaajiya deegaanka si loo hubiyo in ay dhaqan ahaan iyo luqad ahaanba ay ka warqab tahay oo ay kor u qaadayso ixtiraamka kala duwanaanshaha iyada oo lagu soo darayo kala duwanaanshuhu in uu yahay qayb ka mid ah casharrada caadiga ah iyo habraacyada joogtada ah |
| II.A.4.3 | Wuxuu aqoonsadaa da'aha kala duwan iyo shakhsiyaadkay u baahan yihiin heerar kala duwan oo ilaalin ah | Ka hawl gala si firfircoon u kormeerida shakhsiyaadka, kooxaha tirada yar iyo kooxda oo dhan iyo sidoo kale dhammaan kooxaha da'da kala duwan | Wuxuu samaystaa farsamooyinka kormeerka si loo daboolo baahida shakhsiyaadka, kooxaha tirada yar iyo kooxaha oo dhan |
| II.A.4.4 | Wuxuu la falgalaa carruurta da' kasta leh | Wuxuu la shaqeeyaa dhawr carruur ah isagoo isha ku haya kuwa kale | Wuxuu abuuraa habab uu kula falgalo in ka badan hal ilmo markiiba |
| II.A.4.5 | Wuxuu qorsheeyaa hawl maalmeedka isaga oo aqoonsanaya muhiimada baahiyaha shaqsi kasta iyo kuwa kooxdaba | Wuxuu qorsheeyaa oo sharixi karaa qiimaha jadwal joogto ah oo la saadaalin karo kaas oo u dhisa aasaas adag oo loogu talagalay ilmaha iyo kooxda | Wuxuu qiimeeya, qiyaasaa oo si joogto ah u soo qaataa jadwalada hawlaha caadiga ah si ay u daboolaan baahiyaha shakhsiyaad, kooxda iyo da'da kala duwan ee loogu talagalay hawlaha iyo nasashada |
| II.A.4.6 | Wuxuu ka jawaabaa baahida hurdo, cunto iyo jimicsi ee ilmo kasta | Wuxuu aqoonsadaa, u qorsheeyaa ugana jawaabaa ilmo kasta wax cunistiisa iyo habka hurdada iyo sidoo kale dookhooda raaxada | Wuxuu abuuraa hawlo joogto ah iyo wax qabadyo debecsan oo ku filan in ay daboolaan baahiyaha jireed ee nasashada, nadaafadda, musqusha, iyo nafaqada ee ilma kasta |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.A.4.7 | Wuxuu ku dhiirigeliyaa carruurta inay keli keli ula falgalaan caruurta kale iyo koox yar ahaan iyo koox weynba marka ay sahaminayaan, tijaabinayaan, iyo xalinayaan dhibaatada | Wuxuu siiyaa carruurta waxqabadyo macne leh, gacan ku qabasho ah oo taageera oo ku celceliya xirfadaha cusub ee ay barteen, wuxuu dhiirigeliyaa sahaminta iyo tijaabinta | Wuxuu dhisaa jawi waxbarasho oo u ogolaanaya carruurta inay wax doortaan, ka qaybqaataan khibradaha shaqsi ahaan, koox yar ahaan iyo koox weynba marka ay sahaminayaan, tijaabinayaan, iyo xalinayaan dhibaatada |
| II.A.4.8 | Wuxuu aqoonsadaa oo raacaa waxa ilmuhu jecelyahay | Wuxuu diyaariyaa waayo-aragnimo waxbarasho ee ku habboon dhaqan ahaan iyo korriin ahaanba taasoo ku dhisan xiisaha ilmaha | Wuxuu abuuraa waayo-aragnimo waxbarasho oo ku haboon oo loogu talagalay koriinka shaqsiyaadka iyo kooxda isaga oo isticmaalaya macluumaadka ku saabsan baahiyaha/xiisaha, luqadda iyo dhaqanka, iyo waaya-aragnimada guriga |
| II.A.4.9 | Wuxuu aqoonsadaa in ilmo kasta oo koox ku jiraa uu ku jiro heer korriin oo shakhsi ahaan u isaga u gaar ah | Wuxuu dib u milicsadaa kala duwanaanshaha u dhexeeya heerka korriinka ee ilmaha iyo da'dooda wuxuuna u waafajiyaan filashooyinka iyo qorshayaasha si waafaqsan | Wuxuu u sharaxaa shaqaalaha iyo qoysaska qodobada badan ee saameeya kartida, korriinka iyo hab dhaqanka ilmaha |
| II.A.4.10 | Wuxuu weydiiyaa su'aalo oo uu u sharaxaa welwelka ku saabsan horumarka carruurta tababaraha; wuxuu ilaaliyaa sirta ilmaha iyo qoyska | Wuxuu aqoonsadaa kala duwanaanshiyaha kartida iyo horumarka ee muujin kara baahida loo qabo in fiiro gaar ah loo yeesho wuxuuna soo jeedinayaa u gudbin | Wuxuu tilmaamayaa horumarka aan ahayn heerka caadiga ee la xiriira jidhka, luqadda, garashada, horumarka shakhsi ahaaneed iyo bulsheed iyo wax curinta wuxuuna bilaabaa gudbinta ku habboon |
| II.A.4.11 | Wuxuu raacaa talooyinka Akadeemiyada Caafimaadka Carruurta ee Maraykanka wixii ku saabsan wakhtiga shaashadda ee loogu talagalay carruurta inta ay ku jiraan barnaamijka carruurnimada hore | Wuxuu hagaa wakhtiga shaashadda ee carruurta ka weyn 24 bilood isaga oo hubinaya inay xaddidan tahay, firfircoonaan iyo waxyaabo beddelaad ayuu bixiyaa | Wuxuu abuuraa xeerarka barnaamijka ee ku saabsan isticmaalka habboon ee warbaahinta, softiweerka iyo tignoolajiyada |

## B. Kobcinta Horumarka Garashada

Daryeel bixiyuhu waa inuu fahmaa xeeladaha lagu qiimaynayo heerka soo baxaya ee korriinka garashada ee ilmaha iyo sida loo isticmaalo macluumaadkan si loo dejiyo yoolalka horumarinta garashada shakhsi ahaaneed iyo qaabaynta khibradaha waxbarasho ee ku habboon korriinka kuwaas oo:

- fududaynaya helitaanka xirfado si loo kasbado, si loo habeeyo oo loo isticmaalo macluumaadka siyaabo sii kordhaysa u adag.
- abuuraan waayo-aragnimo awood u siinaya carruurta yaryar inay u isticmaalaan ciyaarta iyaga oo ah abaabule ahaan inta u dhaxaysa helitaanka iyo isticmaalka macluumaadka.
- wuxuu sii balaariyaa fikirka iyo waxbarashada carruurta oo una gudbiyaa heerar shaqo oo ka sii sarreeya.
- ka caawiyaa carruurta inay ciyaaraan, qiimeeyaan, did u milicsadaan, dib u eegaan, oo ay ku sii dul dhistaan waaya-aragnimadooda.
- u ogolaanaya carruurta inay dhisaan is-fahamka ama xiriirka ka dhexeeya walxaha, dadka iyo dhacdooyinka.
- dhiirigelinya isticmaalka xirfadaha dhismaha iyo xisaabinta.
- dhiirigelinaya horumarinta luqadda iyo xirfadaha wada hadalk/isgaarsiinta.
- dhiirigelinaya isticmaalka iyo dhisidda xirfadaha akhris-qorista.
- wuxuuu ogolaadaa carruurta inay dhisaan aqoonta adduunka, in ay u maamulaan shayada si ay u yeeshaan saamaynta ay rabaan oo ay u fahmaan xiriirka sababta iyo saamaynta.

### 1. Kor u qaadista/dhiiri gelita xiisaha

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.B.1.1 | Wuxuu ka qaybqaata sahaminta firfircoon ee alaabada si loo dhiirigaliyo xiisaha | Wuxuu siiyaa carruurta fursado ay ku waydiiyaan su'aalo, jawaabo u helaan oo ay u habeeyaan macluumaadka iyada oo loo marayo sahamin firfircoon | Wuxuu kordhiyaa fikirka carruurta isagoo ka caawinaya inay fiirsadaan oo soo ururiyaan macluumaadka, in ay weydiiyaan su'aalo oo ay saadaaliyaan |
| II.B.1.2 | Wuxuu u fiirsadaa danaynta iyo xiisaha ilmaha ee dadka, walxaha iyo deegaankooda oo uu u sii dhisaa xiisaha | Wuxuu ku dhiirigeliyaa carruurta inay tijaabiyaan, xaliyaan masalada oo ay bartaan sababta iyo saamaynta | Wuxuu dhisaa waxqabadyo u ogolaanaya carruurta inay ku fahmaan adduunkooda tijaabinta iyo xallinta masalooyinka |
| II.B.1.3 | Wuxuu ka caawiyaa carruurta inay gartaan sababta iyo saamaynta marka ay wax qabtaan | Wuxuu u daadihiyaa carruurta fursado ay ku bartaan sababta iyo saamaynta marka ay ciyaarayaan oo ay ku tijaabinayaan walxaha | Wuxuu dhisaa waxqabadyo ka caawiya carruurta inay wax ka beddelaan walxaha si ay u bartaan sababta iyo saamaynta |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.B.1.4 | Waxay si daacad ah oo xushmad leh uga hadlaan waxyaabaha ay iskaga midka yihiin iyo waxyaabaha ay kala duwanaanta ee ay carruurtu ku arkaan dadka, qoysaska, iyo bulshada dhexdeeda | Wuxuu siiyaa carruurta fursado ay ku bartaan naftooda, qoyskooda, luqadaha ay ku hadlaan dadka ku jira barnaamijka iyo bulshadu | Wuxuu u abuuraa fursado ay carruurtu ku bartaan danaha/xiisaha, caadooyinka, luqadaha, dhaqamada, iyo dalalka ay ka soo jeedaan qoysaska kale ee ku jira barnaamijka iyo bulshadu |
| II.B.1.5 | Wuxuu ka qaybqaata hawl maalmeedka si kor loogu qaado barashada dabiiciga iyo sayniska | Wuxuu tusaaleeyaa xiriirka togan ee dabiiciga oo siiyaa fursado carruurta si ay ula falgalaan waxyaabaha dabiiciga ah iyo deegaanka | Wuxuu u sharaxaa shaqaalaha, qoysaska iyo la-hawlgalayaasha bulshada muhiimadda ay leedahay kobcinta xiriirka lala yeesha dabiicadda iyo bannaanka |

2. Dhiirigelinta Wada hadalka/Isgaadhsiinta

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.B.2.1 | Wuxuu aqoonsadaa oo uu ka jawaabaa isku dayga hadalka ah iyo midka aan hadalka ahayn ee carruurtu isku dayaan ah inay wada xiriiraan/ hadlaan | Wuxuu fududeeyaa wada xiriirka/hadalka afka hadalka ah iyo ka aan hadalka ahayn ee ay la yeeshaan dadka waaweyn caruurta kale, oo ay ku jiraan fursadaha loogu talagalay carruurta si ay uga qayb qaataan ku wada sheekaysiga luqadda guriga iyo waayo-aragnimada. | Wuxuu dhisaa cilaaqaad wanaagsan oo dhexmara carruurta leh xirfado hadalka/ xiriirka oo kala duwan waxayna ku dhiirigeliyaan inay la hadlaan dadka waaweyn iyo carruurta kale |
| II.B.2.2 | Wuxuu ka jawaabaa dhawaaqa hadaaqa dhallaanka iyo ciyaarta; wuxuu ka qaybqaata wada hadallada horay iyo gadaal ah ee carruurta ee ku saabsan noloshooda gudaha iyo dibadda barnaamijka caruurnimada hore | Wuxuu adeegsadaa eray bixin habboon, naxwaha iyo qaab-dhismeedka jumladaha oo habboon marka uu uga sheekeynayo ficillada carruurta yaryar iyo marka uu la hadlayo carruurta waaweyn | Wuxuu tusaaleeyaa adeegsiga noocyada kala duwan ee ereyada iyo qaab-dhismeedka jumladaha si uu u ballaariyo xirfadaha luqadda ee carruurta ee isticmaalaya erayada si ay wada xiriiraan |
| II.B.2.3 | Wuxuu aqoonsadaa in da'yarta Bartayaasha Labada Luqaddood (DLL) ay u baahan yihiin inay maqlaan oo lagu taageero inay ku wada xidhiidhaan horumarinta luqadda guriga iyo horumarinta luqadda Ingiriisiga. | Si ulakac ah ayuu ugu jawaabaa Bartayaasha Labada Luqadood (DLL) isagoo adeegsanaya xeelado ku dhiirigeliya DLL inay dareemaan kalsooni inay bartaan luqadooda hooyo iyo luqad cusub | Wuxuu ku dabaqaa cilmi baarista hadda jirta iyo fikradaha isticmaalka luqadda, barashada luqadda iyo horumarinta luqadda labaad oo ay ku jirto adeegsiga luqadaha guriga ee howlaha meelo u gaarka ah |

3. Dhisidda Aasaaska Akhris-qoraalka iyo Barashada Tirooyinkan

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.B.3.1 | Wuxuu aqoonsadaa oo uu ku sii dul dhisaa ciyaarta xisaabta si dabiici ahaan ah uga dhex dhacda carruurta | Wuxuu qorsheeyaa waayo-aragnimada barashada ee siinaysa carruurta fursado ay ku matalaan fikradaha xisaabeed oo ay u sameeyaan xiriiro | Wuxuu falanqeeyaa, qiimeeyaa, oo adeegsadaa cilmi-baarista hadda jirta iyo hababka ugu wanaagsan ee baridda iyo barashada xisaabta |
| II.B.3.2 | Wuxuu ku dhiirigeliyaa carruurta inay bartaan xisaabta hore oo ay ku jiraan lambarada iyo xisaabinta, qaababka iyo ogaanshaha cabirrada goobta, qaababka, cabbirka iyo isticmaalka xisaabta si ay u sameeyaan macnaha macluumaadka iyadoo la siinayo agab iyo khibrado ay ka mid yihiin kuwa ka caawiya carruurta inay sahamiyaan sida qaababka kala duwani ugu habboon yihiin weelasha. | Wuxuu bixiyaa jawi waxbarasho oo qani ku ah xisaabta oo dhiirigeliya sahaminta tirooyinka iyo xisaabinta, qaababka iyo ogaanshaha cabirrada goobta, qaababka, cabbiraadda iyo falanqaynta xogta ama isticmaalka xisaabta si loo sameeyo macnaha macluumaadka | Wuxuu qaabeeyaa oo siiyaa qoysaska agabka xisaabta iyo macluumaadka |
| II.B.3.3 | Wuxuu yaqaanaa oo adeegsadaa ereyada xisaabta, sida erayada "ka badan", "ka yar" "ka korraysa", "ka hoosaysa", 'ka dheer', magacyada qaababka iyo tirooyinka | Wuxuu tusaaleeyaa luqadda xisaabta iyadoo la isticmaalayo su'aalo iyo erayada xisaabta | Wuxuu u sharaxaa shaqaalaha, qoysaska iyo la-hawlgalayaasha bulshada muhiimadda ay leedahay isticmaalka wada hadalku si loo dhiso aqoonta xisaabta iyo xirfadaha fahamka |
| II.B.3.4 | Wuxuu ka qayb qaataa ciyaarta ereyada iyo dhawaaqa, heesida, akhriska iyo sheeko ka sheekaynta | Wuxuu adeegsadaa xeelado kala duwan si uu u soo bandhigo ciyaarta kelmadaha, heeso, wax akhris iyo sheeko kaga sheekayn luqada guriga iyo luqadaha kale | Wuxuu hindisaa hawlo akhris-qoraal oo ku hawlgeliya carruurta barashada ciyaarta ereyga iyo dhawaaqa, akhrinta iyo sheeko ka sheekaynta iyadoo la adeegsanayo aqoonta hababka barashada luqadda koowaad iyo labaad |
| II.B.3.5 | Wuxuu tilmaamaa calaamadaha qoran oo ku daabacan deegaanka | Wuxuu diyaariyaa deegaan qani ku ah luqadda oo ay ku jiraan agabka ku qoran luqadaha ka turjumaya bulshada. | Wuxuu daadihiyaa fahamka xiriirka ka dhexeeya erayada lagu hadlo iyo kuwa daabacan |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.B.3.6 | Wuxuu ka qayb qaataa hawlaha qorista iyo sawiridda soo baxaya ee carruurta | Wuxuu bixiyaa fursadaha loogu talagalay qorista iyo sawiridda ee soo baxaya | Wuxuu ku soo daraaa noocyo kala duwan oo qoraal ah, sawirid ah iyo agabka farshaxanka oo loogu talagalay carruurta si ay u kala doortaan odhaahda dhammaadka furan, iyadoo la fahmayo lana waafajinayo muddada korriinka dareenka ee ay ku jiraan |
| II.B.3.7 | Wuxuu fuliyaa hawlo akhris iyo akhris-qoraal ee soo baxaya oo kala duwan | Wuxuu fududeeyaa xiisaha carruurta ee daabacaadda, u fiirsashada dhawaaqyada, wada sheekaysiga, aqoonta xarfaha iyo erayada wuxuuna isku xiraa akhris-qoraalka iyo luqadda | Wuxuu u sharaxaa shaqaalaha, qoysaska iyo xubnaha bulshada dhaqamada xoojinaya oo kor u qaada horumarinta akhriska iyo akhris-qoraalka ee soo baxaya |

## C. Kobcinta Horumarka Bulshaynta iyo Dareenka

Daryeel bixiyuhu waa inuu fahmaa xeeladaha lagu qiimaynayo heerka soo baxaya ee korriinka horumarinta bulshaynta iyo dareenka ee ilmaha iyo sida loo isticmaalo macluumaadkan si loo dejiyo yoolalka horumarinta bulshaynta iyo dareenka shakhsi ahaaneed iyo qaabaynta khibradaha waxbarasho ee ku habboon korriinka kuwaas oo:

- abuuraya jawi ay ka jiraan is-dhexgal warqab ah oo la saadaalin karo.
- u habaynaya goobta caruurnimada hore si kor loogu qaado isdhexgalka togan, wax dhisida u dhexeeya oo ai is;a sameeyaan carruurtu dhexdooda.
- kor u qaadaya xiriirada caafimaadka qaba ee lala yeesho faca.
- dhisaya dareenka ka mid ahaanshaha, amniga, qiimaha shakhsi ahaaneed, iyo isku kalsoonaanta xagga waxbarashada ee ilmo kasta.
- u ogolaanaya dhisidda aqoonta bulshada, sida iskaashiga, caawinta, gorgortanka, iyo la hadalka dadka kale si loo xalliyo dhibaatooyinka.
- fududeeya horumarinta is-aqbalitaanka nafeed, is-xakamaynta iyo u jawaabista bulshada ee carruurta iyada oo la adeegsanayo farsamooyinka hagitaanka oo wanaagsan.
- kor u qaadaya fahamka carruurta, aqbalaadda iyo qaddarinta kala duwanaanshaha aadanaha iyadoo ay ugu wacan tahay arrimaha bulshada, dhaqanka, jirka ama qodobada korriinka.

### 1. Samaynta Xiriir Badbaado, Xasilooni, Cilaaqaad naxariis Korineed leh oo Kobcinaya Horumarka Bulshaynta iyo Dareenka

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.C.1.1 | Wuxuu la samaystaa xiriir aamin ah, warqab ah oo wuxuuna ka caawiyaa ilmo kasta inuu dareemo in la aqbalay | Wuxuu abuuraa dareenka kalsoonida iyo ka mid noqoshada kooxda carruurta ah isagoo si joogto ah uga jawaabaya baahiyaha carruurta | Wuxuu falanqeeyaa, qiimeeyaa oo horumariyaa dhaqamada, isdhexgalka iyo hawlaha loogu talagalay in lagu horumariyo dhisidda cilaaqaadka iyada oo loo marayo daryeel warqab ah |
| II.C.1.2 | Wuxuu muujiyaa joogtaynta, sii waddida iyo ka jawaab celinta marka ay taageerayaan horumarka shucuureed ee carruurta | Wuxuu bixiyaa jawi waxbarasho oo la saadaalin karo oo ka jawaabaya taageerada horumarka shucuureed | Wuxuu soo saaraa xeerar iyo habraacyo ka caawiya ilaalinta joogtaynta daryeelka |
| II.C.1.3 | Wuxuu aqoonsadaa in cilaaqaad ammaan ah, xasiloon, oo daryeel naxariis leh uu bixin karo difaac ka dhan ah saamaynta welwelka iyo/ama dhaawaca masiibada oo daba dheeraada | Wuxuu bixiyaa cilaaqaad ammaan ah, xasiloon, oo daryeel naxariis u leh carruurta la kulma welwelka iyo/ama dhaawaca masiibada | Wuxuu siiyaa qoysaska taageero iyo macluumaad ku saabsan adeegyada bulshada marka ay qoysasku la kulmaan welwelka iyo/ama dhaawaca masiibada |
| II.C.1.4 | Wuxuu ka caawiyaa carruurta inay bartaan oo isticmaalaan xirfado bulsho oo wanaagsan oo ay sameeyaan kala doorashooyin ku habboon | Wuxuu bixiyaa waayo-aragnimo iyo waxqabadyo oo uu sidoo kale isticmaalaa is-hadalka nafeed si uu u horumariyo horumarka bulshada iyo dareenka shucuurta¬ | Wuxuu falanqeeyaa, qiimeeyaa, oo adeegsadaa habka ugu wanaagsan ee hadda jira iyo dhaqamada cilmi-baarista ku salaysan ee horumarinaya horumarka bulshada iyo dareenka shucuurta |

## 2. Taageerida Is-xakamaynta

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.C.2.1 | Wuxuu aqoonsadaa oo uu dhiirigeliyaa carruurta marka ay baranayaan inay maareeyaan jawaabahooda jireed iyo shucuureed, in ay ilaaliyaan feejignaanta, iyo xasilinta naftooda | Wuxuu bixiyaa waxqabadyo wuxuuna abaabulaa deegaanka si uu u taageero koboca is-xakamaynta ilmaha | Wuxuu u sharaxaa shaqaalaha, qoysaska iyo la-hawlgalayaasha bulshada muhiimadda ay leedahay is-xakamaynta carruurta yaryar iyo muhiimadda taageerooyinka dibadda ah oo ay ku jiraan taageerada ka timaada kuwa kale |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.C.2.2 | Wuxuu la sameeyaa xiriir ammaan ah, xasiloon ilmo kasta si uu u helo saldhig sugan oo uu ka sahamiyo | Wuxuu daadihiyaa dareenka sii kordhaya ee ismaamulka iyo madax-bannaanida isaga oo si joogto ah u siinaya saldhig sugan oo laga sahamiyo | Wuxuu dejiyaaa xeerar iyo habraacyo taageeraya dareenka sii kordhaya ee ismaamulka iyo madaxbannaanida |

3. Wuxuu fududeeyaa Kala tegitaanka, isu soo noqoshada iyo Kala-beddelka

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.C.3.1 | Wuxuu ka caawiyaa ilmaha ku xasilitaanka goobta daryeelka carruurta qoyska | Wuxuu aqoonsadaa oo uu ku daydaa caadooyinka qoyska si uu u bixiyo sii socoshada ka bedelashada hal goob ilaa goob kale iyo ka bedelashada qof ilaa qof kale | Wuxuu dejiyaa xeerar iyo habraacyo lagu fududaynayo kala-beddelka oo kor loogu qaadayo joogtaynta isku mid ahaanshaha guud ahaan iyo gudaha goobaha daryeelka |
| II.C.3.2 | Wuxuu qeexaa jawaabaha shucuureed ee ilmaha iyo waalidka inta lagu jiro kala tegitaanka, isu imaatinka iyo kala beddelka | Wuxuu taageeraa muujinta shucuurta wuxuuna soo jeediyaa xeelado lagula tacaalayo inta lagu jiro kala tegitaanka, isu imaatinka iyo kala-beddelka | Wuxuu aqoonsadaa oo uu wax ka qabtaa falcelinta shucuurta ee aan caadiga ahayn ee kala tegitaanka, isu imaatinka iyo kala beddelka |
| II.C.3.3 | Wuxuu raacaa habraacyada loo dejiyay ee ka beddelashada hawl una beddalashada hawl kale | Wuxuu siiyaa wakhti ku filan iyo taageero si habsami leh u kala-beddelka hawl in looga gudbo hawl kale | Wuxuu qaabeeyaa si habsami leh uga soo beddelka barnaamijka daryeelka carruurta qoyska una soo beddelka barnaamijka bulshada dhexdeeda ah, barnaamij iskuulka ah ama qof kale oo daryeel bixiye ah |
| II.C.3.4 | Wuxuu aqoonsadaa waxqabadyada joogtada ah iyo kala-beddelku inay yihiin wakhtiyo wax laga baran karo oo ay ku jiraan la hadalka carruurta marka la xafaayada loo xirayo | Wuxuu adeegsadaa waxqabadyada joogtada ah iyo kala-beddelka si loo dhiso xiriirka, si loo ballaariyo xiisaha ilmaha iyo dhisidda xirfadaha | Wuxuu u sharaxaa shaqaalaha, qoysaska iyo xubnaha bulshada muhiimada ay jadwalada joogtada ah iyo kala-beddelku ay u leeyihiin waxbarashada |

## 4. Dhiirigelinta Muujinta Dareenka Shucuurta

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.C.4.1 | Wuxuu aqoonsadaa kala duwanaanshaha iyo siyaabaha kala duwan ee ilmuhu u muujiyaan shucuurta iyo baahiyaha; si habboona uga jawaabaa | Wuxuu dejiyaa deegaan ay carruurtu ku dareemaan ammaan si ay u sahamiyaan shucuurtooda oo ay taageero u helaan | Wuxuu u sharaxaa shaqaalaha, qoysaska iyo la-hawlgalayaasha bulshada muhiimadda ay leedahay deegaan taageeraya ku muujinta shucuurta habab ku habboon koritaan iyo hiddaha dhaqanka. |
| II.C.4.2 | Wuxuu ka caawiyaa carruurta inay muujiyaan dareenka, baahiyaha iyo rabitaannada oo ay fahmaan kuwa dadka kale | Wuxuu isticmaalaa xeelado kala duwan si uu uga caawiyo carruurta inay bartaan inay u muujiyaan shucuurta siyaabo ku habboon xaaladda qoyska iyo/ama hiddaha dhaqanka | Wuxuu horumariyaa waxqabadyo waxbarasho oo ay carruurtu ku bartaan inay xakameeyaan dareenka, in ay ku muujiyaan dareeno kala duwan, in ay is-maamulaan, in ay sameeyaan doorashooyin oo ay xalliyaan dhibaatooyinka¬ |
| II.C.4.3 | Wuxuu aqoonsadaa saamaynta welwelka iyo dhaawaca masiibada wuxuuna ku taageeraa ilmaha gudaha barnaamijka daryeelka carruurta qoyska | Wuxuu aqoonsadaa calaamadaha welwelka shucuureed ee ilmaha/qoyska wuxuuna qaadaa tillaabada lagama maarmaanka ah, sida bilaabista wada xaajoodka qoyska, bixinta macluumaadka iyo agabka si looga hortago xadgudubka ilmaha; wuxuu u gudbiyaa taageerada bulshada iyo/ama uga warbixiyaa dawlada | Wuxuu u sharaxaa shaqaalaha, qoysaska iyo bulshada cawaaqibta korriinka ee ka timaada welwelka iyo dhaawaca masiibada ee la xiriiraa waayo-aragnimada xun sida kala guurka, waayitaanka, dayaca iyo xadgudubka |

## 5. Taageerida Cilaaqaadka iyo Isdhexgalka Faca ee Caafimaad leh

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.C.5.1 | Wuxuu ka caawiyaa carruurta inay la ciyaaraan kuwa kale | Wuxuu siiyaa carruurta fursado ay kula falgalaan kuwa kale ee leh astaamo isku mid ah iyo kuwa kala duwan | Wuxuu naqshadeeyaa waaya-aragnimada si uu u baro isixtiraamka iyo isqadarinta dadka kale |
| II.C.5.2 | Wuxuu qiraa wadaagista, caawinta, iskaashiga iyo isdhexgalka wanaagsan ee carruurta dhexdooda | Wuxuu daadihiyaa is dhexgalka faca wuxuuna ka caawiaaa carruurta inay si isu hogaansan leh u wada dhaqmaan | Wuxuu naqshadeeyaa oo fulisaa xeelado kala duwan si loo baro carruurta inay ka xaajoodaan khilaafka oo ay xalliyaan isdhexgalka adag |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.C.5.3 | Wuxuu u soo jeediyaa dareenka midaarka, codadka, iyo muujinta dareenka wejiga ee carruurta kale oo uu sharaxaa waxa laga yaabo inay dareemaan | Wuxuu ku dhiirigeliyaa carruurta inay daryeel siiyaan caruusadaha ama boombalaha xayawaanka cufan ah oo ay siiyaan taageero carruurta kale | Wuxuu abuuraa waxqabadyo iyo fursado uu ku caawiyo carruurta inay fahmaan dareenada, fikradaha iyo ficillada dadka kale oo ay taageero u fidiyaan dadka kale |

6. Bixinta Hagitaanka

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.C.6.1 | Wuxuu qeexayaa filashooyinka macquulka ah ee hab dhaqanka ee carruurta ku jirta da'da korriinka kala duwan | Wuxuu fahmaa sida qodobo kala duwani ay saamayn ugu yeelan karaan hab dhaqanka ilmaha | Wuxuu qiimeeyaa arrimaha la yaqaan iyo kuwa aan la aqoon ee laga yaabo inay saamayn ku yeeshaan hab dhaqanka ilmaha; wuxuu yareeyaa loo hayo xoogaa awood xakamayn ah |
| II.C.6.2 | Wuxuu ka caawiyaa carruurta inay raacaan xeerar fudud, jadwallo joogto ah iyo tilmaamo | Waxay qorsheeyaan jadwalada, howlaha joogtada ah, iyo jawiga barnaamijka iyadoo ku salaysan rajooyinka macquulka ah | Wuxuu u hagaajiyaa jadwalada, hawlaha joogtada ah iyo deegaanka iyadoo lagu salaysan aqoonta ilmaha, da'da ilmaha, dabeecadda, luqadda, xirfadaha wada xiriirka, xiisaha, dhaqamada iyo kartida |
| II.C.6.3 | Wuxuu u fiirsadaa oo uu isku dayaa in uu aqoonsado shucuurta ku hoos jirta dabeecadaha adag; wuxuu aqoonsadaa kala duwanaanta dhaqanka ee muujinta shucuurta | Waxay baraan carruurta siyaabo kala duwan oo ay ula qabsadaan una muujiyaan shucuurta dareenada | Wuxuu dib u milicsadaa falcelinta shakhsiyeed ee muujinta dareenka shucuurta xooggan iyo dabeecadaha adag; wuxuu abuuraa deegaan taageeraya korriinka dareenka isku-kalsoonaanta ee ilmo kasta, ismaamulka iyo madaxbannaanida |
| II.C.6.4 | Wuxuu ka soo ururiyaa macluumaad qoysaska si uu u helo faham qoto dheer oo ku saabsan dabeecada carruurta | Wuxuu la kaashadaa xubnaha qoyska si ay kor ugu qaadaan ka jawaab celinta joogtada ah ee dabeecadaha adag | Wuxuu abuuraa xeelado samaan oo kala duwan si wax looga qabto dabeecadaha adag wuxuuna la shaqeeyaa qoyska si ay u aqoonsadaan xeeladaha la isku raacsan yahay |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.C.6.5 | Wuxuu adeegsadaa xeelado hagitaan samaan si uu wax uga qabto dabeecadaha adag ee ilmaha | Wuxuu sii naawilaa oo uu ka leexdaa dabeecadaha adag isagoo isticmaalaya xeelado hagitaan togan | Wuxuu qiimeeyaa oo uu si joogto ah u hagaajiyaa xeeladaha hagidda |
| II.C.6.6 | Si muuqaal ah u eegaa oo u kormeera deegaanka daryeelka carruurta qoyska si uu u saadaaliyo oo uu u jiheeyo dhaqan-xumaynta iman karta | Wuxuu muujiyaa jawaab celinta ku habboon marka dabeecadaha adag aan la baajin karin; wuxuu daryeelaa caruurta ay khusayso oo ogaysiisaa waalidka(iinta) haddi ay haboon tahay | Wuxuu dejiyaa xeerar iyo habraacyo ku saabsan dabeecadaha adag oo ay ku jiraan xeelado firfircoon oo ka tag leh si looga hortago oo si ku habboon looga jawaabo marka aan laga hortagi karin |

## D. Horumarinta Korriinka Jirka

Daryeel bixiyuhu waa inuu fahmaa xeeladaha lagu qiimaynayo heerka soo baxaya ee korriinka jireed ee ilmaha iyo sida loo isticmaalo macluumaadkan si loo dejiyo yoolalka shakhsiyeed ee korriinka jireed iyo qaabaynta khibradaha waxbarasho ee ku habboon korriinka kuwaas oo:

- dhiirigalinaya habdhaqan samaan oo ku wajahan jimicsig jidhka.
- kor loogu qaadayo xirfadaha garaadka ee carruurta yaryar; dheelitirka iyo iskudubarid; iyo dabacsanaan, xoogga, iyo u dulqaada hawleed muddo dheer.
- taageeraya qaadashada khatarta ku habboon da'da ee gudaha xuduudo nabdoon.
- ka caawinaya carruurta inay noqdaan kuwo karti u leh inay helaan xirfadaha dhaqdhaqaaqa muruqyada guud ee aasaasiga ah iyo kuwa yaryar.
- fududaynta fahamka carruurta ee ilaalinta heerka la doonayo ee nafaqada, caafimaadka, jirdhiska iyo badbaadada jireed.
- daboolaya baahida nololeed ee carruurta ee jimicsiga, kicinta dareenka, hawo cusub, nasasho, nadaafada iyo nafaqada iyo saxarada iyo kaadida.

### 1. Horumarinta Korriinka Jirka (Sidoo kale eeg: Caafimaadka, Badbaadada iyo Nafaqada)

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.D.1.1 | Wuxuu si firfircoon uga qayb qaataa oo ka caawiyaa carruurta ku celcelinta caadooyinka caafimaadka qaba | Wuxuu siiyaa waayo-aragnimo macno leh iyo waxqabadyo la xidhiidha caafimaadka, badbaadada iyo nafaqada kuwaas oo ka caawiya carruurta inay horumariyaan caadooyin caafimaad qaba noloshooda oo dhan | Wuxuu qiimeeyaa, qiyaasaa oo si joogto ah u wanaajiyaa hab dhaqamada caafimaadka, badbaadada iyo nafaqadaa ee ku salaysan cilmi baarista hadda jirta |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
| --- | --- | --- | --- |
| II.D.1.2 | Wuxuu dhiirigeliyaa oo ka qaybqaataa ciyaarta habaysan iyo ciyaarta aan qaabaysnayn isagoo si firfircoon u kormeeraya; wuxuu xadidaa wakhtiga dhallaanka la geliyo qalabka iska taagan (kuraasta sare, kuraasta boodboodka, iwm.) | Wuxuu qorsheeyaa hawlo ku habboon da'da ugu yaraan laba jeer maalintii kuwaas oo dhiirigeliya dhaqdhaqaaqa jidhka oo lagu sameeyo meelo bannaan, ammaan ah; wuxuu ka qaybgeliyaa qoysaska qorsheynta iyo ka qayb qaadashada dhaqdhaqaaqa jireed ee carruurta | Wuxuu abuuraa xeerar, dhaqamo iyo deegaan kor u qaadaya caadooyinka dhaqdhaqaaqa jirka oo nolosha oo dhan ah oo lagu sameeyo goobaha ciyaarta ee gudaha iyo dibadda wuxuuna xaddidaa wakhtiga shaashadda; wuxuu qoysaska u sheegaa talooyinka ku salaysan cilmi-baarista ee ciyaarta firfircoon ee carruurta iyo wakhtiga shaashadda |
| II.D.1.3 | Wuxuu qeexaa xirfadaha lagu horumarinayo dhaqdhaqaaqa muruqyada waawayn, dheelitirnaanta iyo ogaanshaha meesha uu jirkaagu joogo iyo horumarinta isku dubaridka gacan-isha | Wuxuu qorsheeyaa hawlaha gudaha iyo dibadda, qalabka iyo meesha(meelaha) ku habboon korriinka ilma kasta ee xirfadiisa dhaqdhaqaaqa murqaha waawayn, fahamka nidaamyada dareenta meelaynta jirka (proprioception) iyo dareenka dheelitirka (vestibular) | Wuxuu u abuuraa hawlo ku salaysan aqoonta heerarka horumarka ee korriinka jirka/murqaha, iyo nidaamyada dareenka dheelitirka (vestibular) iyo dareenta meelaynta jirka (proprioception), si kor loogu qaado horumarka ugu fiican ee ilmo kasta |
| II.D.1.4 | Wuxuu si firfircoon uga qayb qaataa oo uu ka caawiyaa carruurta inay fuliyaan dhaqdhaqaaqyo jireed oo kala duwan; wuxuu qeexaa waxa qalabka kala duwan uu sameeyo si ay u taageero horumarinta | Wuxuu bixiyaa wakhtti ku filan oo dhulka lagu ciyaaro iyo hawlo si loo dhiirigaliyo dhaqdhaqaaqa, korriinka jirka, xirfadaha dhaqdhaqaaqa murqaha waawayn iyo kuwa yaryar, fahamka nidaamyada dareenta meelaynta jirka (proprioception) iyo dareenka dheelitirka (vestibular) | Wuxuu falanqeeyaa, qiimeeyaa, oo adeegsadaa habka ugu wanaagsan ee hadda jira iyo dhaqamada cilmi-baarista ku salaysan si loo horumariyo korrinka jireed, xoogga muruqyada waaweyn iyo isku-dubaridka, iyo horumarinta nidaamyada dareenka dheelitirka (vestibular) iyo dareenta meelaynta jirka iyo dhaqaaqyada (proprioception) |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.D.1.5 | Wuxuu ka caawiyaa carruurta waxqabadyada dhisaya aragtiga iyo isku dubaridka indhaha-iyo-gacanta iyo xirfadaha dhaqdhaqaaqa muruqyada yaryar | Wuxuu qorsheeyaa oo ay bixiyaan hawlo macno leh si kor loogu qaado horumarinta aragga, iskudubarid indhaha-iyo-gacanta, iyo korriinka maskaxda, taas oo horseedda xirfadaha dhaqdhaqaaqa muruqyada yaryar | Wuxuu falanqeeyaa, qiimeeyaa, oo adeegsadaa habka ugu wanaagsan ee hadda jira iyo dhaqamada cilmi-baarista ku salaysan si loo horumariyo isku dubaridka isha-gacanta, xoogga gacanta iyo farsamada; wuxuu filaa marxaladda xigta si kor loogu qaado horumarka shakhsiyeed |
| II.D.1.6 | Wuxuu aqoonsan yahay in carruurtu u baahan yihiin waxqabadyo u ogolaanaya isticmaalka dhammaan dareenkooda oo si firfircoon uga qaybqaataan hawlahan | Wuxuu siisaa waxyaabo dareeno badan leh iyo waaya-aragnimada sahaminta iyo horumarinta | Wuxuu falanqeeyaa, qorsheeyaa, doortaa iyo/ ama kaa soo raadsadaa agab dabiiciga ah si loo hubiyo bixinta khibrado qani ah oo kor u qaada horumarka jirka iyo dareenka |
| II.D.1.7 | Wuxuu adeegsadaa fahamka qaababka korriinka ee la saadaalin karo si uu u taageero carruurta marka ay baranayaan inay dhammaystiraan hawlaha is-caawinta nafeed sida ugu madax-bannaan ee suurtogalka ah | Wuxuu bixiyaa fursado iyo farsamooyin taageerida si ay u taageeraan carruurta ee xiisaynaysa oo korriin ahaana diyaar u ah inay horumariyaan xirfadaha is-caawinta nafeed oo ay ku jiraan taxanaha dhaqdhaqaaqa sida labiska, barashada musqusha, iyo wax cunista | Wuxuu ku hawlgeliyaa shaqaalaha iyo qoysaska inay ogaadaan calaamadaha u diyaar ahaanta ee ilmuhu in ay sameeyaan xirfadaha is-caawinta nafeed ee habboon |

2020

## E. Kobcinta Horumarka Hal-abuurka

Daryeel bixiyuhu waa inuu fahmaa xeeladaha lagu qiimaynayo heerka soo baxaya ee korriinka hal-abuurka ee ilmaha iyo sida loo isticmaalo macluumaadkan si loo dejiyo yoolalka horumarinta hal-abuurka shakhsi ahaaneed iyo qaabaynta khibradaha waxbarasho ee ku habboon korriinka kuwaas oo:

- ka caawinaya carruurta inay horumariyaan oo ay joogteeyaan xiisaha ay u qabaan adduunka, oo ay ku jiraan dhacdooyinkii hore, hadda iyo mustaqbalka; isbeddellada; cilaaqaadka; iyo fahamka.
- dhisaya kalsoonida carruurta, hal-abuurka, mala-awaalka, muujinta shakhsiyeed ee fikradaha iyo dareenka, hindisaha, iyo ku adkaysiga dhamaystirka hawsha.
- ku dhiiri gelinaya carruurta inay muujiyaan fikrado iyo dareen.
- siinaya carruurta fursado ay ku isticmaalaan agabka si ay iskood u doortaan oo ay is-hagaan.
- isticmaalaya hawlo furan si loo xoojiyo isku-kalsoonaanta togan iyo shakhsiyadda carruurta dhexdooda.

- kor u qaadaya xallinta mashaakilaadka oo la wadaago, hal-abuurka iyo is-dhexgalka fikradeed ee carruurta dhexdooda.

1. hiirigelinta Ismuujinta

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.E.1.1 | Wuxuu ku dhiirigeliyaa carruurta inay isticmaalaan noocyo kala duwan oo agabka ah maalin kasta ah si ay iskaga yeelyeelaan, u qoob ka ciyaaraan, u sameeyaan muusig oo ay u abuuraan | Wuxuu siiyaa wakhti, agab iyo meel si loogu ogolaado carruurta inay sahamiyaan oo ay tijaabiyaan is-muujinta shakhsiyeed iyo hal-abuurka iyada oo loo marayo waxyaabo kala duwan | Wuxuu u sharaxaa shaqaalaha, qoysaska iyo bulshada sida carruurtu u matalaan fikradahooda, dareenkooda, iyo fikradahooda iyagoo u maraya wadooyin hal abuur leh |
| II.E.1.2 | Wuxuu aqoonsan yahay in agabka oo siyaabo cusub loo isticmaalo ay tahay hal-abuurnimo | Wuxuu abuuraa jawi lagu la qadariyo ismuujinta iyo hal-abuurka | Wuxuu u sharaxaa shaqaalaha, qoysaska iyo bulshada in hal-abuurku muhiim u yahay xallinta mashaakilaadka, is-muujinta dareenka, horumarinta isku kalsoonida iyo fikirka goonida ah |
| II.E.1.3 | Wuxuu dhiirigeliyaa habka hal-abuurka halkii uu ka dhiirigelin lahaa abuuritaanka shayga | Wuxuu ku dhiirigelisaa carruurta inay si xushmad leh u muujiyaan waxay jecel yihiin iyo waxay aysan jeclayn ee muusigga, fanka iyo riwaayadaha | Wuxuu baraa carruurta inay muujiyaan ku hal-abuurnimo iyo waayo-aragnimada bilicda gudaha bulshadooda iyo dhaqamada kala duwan |
| II.E.1.4 | Wuxuu adeegsadaa la hadalka nafteeda iyo hadalka dhinac socodka ah (self and parallel talk) si uu u sharaxo hal abuurka ilmuhu sameeyo | Wuxuu waydiiyaa su'aalo furan si uu u dhiirigaliyo u isticmaalka agabka siyaabo kala duwan, wuxuu taageeraa horumarinta hal-abuurka, uuna aqbalaa dookhyada shakhsiyeed | Wuxuu qiimeeyaa, qiyaasaa oo si joogto ah u wanaajiyaa farshaxanka, muusiga, iyo waayo-aragnimada riwaayadaha |
| II.E.1.5 | Wuxuu ku dhiirigeliyaa carruurta inay u isticmaalaan agabka hal hab wax ka badan | Wuxuu bixiyaa alaabo fikrad furfuran oo loo isticmaali karo in ka badan hal qaab | Wuxuu u sharaxaa shaqaalaha, qoysaska iyo bulshada waxa ay carruurtu ka bartaan fursadaha ay ku sameeyaan tijaabada iyo in ay u isticmaalaan alaabada u xallinta masalooyinka siyaabo hal abuur leh |

2. Taageerida Ciyaarta Riwaayadeed

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.E.2.1 | Wuxuu bixisaa wakhti isku xiran aan kala go' lahayn si ay u dhiirigeliso ciyaarta iska yeelyeelka ah | Wuxuu u qorsheeyaa wakhti ku filan gudaha iyo dibadda iyo agabka ciyaarta riwaayada ah oo loogu talagalay shaqsi iyo koox ahaan | Wuuxuu u sharaxaa asxaabta, qoysaska iyo xubnaha bulshada muhiimada ay leedahay ciyaarta iyo barashada la soo bandhigo, oo ay ku jiraan xirfadaha bulshada, is-xakamaynta iyo horumarinta luqadda |
| II.E.2.2 | Wuxuu ula shaqeeyaa carruurta xilliga ciyaarta siyaabo kor loogu qaadayo waxbarashada | Wuxuu adeegsadaa xeelado kala duwan si uu u dhiirrigeliyo korriinka carruurta, horumarka iyo waxbarashadooda xilliga ciyaarta | Wuxuu qiimeeyaa jadwalka maalinlaha ah iyo manhajka si loo hubiyo in xooga la saaro ciyaarta, sahaminta iyo isdhexgalka bulshada |

## F. Mas'uuliyadda Hiddaha Dhaqanka iyo hab-dhaqanka

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.F.1 | Wuxuu xaqiijiyaa ixtiraamka loo hayo oo ka warqabaa dhammaan dhinacyada barnaamijka, carruurta naafada ah, carruurta leh baahiyaha daryeel caafimaad oo gaarka ah, **dhaawaca masiibada taariikhiga ah,** iyo kuwa ka soo jeeda asal dhaqameed iyo afaf kala duwan | Wuxuu xaqiijiyaa ka mid ahaaanshaha, dhammaan dhinacyada barnaamijka, carruurta naafada ah, carruurta leh baahiyaha daryeel caafimaad oo gaarka ah, dhaawaca masiibada taariikhiga ah, iyo kuwa ka soo jeeda asal dhaqameed iyo afaf kala duwan | Wuxuu qiimeeya, qiyaasaa oo si joogto ah u wanaajiya deegaanka si loo hubiyo in ay dhaqan ahaan iyo luqad ahaanba ay ka warqab tahay oo ay kor u qaadayso ixtiraamka kala duwanaanshaha |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.F.2 | Wuxuu aqoonsadaa muuqaalada iyo hab dhaqamada xunxun ee bulsho wayn ee ku wajahan ilmaha iyo kooxda hiddaha dhaqankooda, qoomiyadkooda, bulshadooda, jinsigooda, ama luqada<br><br>Wuxuu aqoonsadaa saamaynta xun ee la'aanta sawiro caddaynaya aqoonsiga carruurta laga tirada badan yahay ee kooxda hiddaha dhaqankooda, qoomiyadkooda, bulshadooda, jinsigooda, ama luqada | Wuxuu wax ka beddelaa deegaanka fasalka si uu uga hortago muuqaalada iyo hab dhaqamada xunxun ee bulsho wayn ee ku wajahan ilmaha iyo kooxda hiddaha dhaqankooda, qoomiyadkooda, bulshadooda, jinsigooda, ama luqada iyo in kor loo qaado kuwa wanaagsan. Wuxuu doortaa, ka hadlaa, oo xoojiyaa buugaagta, sawirada, tusaalooyinka luqadaha, iyo hawlaha si ay u muujiyaan noocyo kala duwan ee mar dhif ah uun la arko ee ah, sawirro wanaagsan sanadka oo dhan, oo aan ahayn kaliya munaasabadaha gaarka ah<br><br>Wuxuu odorosaa saamaynta sawirada warbaahinta caanka ah iyo fariimaha kuwaas oo laga yaabo inay saameyn xun ku yeeshaan carruurta ka soo jeeda bulshooyinka dhaqamada qaarkood waxayna baaraan siyaalo wax ku ool ah oo iyaga loogaga hortago fasalka dhexdiisa | Wuxuu u doodaa isbedelada jawiga barnaamijka oo uu kor u qaadaa waxbarashada la wadaago ee ka dhexaysa dadka wada shaqeeya si ay uga hortagaan muuqaalada iyo hab dhaqamada xunxun ee bulsho wayn ee ku wajahan ilmaha iyo kooxda hiddaha dhaqankooda, qoomiyadkooda, bulshadooda, jinsigooda, ama luqada iyo in kor loo qaado kuwa wanaagsan<br><br>Wuxuu doortaa oo uu gaarsiiyaa shaqaalaha iyo asxaaba shaqada ilaha buugaagta, sawirada, muusiga, iyo hawlaha muujinaya noocyo kala duwan oo dhif la arko oo ah, muuqaalo wanaagsan oo caruurta iyo qoysaska ka soo jeedakooxaha hiddaha dhaqamo, qowmiyad, bulsho, jinsi, iyo luqadaha kala duwan |
| II.F.3 | Wuxuu aqoonsadaa oo bixiyaa tusaalooyin siyaabaha lagu muujiyo ixtiraamka luqadda guriga ama lahjadda carruurta (ay ku jirto luqadda midaarka) markay baranayaan Ingiriisiga caadiga ah<br><br>Wuxuu aqoonsadaa oo bixiyaa tusaalooyin siyaabo lagu taageero dadaalka qoysaska si ay carruurtoodu dib u soo ceshadaan iyo/ama u ilaashadaan afkooda hooyo | Wuxuu qorsheeyaa siyaabaha lagu muujiyo ixtiraam muuqaal ahaan iyo waxqabadyada barashada ee loogu talagalay luqadaha guriga iyo/ama lahjadaha (ay ku jiraan luqadda midaarka) ee carruurta iyo qoysaskooda<br><br>Wuxuu odorosaa xiisaha wuxuuna aqoonsadaa xeeladaha fasalka ee taageeraya dadaalka qoysaska si ay carruurtoodu dib u soo ceshadaan iyo/ama u ilaashadaan afkooda hooyo | Wuxuu abaabulaa oo kor u qaada tababbarka horumarinta xirfadeed ee hababka loogu daro barnaamijka oo dhan ixtiraamka iyo ilaalinta luqadda guriga ama lahjada carruurta (ay ku jirto luqadda midaarka) markay baranayaan Ingiriisiga caadiga ah |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| II.F.4 | Waxay si daacad ah oo xushmad leh uga hadlaan waxyaabaha ay iskaga midka yihiin iyo waxyaabaha ay kala duwanaanta ee ay carruurtu ku arkaan dadka, qoysaska, iyo bulshada dhexdeeda | Wuxuu siiyaa carruurta fursado ay ku bartaan naftooda, qoyskooda, luqadaha ay ku hadlaan dadka ku jira barnaamijka iyo bulshadu | Wuxuu u abuuraa fursado ay carruurtu ku bartaan danaha/xiisaha, caadooyinka, luqadaha, dhaqamada, iyo dalalka ay ka soo jeedaan qoysaska kale ee ku jira barnaamijka iyo bulshada deegaanka barnaamijka. |
| II.F.5 | Wuxuu aqoonsadaa kala duwanaanshaha dhaqameed ee qaababka xirrirka/ isgaarsiinta iyo hababka loo xalliyo dhibaatooyinka oo wata soo dhawayn iyo xaqiijinta danaha, halkii lala yaabi lahaa<br><br>Wuxuu qeexaa qaababka ugu wanaagsan ee xirfadaha lagama maarmaanka ah, sida xushmada iyo tixgelinta, ee dhaqamada kala duwan | Wuxuu u diyaariyaa hawlo sahamin ah oo u suurtageliya carruurta inay adeegsadaan habab kala duwan oo waxbarasho, oo ay ku jiraan xirfadaha wadaaga, isku-tiirsanaanta, iyo madax-bannaanida<br><br>Wuxuu muujiyaa oo ka hadlaa siyaabaha ay xirfadaha lagama maarmaanka ah, sida xushmada iyo tixgelinta, loogu muujiyo dhaqamada kala duwan oo uu u dejiyaa halbeegyada fasalka | Wuxuu kala shaqeeyaa shaqaalaha, qoysaska, iyo asxaabta si ay u qaabeeyaan habab lagu wadaago macluumaadka ku saabsan isku mid ahaanshaha dhaqanka iyo kala duwanaanshaha ee barnaamijka oo dhan iyo in la dejiyo halbeegyada barnaamijka ee horumarinta dabeecadda, ixtiraamka, iyo tixgelinta. |

3

# Nuxurka Aagga III:
# **Xiriirka Qoysaska**

## Halbeegga PELSB

***Bixiyaha daryeelka carruurta qoyska ee carruurta yaryar wuxuu aasaasaa oo ilaaliyaa xiriir togan, iskaashi lala yeesho qoysaska.***

Daryeel bixiyuhu waa inuu fahmo:

- baahida loo qabo in la ixtiraamo xulashooyinka qoysaska iyo yoolalka caruurtooda, iyo baahida loo qabo in qoysaska lagala hadlo manhajka iyo horumarka caruurtooda
- baahida loo qabo dareensanaaanta kala duwanaanshaha qaab dhismeedka qoyska iyo sooyaalka bulsho iyo dhaqameed.
- aragtiyaha qoysaska iyo sifooyinka, doorarka iyo cilaaqaadka qoysaska gudohooda iyo qoysaska iyo bulshada dhexdooda.
- Sida qoysaska loogu taageero qiimaynta fursadaha waxbarashada iyo samaynta go'aannada la xiriira korriinka iyo barbaarinta ilmaha.
- sida loogu xiriiriyo qoysaska adeegyo kala duwan oo qoyska ku jihaysan iyadoo lagu salaynayo khayraadka, mudnaanta, iyo walaacyada jira.

## Kartiyaha

### A. Fahmitaanka Qoysaska

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| III.A.1 | Wuxuu fahamsanyahay in barbaarintu ay tahay hab noloshaada oo dhan ah oo bilaabmaya dhalmada kahor iyo/ama korsashada kahor¬ | Wuxuu qeexaa isku xirnaanta, xiriirka, isku tiirsanaanta iyo ahaanshaha qoysas jiilal badan ka kooban ee horumarka qoyska | Wuxuu aqoonsadaa oo sharxaa cilladaha barbaarinta, xeeladaha iyo guulaha la xiriira marxalad kasta oo marxaladaha horumarka ah |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| III.A.2 | Wuxuu aqoonsadaa muhiimada ay caruurta u leeyihiin cilaaqaadka qoyskoodu wuxuuna ka taageeraa waalidiinta kartiyaha soo baxaya | Wuxuu taageeraa oo xoojiyaa awoodda waalidka iyo qoyska, kartiyaha soo baxaya, iyo isdhexgalka waalidka iyo ilmaha; wuxuu soo jeediyaa xeelado si qoyska looga caawiyo in ay ilmaha ku daboolaan nolol mashquul ah iyo in ay ka helaan farxad barbaarinta ilmahooda | Wuxuu ku dul dhistaa awoodaha waalidka iyo qoyska; wuxuu xoojiyaa isdhexgalka wanaagsan ee waalidka-ilmah; Wuxuu kor u qaadaa kartiyahaa waalidka ee wajahida caqabadaha iyo xalinta dhibaatooyinka¬ |

**B. Ka qaybgalinta Qoysaska** (Sidoo kale eeg: Qiimaynta, Qiyaasidda iyo Ku habboonaysiinta shaqsiga )

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| III.B.1 | Wuxuu aqoonsadaa muhiimada ay leedahay muddada hanuunintu, wuxuu ka jawaabaa su'aalaha ku saabsan barnaamijka wuxuuna ka caawiyaa ilmaha la qabsiga barnaamijka | Wuxuu siiyaa wakhti hanuunin si ay uga caawiso ilmaha usoo gudbida barnaamijka; wuxuu wax ka bartaa qoyska, caadooyinka, asalka, luqadaha lagaga hadlo guriga iyo wadamada ay u arkaan in ay muhiim u yihiin aqoonsigooda | Wuxuu dejiyaa muddada hanuuninta (shaqo baridda) oo taageerta ilmaha cusub in uu la qabsado kooxda iyo sidoo kale xubnaha jira; wuxuu sharxayaa muhiimada ay leedahay hanuunintu |
| III.B.2 | Wuxuu soo dhaweeyaa qoysaska maalin kasta oo uu ka caawiyaa ilmaha marka la kala tagayo iyo isu imaatinka | Wuxuu abuuraa oo uu ilaaliyaa goob soo dhawayn leh si loo fududeeyo kala taga iyo isu imaatinka togan | Wuxuu isticmaalaa macluumaadka ku saabsan qoys kasta si ay u abuurto jawi soo dhaweyn leh oo ka tarjumaya dhaqanka guriga, qowmiyadaha iyo luqadaha; wuxuu tusaaleeyaa kala tegid iyo isu imaatinka togan |
| III.B.3 | Waxay isweydaarsadaan xubnaha qoyska macluumaadka ku saabsan waxqabadyada ilmaha; macluumaadka waxaa lagu bixiyaa afkooda hooyo iyo iyadoo la adeegsanayo istiraatijiyada ay doorbidayaan qoysku mar kasta oo ay suurtagal tahay | Wuxuu sameeyaa xiriiri furfuran, iskaashi, labada dhinaba ah oo uu la yeesho qoys kasta; dhacdooyinka maalinlaha ah waxaa lagu sheegaa iyadoo la adeegsanayo luqadda guriga iyo istiraatijiyada ay qoysku doorbidayaan mar kasta oo ay suurtagal tahay | Wuxuu galaa oo adeegsadaa agabka si uu ugu fududeeyo wada xixiirka xubnaha qoyska afkooda hooyo iyo iyadoo la adeegsanayo istiraatijiyada ay doorbidayaan qoysku mar kasta oo ay suurtagal tahay |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| III.B.4 | Wuxuu si habboon uga jawaabaa su'aalaha qoyska ee ku saabsan koritaanka iyo horumarka | Wuxuu siiyaa macluumaadka iyo caawinta qoysaska si ay uga caawiso inay fahmaan koritaanka iyo horumarka caadiga ah; waxa ay samayn karaan si ay kor ugu qaadaan caafimaadka, shaqaynta garaadka (qorshaynta, abaabulka, la socodka dabeecadaha ku jihaysan hadafka), luqadda, horumarinta dareenka bulshada iyo garashada iyo sidoo kale dhismaha xiriirka qoyska | Wuxuu adeegsadaa agabka si uu u balaariyo qotada iyo ballaadhka macluumaadka la siiyo qoysaska iyo shaqaalaha, iyo sidoo kale inuu naftiisa wax ku baro |
| III.B.5 | Wuxuu fuliyaa hawlaha lagu gaadhayo hadafyada lagu heshiiyey ee qoysasku u dejiyeen ilmahooda | Wuxuu la shaqeyaa qoysaska si ay ugu daraan dhaqamada korineed ee la isku raacay; wuxuu isu dheelli tiraya rabitaanka iyo yoolalka qoysas badan ee loogu talagalay ilmahooda marka ay wax qorsheynayaan | Wuxuu kala shaqeeyaan qoyska si ay u qiimeeyaan horumarka laga gaarayo yoolalka korriinka ilmaha; wuxuu qorsheeyaa waxqabadyada barashada si ay uga jawaabaan qorshaynta wadajirka ah wuxuuna hubiyaa in qoysasku helaan macluumaad si ay u gaaraan go'aamo xog ogaal ah oo ku saabsan korriinka iyo horumarka ilmahooda |
| III.B.6 | Wuxuu u fiirsadaa oo u sharaxaa xubnaha qoyska horumarka uu ilmuhu ka gaarayo hadafyada lagu heshiiyey | Wuxuu kala hadliwaalidka horumarka ilmaha ee ku wajahan hadafyada lagu heshiiyey; wuxuu qabtaa shirarka waalidka muddadiiba mar | Wuxuu dejiyaa xeerarka iyo nidaamyada wada xiriirka joogtada ah oo ku saabsan horumarka laga gaaro hadafyada lagu heshiiyey |
| III.B.7 | Wuxuu aqoonsadaa in qoysasku u gudbiyaan caadooyinkooda iyo hiddaha dhaqanka carruurtooda ayna ku dhiirigeliyaan xubnaha qoyska inay ku wadaagaan hibadooda, xirfadaha iyo hab dhaqamada hiddaha dhaqameed barnaamijka daryeelka carruurta qoyska | Wuxuu ku casuumaa xubnaha qoyska inay wadaagaan hibadooda, xirfadaha iyo hab dhaqamada hiddaha dhaqameed wuxuuna qoysaska u habeeyaa fursadaha si ay uga qayb qaataan hawlaha waxbarashada carruurta ee guriga | Wuxuu tixgeliyaa saamaynta hiddaha dhaqameedku ay ku leeyihiin qiyamka, go'aamada, iyo hab-dhaqanka naftaada iyo dadka kale |
| III.B.8 | Wuxuu sharaxaa qiyamka dhaqanka, dhaqaalaha iyo qoyska ee la xiriira isticmaalka cuntada | Wuxuu qor u qaadaa ogaanshaha qiyamka dhaqanka, dhaqaalaha iyo qoyska ee la xiriira isticmaalka cuntada | Wuxuu abuuraa hab ay ku jiraan qoysasku go'aannada ku saabsan isticmaalka cuntada |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| III.B.9 | Wuxuu la shaqeeyaa qoysaska si ay u xaliyaan tabashooyinka ama isku dhacyada | Wuxuu ka shaqeeyaa xeelado iskaashiga si wax looga qabto isku dhaca | Wuxuu u isticmaalaa qoysaska farsamooyin wax ku ool ah oo xallinta isku dhaca ah marka loo baahdo |
| III.B.10 | Wuxuu u aragkaa qoysaska in ay la yihiin howl-wadaag qorsheynta isbeddelada kooxaha ama waaya-aragnimada waxbarasho | Wuxuu ka qaybgeliyaa qoysaska qorsheynta isbeddelka waayo-aragnimada waxbarasho | Wuxuu la shaqeeyaan qoysaska iyo howl-wadaagyada bulshada si ay isugu dubbaridaan adeegyada carruurta ka tagaysa barnaamijka daryeelka carruurta qoyska |
| III.B.11 | Wuxuu ka caawiyaa ilmaha ku dhaqanka xirfadaha isaga oo isticmaalaya xeelado lagu aqoonsaday Barnaamijka Waxbarashada Shakhsi ahaaneed (IEPs), Qorshayaasha Adeegga Qoyska ee Shakhsiga ah (IFSPs), iyo Qorshayaasha Wax ka Qabashada Shakhsiyeed ee Hay'adaha u Dhexeeya (IIIPs) | Waxay kala qaybgalaa qoysaska iyo kooxda waxbarashada gaarka ah si ay u horumariyaan Barnaamijyada Waxbarashada Shakhsiyeed (IEPs),Qorshaha Adeega Qoyska ee Shaqsiyeed (IFSPs) iyo Qabashada Shakhsiyeed ee Hay'adha u Dhexeeya(IIIPs) kuwaas oo cad oo la fahmi karo | Wuxuu u sharaxaa shaqaalaha, qoysaska iyo bulshada xuquuqda sharci ee qoysku u leeyahay adeegyada waxbarashada gaarka ah iyo nidaamka adeega hay'adaha u dhexeeya; wuxuu qoyska ka taageeraa u doodista adeegyada ilmahooda |

## C. Ku Xiriirinta Qoysaska Khayraadka

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| III.C.1 | Wuxuu ilaaliyaa sir ahaanshaha macluumaadka qoyska, u fiirsashada ilmaha, diiwaanada qiimaynta iyo hab dhaqanka ilmaha | Wuxuu abuuraa oo fuliyaa xeerarka sir ahaanshaha macluumaadka qoyska, u fiirsashada ilmaha, diiwaanada qiimaynta iyo hab dhaqanka ilmaha | Wuxuu ka qabgeliyaa qoysaska horumarinta sir ahaanshaha iyo xeerarka kale ee barnaamijka |
| III.C.2 | Wuxuu u qeexaa bulshada, caafimaadka iyo khayraadka bulshada qoysaska | Wuxuu aqoonsadaa kheyraadka bulshada oo siiya qoysaska macluumaadka; u gudbiya waalidiinta iyo qoysaska hay'adaha bulshada, caafimaadka, ama adeegyada bulshada marka loo baahdo | Wuxuu falanqeeyaa, qiimeeyaa, oo adeegsadaa habka ugu wanaagsan ee hadda jira iyo dhaqamada cilmi-baarista ku salaysan si uu u go'aamiyo marka gudbin/u diritaan loo baahan yahay |

2020

## D. Mas'uuliyadda Hiddaha Dhaqanka iyo hab-dhaqanka

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| III.D.1 | Wuxuu aqoonsadaa muhiimada ay caruurta u leeyihiin cilaaqaadka qoyskoodu wuxuuna ka taageeraa waalidiinta iyo qoysaska iyo kartiyaha soo baxaya | Wuxuu taageeraa oo xoojiyaa awoodda waalidka iyo qoyska, kartiyaha soo baxaya, iyo isdhexgalka waalidka iyo ilmaha; wuxuu soo jeediyaa xeelado dhaqan ahaan la mid ah si qoyska looga caawiyo in ay ilmaha ku daboolaan nolol mashquul ah iyo in ay ka helaan farxad barbaarinta ilmahooda | Wuxuu ku dul dhistaa awoodaha waalidka iyo qoyska; wuxuu xoojiyaa isdhexgalka wanaagsan ee waalidka-ilmah; Wuxuu kor u qaadaa kartiyaha korinta ilmaha ee dhaqan ahaan gaarka u ah, sare u qaadida fursadaha, wajihidda caqabadaha iyo xalinta dhibaatooyinka¬ |
| III.D.2 | Wuxuu aqoonsadaa xaaladda iyada oo loo eegayo dhaqan-dhaqaale, sharci, iyo garsoor ee ay qoysaska ka soo jeeda bulshooyinka dhaqamada kala duwan ku jiraan¬<br><br>Wuxuu aqoonsadaa oo uu adeegsadaa farriimaha dhaqameed ee togan ee laga soo sheego carruurta ka soo jeeda asal kala duwan si loo xoojiyo xiriirka qoysaska iyo bulshooyinkooda | Wuxuu xiriiriyaa farriimaha dhaqameed ee togan ee ku saabsan carruurta meelo kala duwan ka soo jeeda iyo waxqabadyada waxbarasho si uu u soo jeediyo waxqabadyo waxbarasho oo sidoo kale gacan ka geysan kara qoysaskooda, reerkooda, iyo bulshooyinkooda, iyadoo la aqoonsanayo in koox kasta oo dhaqameed laga yaabo inay leedahay yoolal dhaqan ahaan ku salaysan oo ay u dejiyeen carruurtooda<br><br>Wuxuu ku hawlgeliyaa qoysaska wada sheekaysiga si ay u go'aamiyaan noocyada hawlaha waxbarasho oo sidoo kale gacan ka geysan kara qoysaskooda, reerkooda, iyo bulshooyinkooda, isku xirka ka dhexeeya guriga iyo iskuulka | Wuxuu la shaqeeyaa asxaabta shaqada si loo naqshadeeyo habab lagu dhex geliyo farriimaha dhaqameed ee togan oo kala duwan ee laga sheego carruuraha ka soo jeeda asal dhaqamo kala duwan oo loogu soo daro deegaanka barnaamijka<br><br>Wuxuu qabanqaabiyaa tababaro iyo kulamo tababaro kuwaas oo farsamooyinka barbaarinta ilmaha ee dhaqan gaar ah ee ay ku taliyaan cilmi-baarayaasha midabka leh ee dhaqan ahaan ku salaysani ay ku taliyeen oo ay sharaxeen |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| III.D.3 | Wuxuu aqoonsadaa in qoysasku u gudbiyaan hiddaha dhaqanka, caadooyinkooda, iyo dhaqanka carruurtooda; wuxuuna ayna ku dhiirigeliyaa xubnaha qoyska inay ku wadaagaan hibadooda, xirfadaha iyo hab dhaqamada hiddaha dhaqameed barnaamijka Caruurnimada hore; oo ay ku muujiyaan isbeddelada ama la qabsiga lagu samayn karo jawaab celin | Wuxuu ku casuumaa xubnaha qoyska inay wadaagaan, aragtidooda dhaqameed, hibadooda, xirfadaha iyo hab dhaqamada hiddaha dhaqameed wuxuuna qoysaska u habeeyaa fursadaha si ay uga qayb qaataan hawlaha waxbarashada carruurta ee guriga, iyagoo muujinaya hiddaha dhaqamada kala duwan | Wuxuu kor u qaada oo kulataliyaa shaqalaha in ay u tixgeliyaan saamaynta saamaynta hiddaha dhaqameedku ay ku leeyihiin qiyamka, go'aamada, iyo hab-dhaqanka naftaada iyo dadka kale |
| III.D.4 | Wuxuu aqoonsadaa aragtiyaha dhaqameed iyo xoogga ay soo bandhigaan qoysasku, sida isku-duubnida bulshada ee yar iyo waayeelka iyo adkaysiga<br><br>Wuxuu aqoonsadaa baahida loo qabo in la beddelo ama lala qabsado hab-dhaqannada, qaabka, qaab-dhismeedka, iyo/ama xeeladaha si looga jawaabo waxa ay ka baratay/uu ka bartay qoysaska iyo bulshada | Wuxuu beddelaa ama hagaajistaa hab dhaqamada waxbaridda, hababka, iyo qaab-dhismeedka si loogu sii dul dhiso xoogga hiddaha dhaqameed iyo aragtida qoysaska iyo bulshada<br><br>Wuxuu qorsheeyaa waxqabadyada jiilalka oo dhexmara qoysaska kuwaas oo xoogga saaraya qiyamka dhaqameed ee kala duwan sida isku-tiirsanaanta, xalinta dhibaatada, iyo mas'uuliyadda | Wuxuu naqshadeeyaa oo uu u doodaha kulannada dib umilicsiga ee shaqaalaha iyo dadka ay isla shaqeeyaan ay ku falanqayn karaan oo ay isbarbar dhigi karaan fikradaha dhaqameed ee saameeya naqshadaynta barnaamijka, hababka hawlgalka, iyo qaab dhismeedka waxbarista.<br><br>Wuxuu horumariyaa isbeddelada barnaamijka wuxuuna kala shaqeyaa shaqaalaha ay isla shaqeeyaaan la-qabsiyada ku sii dul dhisa xoogga hiddaha dhaqameed iyo aragtida qoysaska iyo bulshada |
| III.D.5 | Wuxuu u qeexaa bulshada, caafimaadka iyo khayraadka bulshada qoysaska, oo ay ku jiraan kuwa dhaqan ahaan isku midka ah | Wuxuu aqoonsadaa kheyraadka bulshada ee dhaqan ahaan isku midka ah ee bulshadu ku kalsoon tahay oo siiya qoysaska macluumaadka; u gudbiya waalidiinta iyo qoysaska hay'adaha bulshada, caafimaadka, ama adeegyada bulshada marka loo baahdo | Wuxuu falanqeeyaa, qiimeeyaa, oo adeegsadaa habka ugu wanaagsan ee hadda jira iyo dhaqamada cilmi-baarista ku salaysan ee dhaqan ahaan ku habboon si loo go'aamiyo marka u gudbin adeegyada loo baahan yahay |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| III.D.6 | Wuxu aqoonsadaa oo sharaxaa qaybaha muhiimka ah ee ururada dhaqan ahaan la midka ah bulshooyin dhaqameedyo gaar ah<br><br>Wuxu aqoonsadaa oo tilmaamaa qaybaha muhiimka ah ee ururada bixiya adeegyo aad u fiican oo la siiyo shakhsiyaadka ka socda dhaqamo kala duwan | Wuxuu ku xiraa qoysaska ururada taageera dhaqan ama bulsho ahaan, u doodayaasha, iyo munaasabadaha bulshadooda<br><br>Wuxuu aqoonsadaa agabyo kala duwan oo ku habboon qofka iyo sidoo kale dookhyada dhaqanka<br><br>Wuxuu meesha ka saaraa malo-awaalka ah in shakhsiyaadka ka soo jeeda kooxaha dhaqameedyada qaar ay mar walba door bidaan adeegyada bulshadooda dhaqameed | Wuxuu dhisaa xiriiro uu la yeesho ururo dhaqan iyo bulsho taageera wuxuuna u sheegaa shaqaalaha iyo ururada qoysaska, u doodayaasha, iyo munaasabadaha ka jira bulshooyinka ee ka tarjumaya qoysaska carruurta loo adeego.<br><br>Wuxuu uu la shaqeeyaa shaqaalaha si ay u abuuraaraan habab lagu caawiyo qoysaska in ay xidhiidh la yeeshaan ururada dhaqan ama bulsho ahaan taageera, u doodayaasha, iyo munaasabadaha ka jira bulshooyinkooda dhaqameed iyo sidoo kale kuwa ku jira dhaqanka dadka ugu badan |
| III.D.7 | Wuxuu liisteeyaa oo helaa hay'adaha aqoonta leh iyo bulshada ku salaysan ee la aaminsanyahay, machadyada, iyo ganacsiyada oo ka tarjumaya bulshooyinka dhaqanka ee qoysaska loogu adeego. | Wuxuu la shaqeeyaa ururada ama machadyada bulshada ku salaysan ee aqoonta iyo kalsoonida leh si ay u bixiyaan talo, adeegyo, iyo khibrad¬<br><br>Wuxuu siisaa qoysaska fursada ah inay ku xidhmaan ururada bulshada ku salaysan iyo machadyada ama kuwa ku jira dhaqanka sarreeya ee ixtiraamaya xaqa qoys kasta uu u leeyahay inuu sameeyo doorashooyin xog warqab ah.¬ | Wuxuu u doodaa oo mudnaanta siiyaa ka-qaybgalka hay'adaha aqoonta leh iyo bulshada ku salaysan ee la aaminsan yahay, machadyada, iyo ganacsiyada si ay u bixiyaan adeegyada iyo khibradda ay u leeyihiin barnaamijka<br><br>Wuxuu uu la shaqeeyaa shaqaalaha si ay u abuuraaraan habab lagu caawiyo qoysaska in ay samaystaan xidhiidh ka baxsan goobta barnaamijka oo ay la leeyihiin hay'ado iyo machadyo aqoon leh oo la aamini karo oo bulshada ku salaysan ama kuwa ku jira dhaqanka dadka ugu badan |

4

# Nuxurka Aagga IV: **Qiimaynta, Qiyaasidda iyo ku Habboonaysiinta Shakhsiga**

## Halbeegga PELSB

***Bixiyaha daryeelka carruurta qoyska ee carruurta yaryar wuxuu isticmaala qiimayn aan rasmi ahayn iyo mid rasmi ah iyo xeelado qiimayn iyo qiyaasid si uu u qorsheeyo oo ay uga shaqsiga ugu habboonaysiiyaan manhajka iyo dhaqamada waxbaridda.***

Daryeel bixiyuhu waa inuu fahmo:

- sida loogu fiirsado, loo diiwaangeliyo, loona qiimeeyo horumarka iyo waxbarashada carruurta yaryar oo loogu hawlgeliyo carruurta inay is-qiimeeyaan.
- sida loo isticmaalo macluumaadka lagu helo u fiirsashada isku xirnaanta qoyska iyo cilaaqaadka si loo taageero waxbarashada ilmaha.
- sida loo isticmaalo natiijooyinka qiimaynta si loo aqoonsado baahiyaha iyo qaababka waxbarashada si loo qorsheeyo barnaamijyada ku haboon, deegaanka, iyo isdhexgalka.
- sida loo abuuro oo loo isticmaalo qalabyada qiimaynta barnaamijka qaabaynta iyo soo koobitaanka si kor loogu qaado loona ilaaliyo tayada barnaamij dhamaystiran oo loogu talagalay carruurta, qoysaska, iyo bulshada.

## Kartiyaha

### A. U fiirsashada, Duubista iyo Qiimaynta Horumarka

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| IV.A.1 | Wuxuu u fiirsadaa ilmo kasta maalin kasta si uu u barto waxa uu jecel yahay, waxa aanu jeclayn, qaabka barashada, hababka jawaabta iyo heerka korriinka | Wuxuu adeegsadaa habab kala duwan, marar badan si uu u eego una qiimeeyo meelaha ay ku wanaagsan yihiin, baahiyaha, danaha, dookhyada, iyo siyaabaha ay ugu jawaabaan dadka iyo dhacdooyinka | Wuxuu u sharaxaa shaqaalaha fikradaha qiimaynta, hababka cilmi-baarista iyo muhiimada ay leedahay la wadaagida qoysaska natiijooyinka |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| IV.A.2 | Wuxuu u fiirsadaa carruurta da' kasta leh daqiiqado maalin kasta | Wuxuu diirada saaraa xirfadaha ay muujiyeen laba ama saddex carruur ah inta lagu jiro howlaha kooxda | Wuxuu abuuraa habab lagu qiimeeyo carruurta midkasta ah marka ay la shaqaynayaan koox carruur ah oo da' badan ah |
| IV.A.3 | Wuxuu soo ururiyaa oo diiwaangeliyaa macluumaadka ku saabsan ilmo kasta | Wuxuu soo ururiyaa oo habeeyaa macluumaadka ku saabsan ilmo kasta, oo ay ku jiraan sawiro, qoraallada u fiirsiga, muunada shaqo, warbixinnada xubnaha qoyska iyo diiwaannada xasuus qorada si loogu isticmaalo doodaha iyo u qorsheynta ilmo kasta | Wuxuu dejiyaa shuruudo, habraacyo iyo hababka diiwaanka ee qiimaynta horumarka carruurta oo lagu samaynayo af Ingiriisi iyo luqadda guriga ee ilmaha |
| IV.A.4 | Wuxuu qeexaa asalka luqadeed iyo dhaqan ee ilmo kasta oo uu u fiirsaday | Wuxuu ku qiimeeyaa ilmaha Ingiriisi iyo afkiisa ama afkeeda guriga mar kasta oo ay suurtagal tahay | Wuxuu falanqeeyaa, qiimeeyaa, oo adeegsadaa habka ugu wanaagsan ee hadda jira iyo dhaqamada cilmi-baarista ku salaysan ee la xiriirta qiimaynta carruurta kala duwan dhaqan iyo luqad ahaanba |
| IV.A.5 | Wuxuu u sharaxaa qoysaska waxqabadka ilmaha ee waxqabadka iyo hawlaha | Wuxuu soo koobaa oo la wadaagaa natiijooyinka qiimaynta qoysaska; wuxuu waydiiyaa fikradooda | Wuxuu falanqeeyaa natiijooyinka qiimaynta oo wuxuu la adeegsadaa macluumaadka qoysaska si ay u abuuraan dhaqamada korrinta ilmaha oo la isku raacsan yahay iyo yoolalka loogu talagalay koritaanka ilmaha |
| IV.A.6 | Wuxuu xubnaha qoyska la wadaagaa macluumaadka ku saabsan waxa ilma kastaa baranayo iyo waxa uu sahaminayo | Wuxuu doortaa yoolalka shakhsi kasta iyo waxqabadyada ku salaysan u fiirsashada iyo qiimeynta korriinka iyo horumarka ee ilmo kasta | Wuxuu kala shaqeeyaa waalidka si loo abuuro yoolalka ku salaysan u fiirsashada waalidka iyo daryeel bixiyaha |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| IV.A.7 | Wuxuu raaca tilmaamaha marka uu samaynayo qiimaynta socota si uu u hubiyo in si sax ah loo sameeyay | Waxay fuliyaa hababka qiimaynta oo qaabaynta oo socda; wuxuu adeegsadaa indho-indhayn joogto ah si loo aqoonsado horumarka laga muujiyay hadal ahaan iyo mid aan hadal ahaynba | Wuxuu qiimeeyaa oo doortaa qalabka qiimaynta ee ku haboon in loo isticmaalo iyadoo uu ku salaynayo baahiyaha ilmaha iyo ku haboonaanta korriinka ee habka xog ururinta (haddii turjumaan la isticmaalayo, wuxuu fahmayaa muhiimada daacad ahaanta habka qiimaynta) |
| IV.A.8 | Wuxuu aqoonsadaa sida goobta la joogo, macnaha guud iyo qofka qiimaynayaa ay u saamayn karaan habka qiimaynta iyo natiijooyinka | Wuxuu aqoonsadaa oo yareeyaa saamaynta goobta la joogo, macnaha guud ama sifooyinka qiimeeyuhu ay ku leeyihiin habka qiimaynta iyo natiijooyinka | Wuxuu falanqeeyaa saamaynta macnaha guud laga yaabo in uu ku yeeshay markii la turjumayey natiijooyinka |
| IV.A.9 | Wuxuu sheegaa xeerarka iyo qawaaniinta loogu talagalay caafimaadka iyo baaritaanada korriinka; wuxuu qeexaa farqiga u dhexeeya baarista, qiimaynta iyo qiyaasidda | Wuxuu siiyaa qoysaska macluumaadka ku saabsan baaritaanka iyo shuruudaha gobolka; wuxuu aqoonsadaa agabka carruurta leh qodobada khatarta; wuxuu la wadaagaa agabka waalidka iyo/ama mas'uuliyiinta; wuxuu sameeyaa u gudbinta adeegyada oo ku habboon | Wuxuu u sharxayaa shaqaalaha, qoysaska iyo bulshada nidaamka maxalliga ah ee u gudbinta carruurta yaryar ee laga qabo welwelka caafimaadka iyo korriinka |

## **B. Qiimaynta iyo Isticmaalka Xogta si wax loo Qorsheeyo** (Sidoo kale eeg: Cilaaqaadka lala leedahay Qoysaska)

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| IV.B.1 | Wuxuu ka warbixiyaa macluumaadka maalinta ee ilmaha oo u siiyaa qoyskiisa ama keeda si ay uga caawiyaan u gudbitaanka wakhti ka baxsan daryeelka ilmaha qoyska | Wuxuu qoyska kala hadlaa hawlaha maalinlaha ah ee ilmaha si loo qorsheeyo oo kor loogu qaado joogtaynta u dhaxaysa guriga iyo barnaamijka daryeelka carruurta qoyska | Wuxuu dejiyaa oo la wadaaga xeelado wax ku ool ah qoyska si loo hubiyo in baahiyaha ilmaha la daboolayo; wuxuu kala shaqeyaa qoysaska in ay aqoonsadaan siyaabaha wax lagu baranayo in lagu kordhiyo guriga |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| IV.B.2 | Wuxuu dib u milicsadaa indha-indheynta oo si degdeg ah uga jawaabaa si uu u taageero xirfadaha cusub ee soo koraya | Wuxuu adeegsadaa indho-indhaynta ilmaha si uu u qorsheeyo hawlo macno leh oo kor u qaadaya korriinka iyo horumarka oo uu ku wargeliyaa xubnaha qoyska | Wuxuu falanqeeyaa natiijooyinka dhabta ah, qiimaynta waxqabadka ku salaysan ee barashada ilmaha ee Ingiriisiga iyo luqadda guriga; wuxuu si ula kac ah u isticmaalaa macluumaadka si uu u qorsheeyo oo u hago manhajka, waxbarista iyo la macaamilka ilmaha; wuxuu uga warbixiyaa qoysaska |
| IV.B.3 | Wuxuu ilmaha u hagaajiyaa hawlaha isaga oo isticmaalaya macluumaadka qiimaynta | Wuxuu fududeeyaa barashada ilmaha iyadoo lagu salaynayo ilo badan oo macluumaad ah oo la ururiyay muddo wakhti ah (warbixinta waalid, indho-indhayn, baaritaan, qiimaynta qaabaynta) | Wuxuu u bedelaa deegaanka waxbarashada iyo xeeladaha waxbarista iyadoo ku salaysan natiijooyinka qiimaynta ilmaha |
| IV.B.4 | Wuxuu u fiirsadaa isdhexgalka qoysaska oo si uu ula kac ah xubnaha qoyska ugu sheegaa waxyaabaha ay ku xooganyihiin | Wuxuu soo ururiyaa macluumaad si uu si fiican u fahmo dabeecadda iyo xoogga qoys kasta si ay u bixiyaan macluumaadka, hagitaanka iyo taageerada loogu talagalay qoyska oo ah cilaaqaadka aasaasiga ah ee ka dhex jira waxbarashadu. | Wuxuu tixgeliyaa arrimaha ka qaybqaata adkeysiga iyo khatarta ku jira horumarinta cilaaqaadka qoyska ee caafimaadka qaba wuxuuna ku soo daraan barnaamijka |

## C. Qiimaynta iyo Isticmaalka Xogta si kor loogu Qaado loona Ilaaliyo Tayada Barnaamijka

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| IV.C.1 | Wuxuu doortaa farsamooyin kala duwan, qalab qiimayn iyo habraacyo lagu qiimeeyo waxtarka barnaamijka | Wuxuu qiimeeyaa barnaamijka iyadoo la isticmaalayo qalabka qiimeynta si loo xaqiijiyo horumarinta barnaamijka oo joogto ah | Wuxuu ka tarjumayaa waxtarka barnaamijka isagoo adeegsanaya xogta qiimaynta iyo natiijooyinka qiimaynta si uu u hubiyo horumar joogto ah oo uu wax ka beddelaa barnaamijka hadba sida loogu baahdo |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| IV.C.2 | Wuxuu u dejiyaa hadafyada loogu talagalay barnaamijka | Waxa uu ka qayb qaataa qorshaynta istiraatijiyadeed iyo dejinta hadafyada barnaamijka ee ku salaysan qiimaynta | Wuxuu abuuraa qorshaynta istiraatijiyadeed iyo dejinta yoolalka barnaamijka iyadoo adeegsanayo cilmi-baarista hadda jirta iyo isbeddellada moodeelada barnaamijka |

2020

## D. Mas'uuliyadda Hiddaha Dhaqanka iyo hab-dhaqanka

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| IV.D.1 | Wuxuu ku dhiirigeliyaa carruurta inay keli keli ula falgalaan caruurta kale iyo koox yar ahaan iyo koox weynba marka ay sahaminayaan, tijaabinayaan, iyo xalinayaan dhibaatada iyagoo xaqiijinaya kala duwanaanshaha shakhsi ahaaneed iyo dhaqameed. | Wuxuu siiyaa carruurta waxqabadyo macne leh, gacan ku qabasho ah oo taageera oo ku celceliya xirfadaha cusub ee ay barteen, wuxuu dhiirigeliyaa sahaminta iyo tijaabinta iyda oo lagu sii dul dhisayo xirfadaha lagu soo bandhigay guriga iyo iskuulka | Wuxuu dhisaa jawi waxbarasho oo u ogolaanaya carruurta inay wax doortaan, ka qaybqaataan khibradaha shaqsi ahaan, koox yar ahaan iyo koox weynba marka ay sahaminayaan, tijaabinayaan, iyo xalinayaan dhibaatada iyagoo ku sii dul dhisaya xirfadaha lagu soo bandhigay guriga iyo iskuulka |
| IV.D.2 | Wuxuu aqoonsadaa xirfadaha sarreeya iyo kartida ay carruurtu ku soo bandhigaan guriga ee lagu qiimeeyo dhaqankooda oo ay qiimeeyaan qoysaskooda<br><br>Wuxuu ku dhiirigeliyaa qoysaska inay ogaadaan oo ay ka hadlaan xirfadaha iyo awoodaha ay carruurtu ku soo bandhigaan guriga<br><br>Wuxuu meesha ka saarayaa malo-awaalka ah in carruurta midabka ah uu inta badan koritaankoodu uu daahsan yahay, wuxuuna aqoonsan karaa xirfadaha horumarsan iyo sidoo kale marka ay caajisaan carruurta midabka ah | Wuxuu ka qaybgeliyaa qoysaska wada sheekaysiga ku saabsan xirfadaha horumarsan ee ilmaha iyo kartida lagu soo bandhigo guriga oo laga yaabo inaan si fudud loogu arki karin/loogu qeexin iskuulka<br><br>Wuxuu qorsheeyaa hawlaha waxbarashada oo xaqiijiyanaya oo wax ku ool ah isagoo weydiinaya su'aalo qoysaska oo soo saaraya faahfaahinta gacan ka geysaneysa horumarinta xeeladaha waxbarista ee si fiican ugu shaqeeya carruurta ka soo jeeda asal dhaqameedyo kala duwan | Isticmaalka fikradda qoyska, wuxuu iskaashi la sameeyaa dadka la shaqeeya si ay si sax ah ugu turjumaan oo si habboon isugu xiraan xirfadaha iyo kartida carruurtu ku soo bandhigayaan guriga iyo iskuulka Tusayaasha Horumarka Carruurnimada Hore ee Minnesota iyo halbeegyada kale iyo qiimaynaha loo isticmaalo goobta |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| IV.D.3 | Wuxuu u fiirsadaa ilmo kasta maalin kasta, isagoo isticmaalaya habraacyada uu dejiyo barnaamijku ee ay wargeliyaan waalidiinta/ qoysasku | Wuxuu adeegsadaa habab kala duwan, oo ay ku jiraan qaar dhaqan ahaan gaar ah, marar badan si uu u eego una qiimeeyo meelaha ay ku wanaagsan yihiin, baahiyaha, danaha, dookhyada, iyo siyaabaha ay ugu jawaabaan dadka iyo dhacdooyinka | Wuxuu u sharaxaa shaqaalaha la shaqeeya fikradaha qiimaynta iyo hababka cilmi-baarista, oo ay ku jiraan qaar dhaqan gaar u gooni, iyo muhiimada ay leedahay la wadaagida qoysaska natiijooyinka |
| IV.D.4 | Wuxuu aqoonsadaa marka u fiirsashada fasalka iyo qiimayntu aysan qaban ama ka tarjumaynin xirfadaha iyo kartida ay qoysasku qadariyaan, kuwaas oo qaarkood laga yaabo inay dhaqan ahaan gaar u yihiin. | Wuxuu doortaa qalabka ku habboon ee dhaqan ahaan cayiman wuxuuna la shaqeeyaa qoysaska si uu u caawiyo aqoonsiga xirfadaha iyo kartida iyo inuu ku wargeliyo qiimeynta carruurta | Wuxuu u doodaa oo mudnaanta siiya qalabka ku habboon dhaqan ahaan iyo dhaqan ahaan cayiman in lagu isticmaalo barnaamijka qiimaynta carruurta<br><br>Wuxuu ku tababaraa iyo ku hagaa shaqaalaha siyaabaha loo isticmaalo macluumaadka dheeraadka ah ee qoysaska ka yimaada qiimeynta carruurta |

5

# Nuxurka Aagga V:
# **Horumarka Taariikhiga ahaa iyo ka Casriga ah ee Waxbarashada Carruurnimada Hore**

## Halbeegga PELSB

***Bixiyaha daryeelka carruurta qoyska ee carruurta yaryar wuxuu fahmaa horumarka taariikhiga ahaa iyo ka casriga ah ee waxbarashada carruurnimada hore.***

Daryeel bixiyuhu waa inuu fahmo:

- aasaasyada taariikhaha badan, falsafada, iyo aasaaska bulsho ee waxbarashada carruurnimada hore iyo sida aasaasyadani u saameeyaan fikirka iyo hab dhaqanka hadda jira.
- saamaynta xaaladaha bulshada ee carruurta iyo qoysaska, iyo arrimaha hadda jira iyo isbeddellada, arrimaha sharciga, sharci dejinta, iyo siyaasadaha kale ee dadweynaha ee saameeya carruurta, qoysaska, iyo barnaamijyada carruurta yaryar iyo xirfadda shaqo ee carruurnimada hore.

## Kartiyaha

### A. Fahamka Aasaaska Horumarka/Korriinka Carruurnimada Hore

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| V.A.1 | Wuxuu aqoonsadaa dhaqamada taariikhiga ahi in laga yaabo in ay saamayn ku yeelan karaan barnaamijka iyo isdhexgalka carruurta | Wuxuu soo koobaa saamaynta taariikheed, bulsho, iyo siyaasadeed ay ku leeyihiin hab dhaqamd carruurnimada hore ee hadda jira | Wuxuu u sharaxaa shaqaalaha, qoysaska iyo bulshada xirfadda carruurnimada hore iyo saamaynta taariikheed, bulsho, iyo siyaasadeed ee hab dhaqamdeeda hadda jira |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| V.A.2 | Wuxuu ogsoon yahay in aragtida korriinka iyo cilmi-baaristu ay matalaan aragtiyo gaar ah oo aanay daruuri ahayn in dhammaan la wada aaminsan yahay | Waxa uu ka hadlaa aragtiyo kala duwan oo horumarineed iyo dhaqameed, aragtiyaha iyo cilmi baarista | Wuxuu dib u milicsadaa aragtiyaha horumarinta dhaqanka iyo cilmi-baarista iyo sida ay u saamayso dabeecadda shakhsi ahaaneed iyo hab dhaqanka |
| V.A.3 | Wuxuu aqoonsadaa in aragtiyo hadda socdaa jiraan oo laga yaabo inay saameyn ku yeeshaan barnaamijka | Wuxuu aqoonsadaa aragtiyo hadda jiraa ay jiraa iyo hab dhaqannada caddaynta ku salaysan ee xirfada shaqo ee carruurnimada hore oo uu dib u eegis ugu sameeyaa hab dhaqanka si waafaqsan | Wuxuu falanqeeyaa, qiimeeyaa, oo adeegsadaa habka ugu wanaagsan ee hadda jira iyo dhaqamada cilmi-baarista ku salaysan ee isdhexgalka maalinlaha ah iyo la adeegsadaa carruurta iyo qoysaska |
| V.A.4 | Wuxuu aqoonsan yahay qiimaha ay tayadu u leedahay daryeelka carruurnimada hore iyo waxbarashada | Wuxuu tusaaleeyaa dadaalka horumarinta/hagaajinta ah ee joogtada ah si loo dhiso barnaamij tayo leh | Wuxuu horumariyaa dadaallada horumarinta tayada ee maxalliga ah, gobolka iyo qaranka; wuxuu baraa macaamiisha |

# Nuxurka Aagga VI: **Xirfadle ahaanshaha**

## Halbeegga PELSB

***Bixiyaha daryeelka carruurta qoyska ee carruurta yaryar wuxuu muujiyaa aragtida horumarka xirfadeed in uu yahay dadaalka iyo mas'uuliyadda socota nolosha xirfadaada oo dhan, oo ay ku jiraan ka qaybgalka barashada shakhsiyeed maalin kasta iyo dadaal dheer oo xirfada shaqo oo dhan ah iyo mas'uuliyad si ay u wargeliso hab dhaqamada waxbarida iyo la falgalka carruurta yaryar .***

Daryeel bixiyuhu waa inuu fahmo:

- ka qayb qaadashada waxbarashada joogtada ahi waxay lama huraan u tahay bixinta daryeel iyo waxbarasho wax ku ool ah.
- sida loo dhaqangeliyo hab dhaqamada waxtarka leh.
- hab dhaqamada muujiya hab dhaqanka xirfada iyo akhlaaqda shaqada.
- hab dhaqamada ganacsiyada yaryar, oo ay ku jiraan sida:
  - loogu hoggaansamo dhammaan xeerarka iyo sharciyada loogu talagalay daryeelka carruurta qoyska.
  - sida loo abuuro qorshaha ganacsi yar.
  - sida loo dejiyo heerarka qiimaha iyo suuq-geynta ganacsi yar.
  - sida loo isticmaalo hab dhaqannada xisaabinta iyo diiwaangelinta guud ee la aqbali karo.
  - sida loo waraysto iyo sida loogu diwaangeliyo carruurta barnaamijka daryeelka carruurta qoyska.
  - sida loo ilaaliyo/dayac tiro guriga, qalabka iyo alaabta.
  - sida loo shaqaaleysiiyo, tababaro oo loo kormeero shaqaale ama khabiiro qandaraasle ah oo bixiya barnaamijyo kobcin ah.

## Kartiyaha

### A. Ka qayb qaadashada Horumarinta Xirfada

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VI.A.1 | Wuxuu ka qaybqaataa hawlaha horumarinta xirfadeed ee socda, waxa uu waydiiyaa su'aalo, oo ka dib u milicsi ku sameeyaa waxbarashada | Wuxuu qorsheeyaa, hawlgeliyaa oo dib u milicsadaa siyaabaha lagu horumarinayo kartida shakhsi ahaaneed iyada oo loo marayo shirarka xirfadeed, khayraadka, waxbarasho iyo fursadaha tababarka oo dheeraad ah | Waxay mudnaanta siiyaa hawlaha horumarinta xirfadeed oo joogto ah naftiisa iyo dadka kaleba, wuxuuna waafajiyaan hab dhaqamada |
| VI.A.2 | Wuxuu fahmayaa in koboca xirfadeed yahay geedi socod joogto ah; wuxuu ka tarjumayaa barashada oo ku soo daraa u fulinta ficil ahaan | Wuxuu horumariyaa oo qaabeeyaa hab-dhaqannada ugu wanaagsan mar kasta, oo ay ku jiraan marka ay la shaqaynayaan shaqaalaha, tabaruceyaasha iyo qoysaska | Wuxuu kormeeraa shaqaalaha (haddii ay jiraan) wuxuuna ka taageeraa adeegsiga hababka ugu wanaagsan iyo gaaritaanka yoolalka horumarinta xirfadda |
| VI.A.3 | Wuxuu aqoonsadaa meelaha uu ku wanaagsan yahay iyo fursadaha koritaanka iyo isbeddelka; wuxuu kaga jawaabaa rayi celinta ay siiyaan xirfadlayaasha ee waxtarka leh isaga oo kormeeraya oo beddelaya dabeecadda | Wuxuu dib u milicsadaa waxbarista iyo hab dhaqanada barnaamijka, indho-indheynta carruurta, natiijooyinka, rayi celinta iyo dhaleecaynta wax dhisaysa si loo sii horumariyo yoolalka gaarka ah ee waxbarista iyo hagaajinta hab dhaqamada | Wuxuu qiimeeyaa kala duwanaanshaha shaqiyaadka, aragtiyaha badan iyo qiyamka lagu arkay hab dhaqamada waxbarida ee kala duwan |
| VI.A.4 | Wuxuu leeyahay ama uu kasbanayaa xirfado teknolojiyad oo waxtar leh si uu u taageero hadafyada barnaamijka | Wuxuu adeegsadaa xirfadaha tignoolajiyada si uu u gaaro yoolalka barnaamijka | Wuxuu isbarbardhigaa oo doortaa softiweerka iyo qalabka elegtarooniga ah ee sida ugu fiican u taageera barnaamijyada iyo baahiyaha ganacsi |
| VI.A.5 | Waxa uu aqoonsan yahay in websaysyadu ay leeyihiin heerar kala duwan oo macluumaad lagu kalsoonaan karo | Waxa uu dib u eegaa macluumaadka websaydyada si uu u go'aamiyo heerka kalsoonida isaga oo adeegsanaya halbeegyada caadiga ah | Wuxuu falanqeeyaa macluumaadka websaydyada wuxuuna si joogto ah ugu tiirsan yahay khayraadka lagu kalsoonaan karo; si habboon u tixraaca macluumaadka |

## B. Adeegsiga Hab Dhaqamada Waxtarka leh

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VI.B.1 | Wuxuu magacaabaa oo dib u milicsadaa dabeecadda shakhsi ahaaneed ee bixinta daryeelka iyo waxbarashada carruurta yaryar | Wuxuu milicsadaa oo uu qiimeeyaa dabeecadaha shakhsi ahaaneed ee la xiriira ka shaqaynta ganacsi yar | Wuxuu kala hadlaa dabeecadaha shakhsiyeed ee wax ku oolka dadka kale ee raba xirfada shaqo |
| VI.B.2 | Wuxuu ku ilaaliyaa habaysnaanta deegaanka si la joog dhab ah, muuqaal fiidyow ama jilitaanka guryaha daryeelka carruurta iyo in uu la sameeyo kooxo da'o kala duwan | Wuxuu qorsheeyaa deegaanka daryeelka carruurta qoyska; wuxuu raadiyaa rayi celin xirfadeed iyo tababarid; wuxuu did u milicsadaa guulaha ama caqabado | Wuxuu yaqaanaa oo qiimeeyaa siyaabo badan oo loo abaabulo deegaanka daryeelka carruurta qoyska; wuxuu u habeeyaa jawi ku haboon carruurta koox ahaan |
| VI.B.3 | Wuxuu qeexayaa jawiga shucuureed ( diirinaanta, ku raaxaysiga iyo ixtiraamka la muujiyay) iyo xeeladaha waxbarida ee loo arkay dhab ahaan, fiidyow ahaan ama lagu jilay goobaha caruurnimada hore | Wuxuu qorsheeyaa oo fuliyaa hawlo shaqsi ahaan iyo koox tiro yar ah iyada oo la adeegsanayo xeelado waxbarid oo badan; wuxuu raadiyaa rayi celin xirfadeed iyo tababarid, wuxuu did u milicsadaa guulaha ama caqabado | Wuxuu sharxaaa sida wax looga beddelo jawiga shucuureed iyo xeeladaha waxbarista si loo daboolo baahiyaha gaarka ah |

## C. Muujinta Anshaxa Xirfadle ahaanshaha

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VI.C.1 | Wuxuu sheegaa hadafka iyo ujeedada barnaamijka | Wuxuu dhiirigeliyaa hadafka iyo ujeedada barnaamijka | Wuxuu u sharaxaa hadafka, ujeedada iyo halbeegyada barnaamijka asxaabta shaqada, qoysaska, iyo dadka kale |
| VI.C.2 | Wuxuu aqoonsadaa nidaamka caqiidiisa ee ku saabsan daryeelka carruurnimada hore iyo waxbarashada | Wuxuu qeexaa falsafada shakhsiyeed ee daryeelka carruurnimada hore iyo waxbarashada | Wuxuu qiimeeyaa barnaamijka(yada) daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada hore iyo hab dhaqamadu in ay waafaqsanyihiin falsafada shaqsiyeed |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VI.C.3 | Wuxuu la samaystaa xuduudaha xirfadeed ee uu la leeyahay carruurta, qoysaska iyo asxaabta shaqada | Wuxuu qeexaa oo uu ka hadlaa arrimaha iyo xuduudaha cilaaqaadka uu la leeyahay qoysaska iyo asxaabta | Wuxuu abuuraa xeerar wuxuuna sharxaa arrimaha la xiriira samaynta cilaaqaad xirfadeed oo lala yeesho qoysaska iyo asxaabta |
| VI.C.4 | Wuxuu diirada saaraa daryeelka carruurta qoyska xitaa marka xubnaha kale ee qoysku ay guriga joogaan | Wuxuu la samaystaa xuduudo ku haboon xubnaha qoyska si uu diiradda u saarto daryeelka carruurta inta lagu jiro saacadaha shaqada | Wuxuu isku daraa masuuliyadaha qoyskiisa iyo masuuliyadaha daryeelka carruurta marka ay habboon tahay |
| VI.C.5 | Wuxuu aqoonsadaa marka arrimaha khuseeya anshaxu ay soo baxaan oo uu tixraacaa xeerka anshaxa ee Ururka Qaranka ee Waxbarashada Carruurta Yaryar (NAEYC) ee daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada hore | Wuxuu u hoggaansamaa oo uu tixraacaa xeerka anshaxa ee Ururka Qaranka ee Waxbarashada Carruurta Yaryar (NAEYC) ee daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada hore oo uu tusaaleeyaa u adeegsigeeda go'aan qaadashada | Wuxuu u sharaxaa asxaabta shaqada iyo qoysaska sida xeerka anshaxa ee NAEYC loogu isticmaali karo samaynta go'aannada xirfadeed; wuxuu gacan ka geysataa xallinta dhibaatooyinka kooxeed ee ku salaysan jaahwareerka anshaxa |
| VI.C.6 | Wuxuu muujiyaa is ogaanshaha nafeed iyo daryeel naftiisa | Wuxuu dib u milicsadaa fayo-qabkiisa niyadeed, saamaynta ay ku leedahay carruurta yaryar iyo faciisa wuxuuna qaadaa tillaabooyin si ay maskax ahaan u caafimaad qabaan iyo sidoo kale inay iska ilaaliyaan ka daalitaanka | Wuxuu u tusaaleeyaa kuwa kale siyaabaha ay isu daryeeli karaan si ay si wanaagsan u daryeelaan dadka kale |
| VI.C.7 | Wuxuu magacaabi karaa hal hawl xirfad-yaqaan, urur, guddi ama kooxaha isku xirka | Wuxuu ka qaybqaataa hal ama wax ka badan oo ah hawl xirfad-yaqaan, urur, guddi ama kooxaha isku xirka ah | Wuxuu u adeegaa boos hogaamin ah oo ah hawl xirfad-yaqaan, urur, guddi ama kooxaha isku xirka ah |

## D. U hoggaansanaanta Xeerarka iyo Sharciyada

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VI.D.1 | Wuxuu aqoonsadaa oo raacaa xeerarka shatiyeynta, sharciyada barnaamijka cuntada iyo xeerarka. | Wuxuu la socdaa dhammaan isbedbedalada lagu sameeyo xeerarka shatiyeynta, sharciyada barnaamijka cuntada iyo xeerarka. | Wuxuu abuuraa horumarin barnaamij oo dhaafsiisan halbeegyada ugu yar ee lagu dejiyay sharciyada iyo xeerarka |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VI.D.2 | Wuxuu bartaa xeerarka maxalliga, gobolka iyo federaalka ee ku saabsan diiwaangelinta | Wuxuu soo ururiyaa oo buuxiyaa dhammaan foomamka diiwaangelinta ee loo baahan yahay | Wuxuu u dejiyaa siyaasadaha diiwaangelinta iyo habraacyada si waafaqsan dhammaan sharciyada, sharciyada iyo xeerarka; si joogto ah u dib u eegis ugu sameeyaa, xaqiijiyaa ama sii hagaajiyaa |
| VI.D.3 | Wuxuu aqoonsadaa in ilmo kasta uu leeyahay diiwaan caafimaad; wuxuuna ilaaliyaa sir ahaaanshaha | Wuxuu la shaqeeyaa qoysaska si uu u ilaaliyo diiwaanada caafimaadka oo ku cusboonaysiisan oo ay ku jiraan baaritaanada jirka iyo afka, talaallada, baaritaanada korriinka iyo macluumaadka xiriirka xaaladaha degdega ah | Wuxuu dejiyaa oo uu fuliyaa qorshaha loogu talagalay caafimaadka iyo badbaadada ee ilmo kasta |
| VI.D.4 | Wuxuu aqoonsan yahay baahida loo qabo wuxuuna dejiyaa habraacyada amniga iyo xaaladaha degdega ah | Wuxuu si joogto ah ugu dhaqmaa hababka badbaadada iyo xaaladaha degdega ah | Wuxuu dib u eegis ku sameeyaa iyo si joogto ah u wanaajisa amniga iyo hababka xaaladaha degdega ah |

## E. Abuuritaanka Qorshaha Ganacsiga Yaryar

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VI.E.1 | Wuxuu abuuraa miisaaniyad sanadle ah oo ku salaysan shuruucda diiwaangelinta iyo awoodda mugga | Wuxuu go'aamiyaa heerka is-diiwaangelinta ee ugu wanaagsan, marka carruurtu ka weynaadaan iyo goorta boos cidkale loo heli karo | Wuxuu aqoonsadaa oo ilaaliyaa heerarka diiwaangelinta ee ugu wanaagsan |
| VI.E.2 | Wuxuu dejiyaa yoolal maaliyadeed iyo qorshaynta maaliyadeed ee ganacsiga | Wuxuu abuuraa qorshayaasha maaliyadeed ee muddada dhow iyo ta fog, wuxuu wax u kaydsadaa hawlgabka wuxuuna si joogto ah u maalgashadaa mustaqbalka | Wuxuu dib u eegis ku sameeyaa oo kala duwanaysiiyaa maalgashi |
| VI.E.3 | Wuxuu qiraa baahida loo qabo in laga caawiyo barashada dhinacyada daryeelka carruurta ganacsi ahaan | Wuxuu raadsadaa agab ku habboon oo ay ku jiraan la-taliyayaal karti u leh marka loo baahdo | Wuxuu fuliyaa talooyinka ay bixiyaan la-taliyayaasha kartida u leh marka ay jirto |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VI.E.4 | Wuxuu aqoonsadaa khataraha ku lug leh ku shaqaynta ganacsiga yar ee gurigaaga oo ay ku jiraan badbaadada iyo gaadiidka | Wuxuu qorshaystaa siyaabaha looga fogaado iyo/ama loo yareeyo khatarta; wuu galaa caymis | Wuxuu xaqiijisaa in uu helo caymis ku filan khataraha aan la yarayn karin |
| VI.E.5 | Wuxuu bartaa badbaadinta kharashka ee degaanka, gobolka iyo federaalka iyo barnaamijyada lacag celinta sida barnaamijka cuntada iyo deeqaha | Wuxuu aqoonsadaa baahida loo qabo diiwaanka cuntada oo qiimaha ku habboon, helitaanka khayraadka iyo barashada qorashada dalabka deeqaha iyo arjiyada | Wuxuu ku dhiirigeliaa dadka kale inay ka faa'iidaystaan barnaamijyada kaydsiga/badbaadinta kharashka sida deeqaha iyo barnaamijka cuntada; isticmaala xeelado lagu badiyo ilaha dakhliga iyo dhimista dakhliga lumay |
| VI.E.6 | Wuxuu qorsheeyaa soo gelitaanka lacagta caddaanka ah ee bil kasta ee loogu talagalay adeegyada, agabka, raashinka, saadka nadiifinta, kharashka cashuuraha iyo khidmadaha shatiga | Wuxuu miisaaniyad u qabtaa caymiska caafimaadka, xubinimada xirfadlahaa, horumarinta xirfada, fasaxa dalxiiska ee lacagtiisa la bixiyo, iyo hawlgabka | Wuxuu siiyaa nacfiyada sida caymiska caafimaadka, fasaxa lacagtiisa la bixiyo iyo hawlgabka wixii shaqaale ah |

## F. Dejinta Heerarka Qiimaha iyo Suuqgeynta

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VI.F.1 | Wuxuu aqoonsadaa heerarka qiimaha daryeelka carruurta ee bulshadiisa isaga oo adeegsanaya macluumaadka dadweynaha | Wuxuu isbarbar dhigaa qiimayaasha laga qaado bulshada iyo waxa looga baahan yahay si loo daboolo kharashaadkaaga; wuxuu ku dalacaya heerka qiimo suuqa u dhigma | Si joogto ah dib u qiimeyn iyo dib u eegis ku sameeya ama u ansixiya qiimayaasha; oo aqoonsadaa oo bixiyaa adeegyo u ogolaanaya in la kordhiyo qiimaha |
| VI.F.2 | Wuxuu diyaariyaa agab suuqgeyneed iyo xeelado xiriir oo xooga saaraya dhinacyo gaarka ah, sifooyinka gaarka ah iyo faa'iidooyinka ganacsigiisa | Wuxuu qaybiyaa agabka suuq-geynta isagoo isticmaalaya xeelado kala duwan | Wuxuu qiimeeyaa oo uu si joogto ah u hagaajiyaa qorshaha suuq-geynta |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VI.F.3 | Wuxuu aqoonsadaa ku qanacsanaanta macaamiisha hadda in ay door ka ciyaarto suuqgeyn loogu talagalay qoysaska mustaqbalka | Wuxuu aqoonsadaa heerarka ku qanacsanaanta ee macaamiisha hadda oo uu ku sameeyaa hagaajin macquul ah ee barnaamijka | Wuxuu adeegsadaa macluumaadka ku qanacsanaanta qoyska si uu u abuuro xeeladaha suuqgeynta |
| VI.F.4 | Wuxuu kala hadlaa qoyska iyo asxaabta wax ku saabsan ka shaqaynta ganacsi yar oo gurigaaga ka ku salaysan, wuxuu yareeyaa cabsida wuxuuna waydiistaa caawimo xagga u gudbinta adeegyada ah | Wuxuu kala hadlaa deriska saamaynta ay leedahay ka shaqaynta ganacsi yar oo gurigaaga ka ku salaysan, wuxuu yareeyaa cabsida wuxuuna waydiistaa caawimo xagga u gudbinta adeegyada ah | Wuxuu ka qaybqaata hawlaha bulshada si uu ula kulmo macaamiisha mustaqbalka |
| VI.F.5 | Wuxuu aqoonsadaa xiriirka ka dhexeeya muuqaalka guriga, oo ka bilaabmaya waddada qarkeeda, in uu yahay qalab suuq-geyneed oo muhiim ah | Wuxuu abuuraa liiska hubinta alaabta si loo hubiyo ilaalinta guud iyo muuqaalka wajahadda guriga in uu u yahay qalab suuqgeyn; wuxuu tixgeliyaa fursadaha baarkinka | Wuxuu qiimeeyaa oo uu maalgeliyaa hagaajinta meesha laga bilaabo wajahadda iyo guud ahaan guriga daryeelka carruurta qoyska in uu u yahay suuqgeyn ahaan. |

## G. Kaydinta diiwaanka maaliyada iyo Diiwaanada caddaymaha

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VI.G.1 | Wuxuu aqoonsadaa baahida loo qabo diiwaannada ganacsiga yaryar ee cad oo sax ah; wuxuu wakhti u qoondeeya si loo ilaaliyo waraaqaha loo baahan yahay oo inta ugu looga faa'idaysto dhimista canshuurta | Wuxuu abuuraa, habeeyaa oo ilaaliyaa diiwaannada ganacsiga yaryar | Waxay sameeyaa oo habaystaa foomamka kaydinta diiwaanka oo buuxinaya baahiyaha barnaamijka |
| VI.G.2 | Wuxuu aqoonsadaa habraacyada xisaabaadka ee guud ahaan ee la aqbalo | Wuxuu adeegsadaa qalab iyo khayraad kala duwan si uu u abuuro una isticmaalo hab xisaabeed/akoono | Wuxuu hayaa akoonada xisaabaadka oo cad oo muujiya dakhliga iyo kharashka wuxuuna isticmaalaa macluumaadkaas si ay ugu wargeliso go'aamada qaadashada ganacsiga |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VI.G.3 | Wuxuu aqoonsadaa dakhliga iyo kharashyada la xiriira ganacsiga daryeelka carruurta qoyska | Wuxuu fahmaa dakhliga iyo kharashyada, in laga heli karo macaash iyo xisaabaadka dakhliga; wuxuu is waafajiyaa dakhliga iyo kharashyada billaha ah | Wuxuu falanqeeyaa dakhliga iyo kharashaadka, wuxuu xisaabiyaa barta ay iskaga beegmaan kharashka iyo dakhligu oo uu hagaajin ku sameeyaa |

## H. Waraysiga iyo Diiwaangelinta

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VI.H.1 | Wuxuu aqoonsadaa waxyaabaha muhiimka ah ee waraysiyada taleefoonka iyo wareysiyada fool ka foolka ah ee lala yeesho macaamiisha mustaqbalka wuxuuna samaystaa qorshe wareysi | Wuxuu qabtaa wareysiga shaqaalaysiinta; wuxuu bixiyaa agabka barnaamijka; wuxuuna siiyaa kala tustuska guriga/ ganacsiga | Wuxuu qiimeeyaa oo uu si joogto ah u hagaajiyaa habka waraysiga shaqaalaynta |
| VI.H.2 | Wuxuu aqqoonsadaa waxyaabaha muhiimka ah ee ku jira abuurista qandaraaska; wuxuu talo ka raadsadaa la-taliyayaal karti leh si loo go'aamiyo waxyaabahay ay habboon tahay in ay ku jiraan | Wuxuu fuliyaa, u hoggaansamaa oo si dhab ah u fuliyaa heshiiska uu la leeyahay qoys kasta | Wuxuu la tashadaa khayraadka xirfadleyda oo uu dib u eegis ku sameeyaa, xaqiijiyaaa ama sii wanaajiyaa qandaraas |
| VI.H.3 | Wuxuu aqoonsadaa oo uu ku daraa xeerarka muhiimka ah ee ay tahay in lagu daro buug-gacmeedka waalidka | Wuxuu ku qeexaa xeerarka qoraal ahaan buug-gacmeedka waalidka; kalana hadlaa xeerarka xubnaha qoyska | Wuxuu dib u eegis ku sameeyaa oo si joogto ah u cusbooneysiiyaa xeerarka |

## I. Ilaalinta/dayactirka Xaruntaada

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VI.I.1 | Wuxuu ogsoon yahay muhiimada ay leeyihiin muuqaalka iyo xaalada gurigu | Wuxuu dejiyaa qorshaha iyo jadwalka dayactirka iyo beddelaadaha guud ee guriga | Wuxuu maalgeliyaa dayactirka iyo beddelaadaha guud ee guriga |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VI.I.2 | Wuxuu sameeyaa hubin joogto ah ee xarunta iyo qalabka si uu u go'aamiyo alaabta u baahan in la beddelo | Wuxuu dayactiraa xarunta si ay u buuxiso shuruudaha shatiga; qorsheeyaa oo uu miisaaniyad u qabtaa qalabka ay tahay in la bedelo | Wuxuu qorsheeyaa oo miisaaniyad u qabtaa hagaajinta iyo sii wanaajinta xarunta iyo qalabka |
| VI.I.3 | Wuxuu ka warqabaa qalabka ganacsiga yaryar iyo tignoolajiyada taageerta barnaamijyada | Wuxuu soo iibiyaa oo dayactiraa qalabka ganacsiga yaryar iyo tignoolajiyada taageerta barnaamijka | Wuxuu soo qorsheeyaa oo miisaaniyad u qabtaa dayactirka, beddelaada iyo wanaajinta qalabka ganacsiga yaryar iyo tignoolajiyada taageerta barnaamijkaa |

## J. Shaqaalaysiinta, Tababarka iyo Kormeerka

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VI.I.4 | Wuxuu baaraa qaababka imaanshaha, caddeeyaa baahida loo qabo, iyo haddii ay kharash ahaan ku habboontahay in shaqaale la shaqaaleysiiyo; wuxuu raadiyaa khayraadka ku habboon, oo ay ku jiraan la-taliyayaal karti leh, marka la go'aaminayo ku habboonaanta shaqaalaynta | Wuxuu fahmaa sharciyada shaqada ee shaqaaleysiinta iyo cayrinta shaqaalaha; waxa uu sameeyaa baadhis dhamaystiran, hubinta taariikhda raad-raaca, waraysiyada shaqaalaynta iyo hubinta tixraaca ka hor inta uun shaqaaleysiin | Wuxuu fuliyaa dhammaan xeerarka maxalliga ah, gobolka iyo federaalka ee khuseeya shaqaalaynta |
| VI.I.5 | Wuxuu qoysaska baraa shaqaalaha wuxuuna ogeysiiyaa qoysaska taariikhda shaqaalaha iyo doorka | Shaqaalaha si hufan ugu soo daraa barnaamijka | Wuxuu adeegsadaa xalinta dhibaatada si uu u xalliyo khilaafka shaqaalaha; wuxuu doontaa inuu si joogto ah u wanaajiyo xiriirka kooxda |
| VI.I.6 | Wuxuu sharaxaa shuruudaha shaqada iyo waxyaabaha laga filayo | Wuxuu baraa shaqaalaha xeerarka iyo nidaamyada looga baahan yahay ganacsigiisa yar; wuxuu aqoonsadaa fursadaha horumarinta xirfadeed ee taageeraya kobaca xirfadda shaqaalaha | Wuxuu kormeeraa shaqaalaha wuxuuna sameeyaa dib u eegista waxqabadka oo joogto ah; wuxuu diiwaangeliyaa tababarka iyo kormeerka shaqaalaha |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VI.I.7 | Wuxuu aqoonsadaa waxyaabaha muhiimka ah ee lagu daro faylka shaqaalaha | Wuxuu abuuraa oo uu ilaaliyaa faylka shaqaalaha oo ay ku jiraan diiwaannada wada sheekeysiga ee ku saabsan waxqabadka shaqo | Wuxuu dib u eegis ku sameeyaa, qiimeeyaa oo si joogto ah u wanaajiyaa diiwaan haynta shaqaalaha |
| VI.I.8 | Wuxuu bartaa shuruudaha mushaar bixinta shaqaalaha, ka jaritaanada iyo arrimaha caymiska | Wuxuu miisaaniyad u qabtaa oo sameeyaa mushahar bixinta shaqaalaha | Wuxuu u hoggaansamaa dhammaan shuruudaha mushaar bixinta shaqaalaha oo uu ilaaliyaa diiwaannada oo habboon |

2020

## K. Mas'uuliyadda Hiddaha Dhaqanka iyo hab-dhaqanka

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VI.K.1 | Wuxuu aqoonsadaa meelaha uu ku wanaagsan yahay iyo fursadaha koritaanka iyo isbeddelka isagoo raadinaya xaaladaha uu qofku dhaqan, isir, ama qowmiyad ahaan yahay kuwa laga tirada badan yahay; wuxuu kaga jawaabaa rayi celinta ay siiyaan xirfadlayaasha ee waxtarka leh isaga oo kormeeraya oo beddelaya dabeecadda | Wuxuu dib u milicsadaa waxbarista iyo hab dhaqanada barnaamijka, indho-indheynta carruurta, natiijooyinka, rayi celinta iyo dhaleecaynta wax dhisaysa ee ka timaadda faca kale ee jinsiyadda, dhaqanka, ama qowmiyad kala duwan si loo sii horumariyo yoolalka gaarka ah ee waxbarista iyo hagaajinta hab dhaqamada | Wuxuu qiimeeyaa kala duwanaanshaha shaqiyaadka, aragtiyaha badan iyo qiyamka lagu arkay hab dhaqamada waxbarida ee kala duwan, isagoo fiiro gaar ah ugu fiirsanaya fikradaha aan ku talagalka ahayn, ee dhaqanka ku salaysan |
| VI.K.2 | Wuxuu sahamiyaa oo dib u milicsadaa aqoonsiga dhaqankiisa, malo-awaalka, dookhyada, mudnaanta uu haysto, iyo eexda/qof jeclaysiga, isagoo qeexaya sida ay ku yimaadeen oo loo xoojiyay ama loo dhimay. | Wuxuu aqoonsadaa siyaabaha qofka dhaqankiisa iyo mudnaanta uu haysto ay u saameeyaan hab dhaqamada, hababka, iyo xeeladaha<br><br>Wuxuu go'aamiyaa isbeddelada ay tahay in la sameeyo si si wax ku ool ah wax loo baro carruurta ka soo jeeda asal dhaqameedyo gooni ah | Wuxuu kor u qaadaa oo iskaashi la sameeyaa dadka ay wada shaqeeyaan, macalimiinta ardayda ah iyo ardayda tababarka shaqo ku jirta si ay u habeeyaan taageerada loogu talagalay dib u milicsiga ee mudnaanta shakhsiyeed, wacyiga dhaqameed, iyo eexda qarsoon ee naftooda iyo shaqaalaha barnaamijka |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VI.K.3 | Wuxuu aqoonsadaa udub dhexaad ahaanshaha dhaqanka, jinsiyada, iyo aqoonsiga qowmiyadeed ay u leeyihiin horumarka caafimaadka qaba | Wuxuu muujiyaa oo tusaaleeyaa xiisaha iyo aqoonta ku saabsan shaqada cilmi-baarayaasha midabka leh ee ku saabsan mabaadi'da horumarka ilmaha caafimaadka qaba ee bulshooyinka dhaqameedyada gaarka ah<br><br>Wuxuu hab dhaqankiisa ku fuliyaa mabaadi'da muhiimka ah ee gaarka u ah korriinka ilmaha caafimaadka qaba ee bulshooyinka dhaqameed | Wuxuu ku taliayaa cilmi-baarayaasha midabka leh, horumarinta iyo iskwaashiga asxaabta shaqada, macallimiinta ardayda ah iyo ardayda tababarka shaqada ku jirta inay ku daraan shaqadooda ku habboon xeerarka iyo hab dhaqanka barnaamijka¬<br><br>Wuxuu dejiyaa tallaabooyinka la xisaabtanka ee shaqaalaha iyo dadka ay wada shaqeeyaan doorkooda ku aaddan horumarka caafimaadka leh ee carruurta |
| VI.K.4 | Wuxuu u fiirsadaa oo dib u milicsadaa dhaqamadiisa edbinta si uu u ogaado haddii noocyo gaarka ah oo carruurta ah uu si xun iyo si aan la sinnayn kuwa kale uu u soo qabsado, tusaale, carruurta maqaarkoodu madow yahay, ama carruurta aad u firfircoon oo dareenkooda sheegta. | Wuxuu doortaa tababarayaal iyo hagayaal si uu u garto eexda qarsoon iyo horumarinta xeeladaha lagaga gudbi karo<br><br>Wuxuu doortaa tababarayaal iyo hagayaal caawinooo xagga farsamooyinka maaraynta fasalka ee waxtarka leh ee carruurta ka soo jeeda dhaqamo kala duwan | Wuxuu abuuraa oo abaabulaa fursadaha loogu talagalay shaqaalaha iyo dadka wada shaqeeya si ay u helaan macluumaad, tababaro wax ku ool ah, hagitaan, iyo hogaamin, iyadoo xoogga saaraysa doorka ay qaadato eexda aan tooska ahayn ay ka qaadato farsamooyinka wax ku oolka ah ee maaraynta fasalka ee carruurta ka soo jeeda dhaqamo kala duwan |

7

# Nuxurka Aagga VII:
# **Caafimaadka, Badbaadada iyo Nafaqada**

## Halbeegga PELSB

***Daryeel bixiyaha daryeelka carruurta qoyska ee carruurta yaryar waxa uu fahmaa muhiimada ay leedahay samaynta iyo ilaalinta deegaan hubinaya caafimaadka, badbaadada iyo nafaqada ilmo kasta.***

Daryeel bixiyuhu waa inuu fahmo:

- sida loo dhiso hab dhaqamo caafimaad leh.
- sida loo hubiyo badbaadada.
- sida loo bixiyo nafaqo caafimaad leh.

## Kartiyaha

### A. Abuuritaanka Hab Dhaqamo Caafimaadka leh

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VII.A.1 | Wuxuu siiyaa tusaalayaasha ilaha qaranka iyo deegaanka ee halbeegyada caafimaadka iyo badbaadada ee barnaamijyada caruurnimada hore; wuxuu u hoggaansamaa xeerarka shatiga ee caafimaadka, badbaadada iyo nafaqada | Wuxuu dejiyaa oo si joogto ah dib u eegaa hawlaha caafimaadka iyo deegaanka waxbarashada si loo hubiyo u hoggaansanaanta xeerarka shatiga oo uu kusoo daraa halbeegyada caafimaadka qaranka | Wuxuu falanqeeyaa oo qiimeeyaa siyaasadaha iyo hababka hadda jira inay waxtarka leeyihiin iyo u hoggaansanaanta halbeegyada caafimaadka iyo badbaadada qaranka iyo sidoo kale xeerarka federaalka, gobolka iyo deegaanka;wuxuu hirgeliyaa isbeddelka marka loo baahdo; wuxuu la shaqeeyaa xirfadlayaasha caafimaadka iyo badbaadada si ay u hagaan hab dhaqanka hadda jira |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VII.A.2 | Wuxuu bixiyaa tusaalooyin ku saabsan hab dhaqamada caafimaadka iyo badbaadada leh | Wuxuu kala hadlaa xeerarka caafimaadka iyo badbaadada xubnaha qoyska wuxuuna siiyaa qoysaska macluumaad qoraal ah oo ku saabsan xeerarka caafimaadka iyo badbaadada kahor intaan la diiwaaangelin | Wuxuu ka war hayaa oo la socodsiiyaa macluumaadka cusub ee caafimaadka iyo badbaadada shaqaalaha, qoysaska iyo hawl-wadaagyada bulshada; wuxuu isbeddellada lagu taliyey ku soo daraa hab dhaqanka maalinlaha ah |
| VII.A.3 | Wuxuu ku sameeyaa baaritaan caafimaad oo maalinle ah carruurta marka ay soo galayaan goobta daryeelka carruurta qoyska; wuxuu garanayaa calaamadaha jirrada wuxuuna raacaa tilmaamaha loogu talagalay saaritaanka/bixinta carruurta jirran | Wuxuu siiyaa xubnaha qoyska fikradda ka dambeeya xeerarka ku saabsan ka saarista iyo dib ugu soo celinta carruurta iyo shaqaalaha jirran; wuxuuna la xiriiraa qoysaska ay suurtagal tahay in ay soo gaareen cudurrada faafa | Wuxuu uga warbixiyaa cudurrada faafa hay'adaha caafimaadka dadweynaha ee ku habboon wuxuuna fuliyaa talooyinka caafimaadka dadweynaha si looga hortago loona xakameeyo sii faafitaanka cudurrada kale |
| VII.A.4 | Wuxuu ku dhaqmaa halbeegyada ku habboon da'da si loo yareeyo faafitaanka cudurrada faafa sida gacmaha dhaqidda, adeegsiga musqulaha, nadiifinta alaabta carruurtu ku ciyaarto, iyo xafaayadaynta | Wuxuu baraa (oo caawiyaa) carruurta, wuxuuna ku wargeliyaa xubnaha qoyska iyo shaqaalaha hab dhaqamada nadaafadda aasaasiga ah sida gacmo-dhaqashada, caafimaadka afka, kaydinta alaabta shakhsiyeed sida mujurucyada iyo cadayga | Wuxuu falanqeeyaa, qiimeeyaa, oo adeegsadaa cilmi-baarista hadda jirta iyo hababka ugu wanaagsan ee lagu dhimayo faafitaanka cudurrada faafa oo uu fuliyaa isbeddellada; wuxuu la shaqeeya xirfadleyaasha daryeelka caafimaadka marka ay ku habboon tahay (tusaale, nafaqo yaqaanka, deegaanka yaqaanka, la taliyaha caafimaadka) |
| VII.A.5 | Wuxuu aqoonsadaa in ilmo kasta uu leeyahay diiwaan caafimaad; wuxuuna ilaaliyaa sir ahaaanshaha | Wuxuu la shaqeeyaa qoysaska si uu u ilaaliyo diiwaanada caafimaadka oo ku cusboonaysiisan baaritaanada jirka iyo afka, talaallada, baaritaanada korriinka iyo macluumaadka xiriirka xaaladaha degdega ah | Wuxuu soo jeediyaa habraac wuxuuna fuliyaa qorshaha loogu talagalay caafimaadka iyo badbaadada ee ilmo kasta |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VII.A.6 | Wuxuu raacaa qorshayaal caafimaad oo qoran iyo qorshaha xaaladaha degdeg ah oo loogu talagalay ilmo kasta oo qaba baahiyaha daryeelka caafimaadka iyo naafonimada oo ay ku jiraan xaaladaha sida sonkorowga, suuxdinta, neefta, iwm. | Wuxuu la shaqeeyaa qoysaska iyo xirfadlayaasha caafimaadka si loo hubiyo in ilmo kasta oo leh baahiyo caafimaad oo gaar ah uu leeyahay qorshe caafimaad iyo qorshaha xaaladaha degdeg ah oo qoran oo la raaco | Wuxuu la shaqeeyaan xirfadlayaasha caafimaadka bulshada si loo hubiyo in baahiyaha caafimaad ee carruurta iyo qoysaska la daboolo |

## B. Hubinta Badbaadada

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VII.B.1 | Wuxuu sameeyaa hubinta ammaanka maalinlaha ah ee gudaha iyo dibadda deegaanka iyo qalabka; wuxuu aqoonsadaa khataraha iman kara wuuna saxaa | Wuxuu isticmaalaa aqoonta halbeegyada caafimaadka iyo badbaadada qaranka iyo sidoo kale khatarta dhaawaca ee la xiriirta heerka korriinka ilmaha iyo awoodaha si uu u qorsheeyo jawi u ogolaanaya ilmaha inuu ciyaaro oo sahamiyo isagoo ammaan ah oo si wanaagsan loo kormeerayo. | Wuxuu falanqeeyaa, qiimeeyaa, oo adeegsadaa cilmi-baarista hadda jirta iyo hababka ugu wanaagsan si uu kor ugu qaado badbaadada ugana hortago dhaawacyada oo uu fuliyaa isbeddelada |
| VII.B.2 | Wuxuu ilaaliyaa oo xaqiijiyaa helitaanka macluumaadka xiriirka xaaladaha degdega ah iyo agabka gargaarka koowaad mar kasta | Wuxuu qorsheeyaa oo ku dhaqmaa tababarada xaaladaha degdega ah ee jadwal caadi ah | Wuxuu falanqeeyaa, qiimeeyaa, oo adeegsadaa cilmi-baarista hadda jirta iyo hababka ugu wanaagsan ee hababka xaaladaha degdega ah oo uu fuliyaa isbeddellada |
| VII.B.3 | Wuxuu sharaxaa oo raacaa xeerarka iyo nidaamyada kaydinta iyo maamulka dawada | Wuxuu fahmaa oo uu fuliyaa xeerarka maamulka daawaynta iyo habraacyada daawooyinka duwaanka laga soo iibsado iyo daawooyinka dhakhtarku qoro, oo ay ku jiraan diiwaangelinta, kaydinta dawada, waxa ay tarto iyo iyo waxyeelada | Wuxuu la shaqeeyaa xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka si ay u qiimeeyaan, u qiyaasaan oo ay si joogto ah ugu horumariyaan sharciyada iyo hababka daawaynta ee ku salaysan cilmi baarista hadda ah iyo hababka ugu wanaagsan |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VII.B.4 | Wuxuu sharaxaa oo raacaa dhaqamada maaraynta badbaadada leh sida hab-dhaqannada hurdada ee badbaadada leh ee loo baaha yahay (tusaale, dhallaanku si badbaado leh in ay dhabarka ugu seexdaan) | Wuxuu qoysaska la wadaagaa macluumaadka ku saabsan ku-dhaqanka iyo isticmaalka joogtada ah ee xeerarka iyo dhaqamada hab hurdada ee ammaanka ah | Wuxuu dejistaa xeer qoran oo qeexaya hababka loo isticmaalo si kor loogu qaado hurdo badbaado leh iyo in la yareeyo Khatarta Dhimashada Lama Filaanka ah ee Dhallaanka |
| VII.B.5 | Wuxuu sharaxaa oo raacaa hababka looga hortagayo Cilladaha Ilmaha la Ruxay (Shaken Baby Syndrome); wuxuu dib u milicsadaa welwelka lasoo dersa oo wuxuu raadsadaa taageero xagga bixinta daryeelka carruurta; wuxuu ka warbixiyaa calaamadaha uu arkay Cilladaha Ilmaha la Ruxay (Shaken Baby Syndrome) ee suurtagalka ah | Wuxuu la wadaagaa qoysaska macluumaadka ku saabsan Cilladaha Ilmaha la Ruxay (Shaken Baby Syndrome), sababaha, cawaaqibta, aqoonsiga astaamaha iyo calaamadaha dhaawaca maskaxda, xeeladaha iyo taageerada lagu caawinayo maaraynta hab dhaqanka oohinta ee ilmaha iyo ka jawaabista baahiyaha qofka weyn iyo ilmaha | Wuxuu u sharaxaa asxaabta shaqada iyo xubnaha bulshada sababaha, cawaaqibta, aqoonsiga astaamaha iyo calaamadaha dhaawaca maskaxda ee ka yimaada Cilladaha Ilmaha la Ruxay (Shaken Baby Syndrome) |
| VII.B.6 | Wuxuu sharaxaa oo raacaa xeerarka iyo hababka ugu wanaagsan ee gaadiidka badbaadada leh ee la siiyo carruurta baabuurka saaran | Wuxuu la wadaagaa qoysaska macluumaadka ku saabsan badbaadada ilmaha gaadiidka saaran iyo isticmaalka hababka xakamaynta ilmaha ee baabuurta kuwaas oo da'da iyo miisaanka ku haboon oo u hoggaansamaya sharciyada gobolka iyo federaalka | Wuxuu u sharaxaa asxaabta shaqada iyo xubnaha bulshada hababka la isticmaalo in si badbaado leh loogu qaado carruurta baabuurta |
| VII.B.7 | Wuxuu qeexaa dhaqamada iyo xeeladaha looga hortagayo dhaawacyada wuxuuna bixiyaa kormeer joogto ah | Wuxuu horumariyaa ka-hortaga dhaawaca ku yimaada ilmaha isaga oo baraya carruurta oo la wadaagaya qoysaska macluumaadka ku saabsan dhaqamada ammaanka ah; wuxuu hubiyaa in jawiga deegaanka iyo waxqabadyada la qorsheeyay loo abuuray loona ilaaliyo in ay yihiin waxbarasho badbaado leh | Wuxuu dejiyaa xeerar qoran oo qeexaya hababka la isticmaalo si looga hortago dhaawacyada lama filaanka ah oo ay ku jiraan dhicitaanka, dabka iyo gubashada, qarqidda iyo sunta; wuxuu siiyaa qoysaska xogta iyo agabka la xiriira ka hortagga dhaawaca caruurnimada |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VII.B.8 | Wuxuu si toos ah carruurta ugu kormeeraa aragga ama codka mar kasta; wuxuu saadaaliyaa oo uu ka ilaaliyaa carruurta xaaladaha aan ammaan ahayn; wuxuu ka caawiyaa carruurta inay raacaan xeerarka badbaadada | Wuxuu la wadaagaa macluumaadka ku saabsan fikradaha badbaadada iyo xeerarka carruurta, qoysaska iyo shaqaalaha; si joogto ah ayuu ugu dhaqmaa | Wuxuu falanqeeyaa, qiimeeyaa, oo adeegsadaa cilmi-baarista hadda jirta iyo hababka ugu wanaagsan si loo dhiso xeerar iyo nidaamyo badbaado leh |
| VII.B.9 | Wuxuu aqoonsadaa oo uu ka ilaaliyaa carruurta inay la kulmaan khataraha la xiriira deegaanka (sida sunta cayayaanka, daawaynta cawska, xayawaanka/ xawayaanka rabaayada ah, caaryada, caaryada, qashinka, xafaayadda, injirta, cayayaanka, tayada hawada, iwm.) | Wuxuu ilaaliyaa xeerarka iyo nidaamyada la xiriira khataraha deegaanka iyo caafimaadka iyo badbaadada ilmaha | Wuxuu qiimeeyaa oo meesha ka saaraan cilladaha deegaanka iyo welwelka wuxuuna xaqiijiyaa xeerarka iyo habraacyadu inay cusboonaysiisan yihiin |
| VII.B.10 | Wuxuu qaataa oo uu haystaa shahaadada aan dhicin oo ah Gargaarka Koowaad iyo CPR; wuxuu bixiyaa daryeel ku habboon dhaawacyada wuxuuna diyaar u yahay inuu sameeyo CPR | Wuxuu dejiya oo ilaaliyaa nidaamka diiwaangelinta iyo ka warbixinta dhaawacyada; wuxuu qoysaska siiyaa digniinaha cusub ee badbaadada macaamiisha ah iyo talooyinka | Wuxuu falanqeeyaa oo qiimeeyaa heerarka dhaawaca iyo qaababkooda oo adeegsadaa dhaqamada cilmi-baarista ku salaysan iyo habka ugu wanaagsan ee hadda jira si kor loogu qaado badbaadada loogana hortago dhaawacyada; wuxuuna Guddida Badbaadada Alaabta Macaamiisha uga warbixiyaa badeecooyinka laga yaabo inay dhaawac u geysteen |

## C. Bixinta Cunto Caafimaad leh

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VII.C.1 | Wuxuu raacaa xeerarka shatiga iyo qawaaniinta cuntada ee la xiriira nafaqada, kaydinta cuntada ee badbaadada leh, diyaarinta, maaraynta iyo qaybinta, (oo ay ku jiraan caanaha naaska) | Wuxuu tu saaleeyaa oo uu kormeeraa diyaarinta iyo qaybinta cuntada ee badbaadada leh (oo ay ku jiraan caanaha naaska) | Wuxuu falanqeeyaa, qiimeeyaa, oo adeegsadaa cilmi-baarista hadda jirta iyo hababka ugu wanaagsan si loo dejiyo xeerarka iyo dhaqamada diyaarinta iyo qaybinta cuntada ee badbaadada leh (ay ku jiraan calaamadinta, safrinta iyo kaydinta caanaha naaska) oo uu fuliyaa isbeddelada |
| VII.C.2 | Wuxuu liisteeyaa qaybaha ay ka kooban tahay cuntada caafimaadka leh ee loogu talagalay carruurta yaryar isaga oo isticmaalaya tilmaamaha Waaxda Beeraha-Barnaamijka Cuntada Daryeelka Carruurta iyo Dadka Waaweyn (USDA-CACFP) | Wuxu xaqiijiyaa in diiwaanada cuntadu ay hoggaansamaan hagaha nafaqada ee USDA-CACFP oo ay siiyaan cuntooyin beddelaad iyo cunto fudud carruurta qabta xasaasiyadda cuntada ama baahiyaha cunto ee gaarka ah. | Wuxuu ka qaybgeliyaa carruurta iyo qoysaska qorshaynta diiwaanka cuntada wuxuuna ku daraa dookhyada cuntada dhaqamada; wuxuu bixiyaa macluumaad ku saabsan doorashooyinka cuntada caafimaadka leh |
| VII.C.3 | Wuxuu raacaa jadwalka quudinta oo qof kasta khaas u ah dhallaanka iyo socod baradka taas oo ka jawaabeysa tilmaamaha quudinta ee ilmaha; dhallaanka waa la qabtaa oo lala hadlaa wakhtiyada ku quudinta masaasada taas oo hubinaysa dareenka xiriirka dhexdooda iyo isu soo jeedis isku xiran | Wuxuu la shaqeeyaa qoysaska si uu isugu dubarido dookhyada caanaha (naas nuujinta ama isticmaaalka caanaha formula), oo lagu wargeliyay habka ugu wanaagsan, oo uu siiyaa wada xiriir maalinle ah qoyska ee ku saabsan qaadashada caanaha maalinlaha ah ee ilmaha | Wuxuu dejiyaa xeerar, hab dhaqamo iyo deegaan taageeraya oo kor u qaadaya naas nuujinta; wuxuu siiyaa qoysaska macluumaad ku saabsan calaamadaynta, safrinta iyo kaydinta caanaha naaska |
| VII.C.4 | Wuxuu raacaa jadwal qofka lagu habboonaysiiyey oo loogu talagalay u soo bandhigida cuntooyin cusub oo ku salaysan dookhyada qoyska iyo tilmaamaha quudinta ilmaha; dhallaanka waxaa la quudiyaa si mid-mid waxaana lagu dhiirigeliyaa inay is quudiyaan marka ay da'dooda iyo xirfadahooda horumaraan | Wuxuu la shaqeeyaa qoysaska si loo aqoonsado jadwal qorshaysan oo u soo bandhigida cuntooyinka adag ah wuxuuna siiyaa qoyska wada xiriir maalinle ah oo ku saabsan indho-indheynta cunto cunista ilmaha iyo calaamad kasta oo ah fal-celinta xasaasiyadeed oo suurtogalka ah oo ka timaada cuntooyinka cusub | Wuxuu u samaystaa xeerar iyo dhaqamo kor u qaada barashada caafimaadka leh ee cuntooyinka adag ee jadwalka quudinta ee ilmaha oo taageera horumarka koritaanka ilmaha ee xirfadaha wax cunista |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VII.C.5 | Wuxuu dejiyaa deegaan taageeraya horumarka ku habboon da'da ee quudinta, is-caawinta nafeed iyo xirfadaha bulshada iyo dareenka shucuurta | Wuxuu la fadhiistaa oo wax la cunaa carruurta; wuxuu tusaaleeyaa hab-dhaqan cunto caafimaad leh oo dhiirigelinaysa wada sheekeysiga togan iyo is-dhexgalka bulshada | Wuxuu u bixiyaa cuntooyinka qaabka qoyska iyo wakhtiyada cuntada fudud kuwaas oo dhiirigeliya dhaqamada cuntada caafimaadka leh iyo ka qaybgalka bulshada |
| VII.C.6 | Wuxuu aqoonsadaa oo iska ilaaliyaa khataraha caafimaadka ee la xiriira cuntada sida ku saxashada, gubashada iyo xasaasiyadda | Wuxuu bixiyaa cunto ku habboon da'da oo aan la xiriirin saxashada ama khatarta gubashada; wuxuu si firfircoon u kormeeraa inta lagu guda jiro waxqabadyada cuntada si loo hubiyo in carruurtu ay fariistaan marka ay wax cunayaan oo aanay ku hawlanayn waxqabadyo keeni kara khatarta in ay ku mergadaan (sida, in afka lagu ururiyo cuntada ama in la seexdo); wuxuu aqoon u leeyahay carruurta leh xasaasiyadda cuntada wuxuuna diyaar u yahay inuu ka jawaabo baahiyaha caafimaad ee iman kara marka ay soo baxaan | Wuxuu dejiyaa xeerar iyo habraacyo iyo deegaan loogu talagalay carruurta iyo shaqaalaha kaas oo u ogolaanaysa hab dhaqannada cunto cunidda oo ammaan leh |

2020

## D. Mas'uuliyadda Hiddaha Dhaqanka iyo hab-dhaqanka

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VII.D.1 | Wuxuu u aqoonsan tahay cunsuriyadda in ay tahay xaalad caafimaad oo wuxuu tilmaamaa siyaabaha ay sida xun u saamayso fayo-qabka carruurta cunsiriyeyntu soo wajahday, fal dambiyeedka lagu sameeyay, iyo/ama lagu dhibay cunsuriyadda. Albert Einstein College of Medicine (https://einstein.pure.elsevier.com/en/publications/the-impact-of-racism-on-child-and-adolescent-health) | Wuxuu aqoonsadaa oo uu fuliyaa xeelado caafimaad qaba si loo yareeyo saamaynta cunsuriyaddu ay ku leedahay carruurta cunsiriyeyntu soo wajahday, fal dambiyeedka lagu sameeyay, iyo/ama lagu dhibay cunsuriyadda.<br><br>Wuxuu aqoonsadaa tusaalooyinka caafimaadka wanaagsan, bogsashada, iyo ka hortagga ee ka yimaada caadooyinka dhaqama kala duwan<br><br>Wuxuu fuliyaa xeeladaha waxbaridda ee ku soo daraya tusaalooyinka caafimaadka wanaagsan, bogsashada, iyo ka hortagga ee ka yimaada caadooyinka dhaqama kala duwan | Wuxuu u abuuraa fursado naftiisa iyo asxaabta shaqada si ay si qoto dheer ugu fahmaan saamaynta caafimaad ee cunsuriyaddu ku leedahay carruurta carruurta cunsiriyeyntu soo wajahday, fal dambiyeedka lagu sameeyay, iyo/ama lagu dhibay cunsuriyadda iyo inay abuuraan xeelado lagu dhimayo saamaynta ay ku leedahay barnaamijka dhexdiisa..<br><br>Wuxuu fahmaa, ka hadlaa, oo ku muujiyaa ficillo in hiddaha dhaqanku yahay bogsiinyo; dhaqanku waa furaha caafimaadka wanaagsan; oo dhaqanku waa ka hortag |
| VII.D.2 | Wuxuu aqoonsanayaa iska fogaynta carruurta ee ay sameeyaan daryeelayaasha qaangaarka ah ee ay sababtoodu tahay jinsiyadda, midabka maqaarka, qaabka timaha, jinsiga, iwm. ay ku leedahay saameyn jireed iyo mid shucuureed oo waara. | Wuxuu aqoonsadaa calamadaha iska fogaynta ee ku jirta naftiisa, shaqaalaha, iyo dadka la shaqeeya wuxuuna hirgeliyaa xeeladaha lagu baabi'inayo. | Wuxuu u abuuraa fursado naftiisa, shaqaalaha, asxaabta shaqada iyo asxaabta ay isla shaqeeeyaan si ay u aqoonsadaan oo ay u fahmaan calaamadaha qotada dheer ee iska fogaynta carruurta ee ay sababtoodu tahay jinsiyadda, midabka maqaarka, qaabka timaha, jinsiga, iwm. oo uu ka saaraa barnaamijka. |

8

# Nuxurka Aagga VIII: **Ku-dhaqan loo marayo Khibrada Caafimaad**

## Halbeegga PELSB

***Baraha carruurta yaryar waxa uu adeegsadaa hab waxbarid wax ku ool ah oo lagu barayo carruurta yaryar iyada oo loo marayo khibradaha caafimaad ookala duwan oo hore iyo mid joogto ah in loo adeegsado dhallaanka iyo socod baradka, da'da dugsiga hoose kahor iyo carruurta da'da dugsi hoose iyada oo leh noocyo kala duwan oo barnaamijyo waxbarasho ah.***

Baruhu waa inuu fahmo:

- Sida loo dhaqangeliyo hab dhaqamada waxbarista waxtarka leh.

## Kartiyaha

### A. Dhaqangelinta hab dhaqamada waxbarista waxtarka leh iyadii loo marayo Khibrada Caafimaad

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VIII.A.1 | Wuxuu magacaabaa oo dib u milicsadaa dabeecadda shakhsi ahaaneed ee bixinta daryeelka iyo waxbarashada carruurta yaryar | Wuxuu dib u milicsadaa oo qiimeeyaa dabeecadaha shakhsiyeed marka uu la falgalayo barnaamijka carruurnimada hore | Wuxuu ka hadlaa dabeecadaha oo uu u tusaaleeyaa dadka kale dabeecadaha kale ee waxtarka u leh la shaqaynta carruurta yaryar |
| VIII.A.2 | Wuxuu ugu fiirsada habaynta goobta deegaanka siyaabo kala duwan (la joog dhab ahaan, muuqaal ama habayn caruurnimada hore oo jilitaan ah) oo ay joogaan kooxo da'o kala duwan | Wuxuu u qorsheeya jawi waxbarasho oo loogu talagalay da'daha cayiman ee ilmaha, wuxuu raadiyaa rayi celin celin xirfadeed iyo tababar, wuxuuna dib u milicsadaa guulaha iyo caqabadaha | Wuxuu yaqaanaa oo qiimeeyaa goobo waxbarasho oo badan; isticmaala jawi ku haboon ardayda |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Sahmiyaa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| VIII.A.3 | Wuxuu qeexayaa jawiga shucuureed (diirinaanta, ku raaxaysiga iyo ixtiraamka la muujiyay) iyo xeeladaha waxbarida ee loo arkay dhab ahaan, fiidyow ahaan ama lagu jilay goobaha caruurnimada hore) | Wuxuu fuliyaa hawlo shaqsi ahaan iyo koox tiro yar ah loo qorsheeyey iyada oo la adeegsanayo xeelado waxbarid oo badan; wuxuu raadiyaa rayi celin xirfadeed iyo tababarid, wuxuu did u milicsadaa guulaha ama caqabadaha | Wuxuu sharxaaa sida wax looga beddelo jawiga shucuureed iyo xeeladaha waxbarista si loo daboolo baahiyaha gaarka ah |

2020

# Nuxurka Aagga IX:
# **Daryeel iyo Hab Dhaqan ka Warqaba Dhaawaca Masiibada**

Si uu uga jawaabo si wax ku ool ah baahiyaha carruurta iyo qoysaska ay saameeyeen dhaawaca masiibadu iyo heerarka sare ee welwelku, baruhu waa inuu fahmo:

- qeexitaannada dhaawaca masiibada/welwelka, baahsanaanteeda iyo fikradaha dhaawaca masiibada la xiriira
- nidaamka jawaab celinta caruurta ee ee welwelka iyo dabeecadaha ayaa waxaa saameeya dhaawaca masiibada.
- xiriirka u dhexeeya dhaawaca masiibada iyo horumarka: dhaawaca masiibadu wuxuu wiiqi karaa horumarka, oo saameynta dhaawaca masiibadana waxaa saameeya marxalada korriinka ee ilmaha.
- cilaaqaadka waxaa saameeya dhaawaca masiibada waxayna ka celin karaan carruurta saameynta dhaawaca masiibada.
- taageerada loogu talagalay qoysaska ay saamaysay dhaawaca masiibadu.
- saamaynta dhaawaca masiibada iyo dhaawaca masiibada ee la isu gudbiyo ay ku leedahay barayaasha carruurnimada hore.
- saamaynta dhaawaca masiibada ee jiilasha dhexdooda ah iyo ta taariikhiga ah ay ku leedahay carruurta iyo qoysaska iyo daryeel bixiyayaasha.
- nidaamyada lagu taageerayo carruurta iyo qoysaska la kulmay dhaawaca masiibada

### Maxaan uga jeednaa welwelka iyo dhaawaca masiibada (stress and trauma)?

Waxaa jira welwel ay leedahay sii socoshada dhaawaca masiibadu (Center on the Developing Child) taasoo hawl galisa habka jawaab celinta welwelka ee jirkeena. ***Welwelka wanaagsani*** wuxuu kor u qaadaa horumarka isagoo dhiirigelinaya barashada xirfado cusub. Tusaale ahaan, dhallaanka ku niyad jabsa (laakin aan aad u niyad jabin) markuu awoodi waayo inuu gaaro qalabka ay carruurtu ku ciyaarto ayaa isku dhiirri-geliya inuu dhaqdhaqaaq badan sameeyo. Barashada carruurta ee in ay ula qabsadaan isku buuqa iyo niyad-jabka waa xirfad nololeed muhiim ah HADDII ay si ku filan u taageeraan daryeelayaashoodu in ay ku guda jiraan howshan. ***Welwelka loo dulqaadan karo*** waxaa loola jeedaa dhacdooyinka culeyska badan ama xitaa argagaxa leh, laakiin ilmuhu uu leeyahay taageero xiriir ah si uu ula qabsado xaaladda. Tusaalooyinka ugu badan waxaa ka mid noqon kara bilaabista goobta daryeelka carruurta oo cusub, dhalashada walaal ama la kulanka daaweyn caafimaad oo xanuun badan.

***Welwelka sunta ah/dhaawaca*** masiibadu waxay wax u dhimi karaan horumarka caafimaadka qaba waxaana lagu gartaa:

- Dhacdooyinka loo arko inay khatar ku yihiin nolosha/ sharafta jireed ee ilmaha ama qof muhiim u ah ilmaha (oo loo arko in khatartu isla beddesho hadba heerka korriinka carruurta);
- Sababista dareen argagax leh, gargaar la'aan, iyo argagax cabsi;
- Soo saarista saamayn jireed oo daran sida wadne garaaca xoogga ah, neefsasho degdeg ah, gariirid;
- Oo si buuxda oo xad dhaaf ah u carqadaynta xeeladaha la qabsiga ilmaha ee diyaarka ah. [marka mar ilmuhu kasii yaryahay, xeeladaha la qabsiga ay haystaan ayaa sii yaraada.]

Tusaalooyinka waxaa ka mid ah: xadgudubka, dayaca, arkidda rabshadaha, ka kaxaynta daryeele muhiim ah, habraacyo caafimaad oo xanuun badan leh, shilalka, saboolnimo qoto dheer, waaya aragnimada qaxoontinimada iyo dhaawaca masiibada ee jinsiyada ku salaysan.

## Kartiyaha

### A. Fahamka qeexitaannada dhaawaca masiibada, baahsanaanteeda iyo fikradaha dhaawaca masiibada la xiriira

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| IX.A.1 | Wuxuu muujiyaa fahamka qeexida dhaawaca masiibada iyo sida ay ugu badan tahay carruurnimada hore | Wuxuu muujiyaa fahamka baahida loo qabo 'indho u lahaanta dhaawaca masiibada'/ xog-ogaalnimo u ah ('trauma lens'), taas oo ah Baahida loo qabo dhaqamada dhaawaca masiibada iyo hababka ka warqaba dhaawaca masiibada oo ka jawaabaya saamaynta welwelka dhaawaca masiibada ee carruurta, qoysaska, iyo daryeelayaasha | Waxay kor u qaadaa wacyiga laga ay qabaan bulshada caruurnimada hore ee ku aaddan qeexidda baahsanaanta waayo-aragnimada dhaawaca masiibada ee carruurta yaryar; wuxuu u doodaa hababka ka warqaba dhaawaca masiibada oo ka jawaabaya saamaynta welwelka dhaawaca masiibada ee carruurta, qoysaska, iyo daryeelayaasha |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| IX.A.2 | Wuxu qiraa saamaynta xun ee ay ku leedahay dhaawaca masiibadu korriinka maskaxda eexilliga hore, waxbarashada, horumarka shucuurta-bulsheed, ku xirnaanta iyo xiriirka, cilaaqaadka iyo caafimaadka jirka | Wuxuu bixiyaa tusaalooyin ku saabsan saameynta xun ee dhaawaca masiibadu uu ku leeyahay horumarka | Wuxuu u fududayaa in waalidiinta iyo daryeelayaasha kale ay isticmaalaan aragti xog-ogaalnimo u leh dhaawaca masiibada ee horumarka carruurta qofkiiba |
| IX.A.3 | Wuxuu qiraa in dhallaanka iyo carruurta yaryar ay awood u leeyihiin inay 'xusuutaan' dhacdooyinka dhaawaca masiibada iyagoo isticmaalaya dareenka iyo xusuusta 'jirka ku salaysan' iyo falcelinta kale ee jirka<br><br>Tusaalooyinka waxaa ka mid ah dhawaaqyada, urta, taabashada, neefsashada degdega ah | Wuxuu bixiyaa tusaalayaal xusuusta dareenka iyo jirka ku salaysan, sida ay u kicin karaan, iyo sida ay ugu muuqan karaan carruurta yaryar | Wuxuu si naxariis leh u dhisaa fahamka xusuusta jirka ku salaysan ee dhaawaca masiibada ee carruurta yaryar ee waalidiinta iyo dadka la shaqeeya |

## B. Wuu fahmayaa in nidaamka jawaab celinta caruurta ee ee welwelka iyo dabeecadaha ay saamayso dhaawaca masiibadu.

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| IX.B.1 | Wuxuu aqoonsan yahay in dhaawaca masiibadu ay saamayso nidaamka ka jawaab celinta welwelka ee maskaxda iyo horumarinta ismaamulitaanka | Wuxuu qiraa in dabeecadaha, sida xanaaqa, gardarada ama ka bixitaanku, ay noqon karaan natiijada dhaawaca masiibada iyo xasuusinta waayintaan ama ay noqon karaan xirfado la qabsi oo xun oo loo samaysto si looga jawaabo dhaawaca masiibada. | Wuxuu la shaqeeyaa kuwa kale si loo tixgeliyo saamaynta dhaawaca masiibada ee hab dhaqanka carruurta oo uu fuliyaa xeeladaha isku-dubbaridka xog ogaalka ah |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| IX.B.2 | Wuxuu u wajahaa dabeecadaha adag isagoo xiisayn iyo furfurnaan u leh suurtogalnimada in welwelk/ dhaawaca masiibadu ay qayb ka noqon karto hab-dhaqanka carruurta oo uu tan tixgaliyaa marka uu u jawaabayaan ilmaha | Wuxuu Shakhsi ku haboonaysiiyaa oo fuliyaa xeeladaha la maaraynta isxakamaynta ee ku habboon korriinka¬ | Wuxuu tababaraa daryeel-bixiyeyaasha si ay dib ugu milicsadaan macnaha hab-dhaqanka carruurta iyaga oo isticmaalaya eegitaan dhaawaca masiibada ka warqaba oo ay hirgeliyaan xeeladaha maaraynta isxakamaynta oo warqab u ah dhaawaca masiibada¬ |
| IX.B.3 | Wuxuu aqoonsadaa baahida loo qabo in la samaysto xeeladaha wax looga qabanayo dabeecadda carruurta iyadoo la adeegsanayo aragtiyaha warqabka u ah dhaawaca masiibada | Wuxuu samaystaa xeeladaha wax looga qabanayo dabeecadda carruurta isagoo adeegsanaya aragtiyaha warqabka u ah dhaawaca masiibada; tusaale ahaan, bixinta taageero dheeraad ah inta lagu jiro xilliga kala beddelka | Wuxuu hagaa dadka kale si ay u hirgeliyaan xeelado warqab u ah dhaawaca masiibada si looga jawaabo dabeecadaha carruurta, oo ay ku jiraan mudnaanta in la siinayo dhaqamada daryeelka aasaasiga ah ee kor u qaadaya xiriirka kalsoonida iyo ula kac ah istraatijiyadaha la maaraynta isxakamaynta |
| IX.B.4 | Wuxuu qeexayaa baahida loo qabo deegaan badbaado leh, nidaamsan lagu garto jadwalo hawleed, la saadaalin karo iyo sii socoshada daryeelka | Wuxuu bixiyaa deegaan nidaamsan oo lagu garto kala beddelaado xaddidan oo la saadaalin karo, hawlo joogto ah leh<br>Wuxuu fuliyaa kala beddelaado deggan, oo la saadaalin karo, oo bixinaya taageerada shakhsi ahaaneed ee carruurta haddii loo baahdo | Wuxuu mudnaan siiyaa sii wadida daryeelka iyada oo loo marayo xeerarka barnaamijka iyo hab dhaqamada, oo ay ku jiraan isticmaalka dhaqamada daryeelka aasaasiga ah oo uu la wadaagaa shaqaalaha iyo qoysaska xeeladaha la saadaalin karo oo si hawlo joogto ah iyo kala bedelaada |
| IX.B.5 | Wuxuu qirayaa in waayo-aragnimada carruurta ee dhaawaca masiibadu uu ka muuqan karto ciyaartooda | Wuxuu yeeshaa mawqif aan layaabitaan ku jirin marka uu u jihaynayo carruurta dhinaca ciyaarta badbaadada, wax dhisitaanka leh;<br>Wuxuu muujiyaa ka warqabka habka si kor looga warqabo walaacyada iyo samaynta u gudbinta adeegyada si looga jawaabo caddaynta dhaawaca masiibada ee lagu arko ciyaaro | Wuxuu kala hadlaa qoysaska welwelka ku saabsan caddaynta ka soo muuqashada ee dhaawaca masiibada ee ciyaarta carruurta wuxuuna sameeyaa u gudbin ku habboon si loo helo taageerada ilmaha iyo qoyska; wuxuu la shaqeeyaa adeeg bixiyeyaasha kale marka la tilmaamo si loo xaqiijiyo badbaadada carruurta |

## C. Wuxuu fahmaa xiriirka u dhexeeya dhaawaca masiibada iyo horumarka: dhaawaca masiibadu wuxuu wiiqi karaa horumarka, oo saameynta dhaawaca masiibadana waxaa saameeya marxalada korriinka ee ilmaha.

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| IX.C.1 | Wuxuu aqoonsadaa saamaynta dhaawaca masiibada ee dhammaan qaybaha korriinka iyo baahida loo qabo taageero shaqsiyeed | Wuxuu bixiyaa taageerada korriinka shaqsiyeed iyo taageerida marka carruurtu la kulmaan dhaawaca masiibada | Wuxuu lataliyaa qoysaska iyo daryeelayaasha kale si ay ula qabsadaan dhaqamada daryeelka si ay u taageeraan carruurta la kulantay dhaawaca masiibada, caawinta heerkooda korriinka iyo baahida ee qayb kasta oo qaybaha korriinka ah. |
| IX.C.2 | Wuxuu muujiyaa xiisaha ku saabsan bal in/sida ay dhaawaca masiibadu u saamayn karaan horumarka carruurta, tusaale marka ay jirto caddaynta dib u dhac koritaanka ama daahitaan | Wuxuu ka raadiyaa macluumaadka ilaha ku habboon si uu u go'aamiyo haddii iyo sida ay dhaawaca masiibadu laga yaabo in ay u saameeyaan korriinka ilmaha | Wuxuu fududeeyaa u gudbinta khayraadka ku habboon ee qiimaynta iyo faragelinta si loo aqoonsado baahiyaha koritaanka carruurta marka carruurta/ qoysasku ay la kulmen dhaawaca masiibada. |
| IX.C.3 | Wuxuu aqoonsadaa in dhallaanku ay la kulmaan dhaawaca masiibada si loo eegayo awooddooda korriinta iyo hawlahooda | Wuxuu aqoonsadaa sida dhallaanku ay ula kulmaan dhaawaca masiibada si loo eegayo awooddooda korriinta iyo hawlahooda, tusaale ahaan, dhisidda isku-xirnaan sugan, abaabulida khibradaha dareenka iyo xakamaynta soo ifbaxaysa | Wuxuu naqshadeeyaa qorshaynta daryeelka si loo waafajiyo awoodaha korriinka iyo hawlaha dhallaanka la kulmay dhaawaca masiibada; tusaale ahaan, wanaajinta sii wadida daryeelka uu sameeyo daryeel bixiye gaar ah (tusaale qaabka daryeelka aasaasiga ah) iyo kor u qaadista taageerada xakamaynta |
| IX.C.4 | Wuxuu aqoonsadaa in socod baradku ay la kulmaan dhaawaca masiibada si loo eegayo awooddooda korriinta iyo hawlahooda | Wuxuu aqoonsadaa sida dhallaanku ay ula kulmaan dhaawaca masiibada si loo eegayo awooddooda korriinta iyo hawlahooda, oo ay ku jiraan madaxbannaanida iyo kala-tagga, hawlaha iyo horumarinta joogtada ah ee xakamaynta | Wuxuu naqshadeeyaa qorshaynta daryeelka si loo waafajiyo awoodaha korriinka iyo hawlaha socod baradka la kulmay dhaawaca masiibada; tusaale ahaan, taageeridda dheelitirka u dhexeeya ku-tiirsanaanta iyo madax-bannaanida marka la waxyeeleeyo, in la xoojiyo taageerada isxakamaynta |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| IX.C.5 | Wuxuu aqoonsadaa in ilamaha aan gaarin da'da iskuulku ay la kulmaan dhaawaca masiibada si loo eegayo awooddooda korriinta iyo hawlahooda | Wuxuu aqoonsadaa sida ilmaha aan da'da iskuulka gaarin ay ula kulmaan dhaawaca masiibada si loo eegayo awooddooda korriinta iyo kartiyahooda, oo ay ku jiraan xakamaynta shucuurta, is dhexgalka bulshaynta facooda, kordhinta xalinta dhibaatooyinka iyo hawlaha u diyaarsanaanta iskuulka | Wuxuu naqshadeeyaa qorshaynta daryeelka si uu u daboolo baahiyaha gaarka ah ee carruurta da'da iskuulka ka hor ee ay saamaysay dhaawaca masiibadu oo bartilmaameedsanaysa baahiyahooda korriinka, ee aan daruuri ahaan ahayn da'da isku xigxigta, oo ay ku jirto la-maaraynta isxakamaynta. |

## D. Wuxuu fahmaa sida cilaaqaadka ay u saameeyaan dhaawaca masiibada ayna ka celin karaan carruurta saameynta dhaawaca masiibada labadaba.

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| IX.D.1 | Wuxuu aqoonsadaa in xiriirka daryeel bixiyaha iyo ilmuhu ay saameyn ku yeelato dhaawaca masiibada; Taariikhda cilaaqaadka ee carruurtu waxay saamaysaa filashada carruurta ee cilaaqaadka taas oo keenta tilmaamo jahawareer ah oo ku wajahan daryeelayaasha | Wuxuu u fiirsadaa dabeecadaha cilaaqaadka ee ilmaha si uu u fahmo saamaynta ka dhalan karta dhaawaca masiibada oo uu si waafaqsan wax uga beddelaa dhaqamada daryeelka | Wuxuu fuliyaa xeerar kor u qaadaya doorka xiriirka daryeel bixiyaha iyo ilmaha in uu noqdo gaadiid lagu bogsiinayo waxyeelada dhaawaca masiibada. Wuxuu mudnaanta siiyaa sii wadida daryeelka (tusaale ku dhaqanka daryeelka aasaasiga ah) si loo taageero cilaaqaadka sugan oo u dhexeeya daryeel bixiyaha iyo ilmaha |
| IX.D.2 | Wuxuu aqoonsadaa in cilaaqaad ammaan ah, xasiloon, oo daryeel naxariis leh uu bixin karo difaac ka dhan ah saamaynta welwelka iyo/ama dhaawaca masiibada oo daba dheeraada | Wuxuu bixiyaa si ula kac ah meel badbaado u ah, joogto ah, cilaaqaad warqab ah oo loogu talagalay carruurta ay la kulantay dhaawaca masiibada | Wuxuu taageeraa oo la taliyaa kuwa kale si ay shaqsiga ugu habboonaysiiyaan una waafajiyaan dhaqamadooda daryeelka si ay mudnaanta u siiyaan cilaaqaadka ka dhexeeya iyaga iyo carruurta ay daryeelayaan |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| IX.D.3 | Wuxuu aqoonsadaa in ilmaha ay saamaysay dhaawaca masiibadu uu fasalka keeno waayo-aragnimadaas taas oo saamaysa facooda fasalka iyo isku xirnaanta kooxda | Wuxuu bixiyaaa fursadaha ku hbboonaysiinta shakhsiga ee taageerada carruurta ee cilaaqaadka facooda iyo isdhexgalkooda ay saamaysay dhaawaca masiibadu; Wuxuu tixgeliyaa siyaabaha uu faca uga ilaalin lahaa saamaynta xun ee dhaawaca masiibada ee ay wajeheen ilmuhu | Wuxuu fuliyaa xeerarka iyo dhaqamada taageeraya awooda daryeelayaasha si ay u siiyaan taageero shaqsiyeed carruurta ay saameysay dhaawaca masiibadu iyada oo loo eegayo xaalada daryeelka kooxda |

## E. Taageerada qoysaska ay saamaysay dhaawaca masiibadu

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| IX.E.1 | Wuxuu aqoonsan yahay in dhaawaca masiibadu ay saamayso qoyska oo dhan, haddii ay ku dhacday waalidka ama ilmaha ama labadaba | Wuxuu tixgeliaa haddii/ sida ay dhaawaca masiibadu u saamaynayaan ilmaha iyo qoyska; tusaale ahaan, dhibaatooyinka ka-tegitaanka, xakamaynta kacsanaanta iyo dareenka shucuurta, akhrinta iyo ka jawaabista tilmaamaha carruurta | Wuxuu kula taliya kuwa kale si ay u gartaan uguna jawaabaan si xasaasi ah waalidiinta/ daryeelayaasha carruurta laga yaabo in ay la kulmeen dhaawaca masiibada taas oo saamayn karta awooddooda ay ku caawiyaan caruurtooda |
| IX.E.2 | Wuxuu aqoonsadaa awoodda cilaaqaadka si uu qoysaska uga ilaaliyo saameynta dhaawaca masiibada; Wuxuu abuuraa soo dhawayn, taageero iyo deegaan aan la yaabitaan lahayn qoysaska | Wuxuu la kaashadaa qoysaska si ay u horumariyaan fahamka macnaha hab-dhaqanka ilmaha taas oo tixgalinaysa saamaynta dhaawaca masiibada, u xiriirida siyaalo taageero ah, oo aan layaabitaan lahayn oo ku martiqaada qoysaska inay la wadaagaan hawlahooda joogtada ah iyo hab haqankooda ay u isticmaalaa si ay u dejiyaan ilmahooda ulana wadaagaan xeeladaha daryeelka qoysaska. | Wuxuu horumariyaa dhaqamada iyo xeerarka warqabka u ah dhaawaca masiibada ee mudnaanta siiya cilaaqaadka daryeel bixiyayaasha-ilmaha, waalidka-ilmaha, iyo cilaaqaadka daryeelbixiyaha iyo waalidka, oo ay ku jirto sii wadida daryeelka iyo kala hormarinta xiriirada joogtada ah, taageerada lala yeesho waalidka¬ |

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| IX.E.3 | Waxay hayaa ka warqabka in khayraad bulshadu diyaar u yihiin qoysaska ay ku dheceen dhaawaca masiibada | Wuxuu raadiyaa oo siiyaa qoysaska taageero iyo macluumaad ku saabsan adeegyada bulshada marka ay qoysasku la kulmaan welwelka iyo/ama dhaawaca masiibada | Wuxuu baraa dadka kale wax ku saabsan helitaanka khayraadka bulshada dhexdeeda ka jira ee taageera qoysaska ay ku dheceen heerar sarreeya ee welwel iyo dhaawaca masiibada ah |

## F. Wuxuu fahmayaa saamaynta dhaawaca masiibada iyo dhaawaca masiibada ee la isu gudbiyo ay ku leedahay barayaasha carruurnimada hore.

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| IX.F.1 | Wuxuu garwaaqsadaa in daryeel bixiyayaashu ay la kulmeen dhaawaca masiibada oo iyaga u gaar ah oo la soo 'kicin karo'/dhaqaajin karo iyadoo ay joogaan carruurta yaryar iyo qoysaskoodu | Wuxuu muujiyaa xiiso iyo iska warqab ku saabsan saamaynta daryeelka carruurtu ay ku leedahay xusuusta nafeed iyo dabeecadaha daryeel bixinta. | Wuxuu kula taliyaa shaqaalaha ku dhaqanka xiiso iyo iska warqab ku saabsan saamaynta suurtagalka ah ee waaya-aragnimadooda nololeed ay ku leeyiin aragtidooda iyo dabeecadaha daryeel bixinta. Wuxuu u diraa shaqaalaha khayraadka ku habboon hadba sida ay ugu baahanyihiin |
| IX.F.2 | Wuxuu aqoonsadaa in la shaqaynta carruurta iyo qoysaska ay saamaysay dhaawaca masiibadu iyo saamaynta ay ku leedahay daryeelayaasha, taasoo gacan ka geysata dhaawaca masiibada ee la isu gudbiyo, ku daalitaanka iyo ka tegitaanka shaqaalaha | Wuxuu muujiyaa is-wacyigelinta nafeed wuxuuna aqoonsadaa calaamadaha dhaawaca masiibada ee la isu gudbiyo wuxuuna ku dhaqmaa istiraatijiyad is-daryeel/waaritaan | Wuxuu qaadaa tillaabooyin ka hortag ah si uu uga ilaaliyo daryeelayaasha dhaawaca masiibada ee la isu gudbiyo |
| IX.F.3 | Wuxuu aqoonsanyahay in dhaawaca masiibada ee la isu gudbiyo uu wax u dhimi karo daryeelka carruurta iyo qoysaska | Wuxuu ilaaliyaa ka warqabka in dhaawaca masiibada ee la isu gudbiyo uu saamayn ku yeelan karo hab dhaqamada daryeelka oo uu raadsado taageero | Wuxuu kala taliyaa shaqaalaha in ay gartaan calaamadaha dhaawaca masiibada ee la isu gudbiyo ee ku jirta naftooda iyo inay raadsadaan ilo taageero marka loo baahdo |

**G. Wuxuu fahmaa saamaynta dhaawaca masiibada ee jiilasha dhexdooda ah iyo ta taariikhiga ah ay ku leedahay carruurta iyo qoysaska iyo daryeel bixiyayaasha.**

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| IX.G.1 | Wuxuu qiraa saamaynta dhaawaca masiibada ee taariikhiga ah iyo ta jiilasha dhexdooda ah ay ku leedahay carruurta iyo qoysaska | Wuxuu u ahaadaa in uu yahay celin ka ilaalinaysa carruurta iyo qoysaska saamaynta dhaawaca masiibada ee taariikhiga ah iyo ta jiilasha dhexdooda ah goobtooda shaqada iyada oo loo marayo dhaqamo kala duwanaanshaha warqab u ah | Waxay horumariyaa xeerarka iyo dhaqamada ka hortagaya saamaynta dhaawaca masiibada ee taariikhiga ah iyo ta jiilasha dhexdooda ah ee carruurta iyo qoysaska |
| IX.G.2 | Wuxuu qiraa saamaynta dhaawaca masiibada ee taariikhiga ah iyo ta jiilasha dhexdooda ah ay ku leedahay qiyamka daryeelayaasha, filashooyinka dabeecadda iyo hab dhaqamada daryeel bixinta | Waxay ka tarjumayaa qiyamka dhaqameed, malo-awaalka, iyo filashooyinka dabeecadda iyo sida ay u saameeyaan hab dhaqamada daryeel bixinta | Wuxuu kor u qaadaa is-hoosaysiinta dhaqameed iyo is-ogaanshaha nafeed ee shaqaalaha maadaama ay saamaynayso isdhexgalka qoysaska iyo carruurta ay daryeelayaan |
| IX.G.3 | Wuxuu aqoonsadaa jiritaanka dhaawaca masiibada ee jinsiyada (sidoo kale loo yaqaano welwelka dhaawaca masiibada ee ku salaysan jinsiyadda) ee qoysaska iyo daryeelayaasha, ie. Saamaynta welwelka leh ama xanuunka shucuureed ee qofku waayo-aragnimada uu u leeyahay cunsuriyadda iyo takoorka (NCTSN, 2017) | Wuxuu fuliyaa dhaqamada xasaasiga ah ee kor u qaada aqoonsiga jinsiyadeed ee wanaagsan ee carruurta iyo qoysaska | Waxay horumariyaa xeerarka iyo dhaqamada ka hortagaya saamaynta dhaawaca masiibada jinsiydeed ee carruurta, qoysaska iyo daryeelayaasha |

## H. Wuxuu la shaqeeyaa nidaamyada taageera carruurta iyo qoysaska la kulmay dhaawaca masiibada

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| IX.H.1 | Wuxuu qaataa mas'uuliyadda oo wuxuu ilaaliyaa xuduudaha doorka qofka ee joogtada ah ee daryeelka warqabka u ah dhaawaca masiibada | Wuxuu la xiriiraa nidaamyada taageera carruurta iyo qoysaska la kulmay dhaawaca masiibada | Wuxuu dhisaa xiriir iskaashi oo ka dhexeeya nidaamyada taageera carruurta iyo qoysaska la kulmay dhaawaca masiibada wuxuuna ka caawiyaa kuwa kale inay wada shaqeeyaan oo ay ka wada xiriiraan dhammaan nidaamyada danta ugu wanaagsan ee carruurta iyo qoysaska la kulmay dhaawaca masiibada. |
| IX.H.2 | Wuxuu aqoonsadaa baahida loo qabo u gudbinta nidaamyada kale wuxuuna weydiistaa caawimaad si loo helo adeegyada ku habboon qoysaska la kulmay dhaawaca masiibada | Wuxuu aqoonsadaa khayraadka loogu talagalay qoysaska la kulmay dhaawaca masiibada wuxuuna la wadaagaa qoysaska haddii loo baahdo | Wuxuu abuuraa, ilaaliyaa oo cusboonaysiiyaa liisaska khayraadka ee la heli karo ee loogu talagalay qoysaska la kulmay dhaawaca masiibada |

10

2020

# Nuxurka Aagga X: **La shaqaynta caruurta ku Hadla Luqadaha Badan ee aan gaarin da'da iskuulka iyo qoysaskooda**

Baruhu waa inuu fahmo:

- In laga fikiro sida caqiidada shakhsi ahaaneed ee ku saabsan dhaqanka iyo luqadda ay ula mid noqon karto, ama uga duwan yihiin, kuwa carruurta iyo qoysaska aan u adeegno.
- in uu u doodo ka qaybgelinta xoogga ku salaysan, oo diiradda saaraya luqadda.
- in uu kor u qaado sinnaanta, deegaan dhaqan ahaan ku habboon dhammaan carruurta ku hadasha luqadaha badan
- in uu yaqaano sida loogu xirmo WIDA Halbeegyada Horumarinta Luqadda carruurnimada Hore iyo halbeegyada waxbarashada carruurnimada hore ee gobolka.

**Erayga carruurta luqadaha badan ku hadasha** waxa loo isticmaalaa in lagu tilmaamo carruur kala duwan dhaqan iyo afba, da'dooduna u dhaxayso dhalasho ilaa shan sano, kuwaas oo baranaya laba ama in ka badan luqado ah. Carruurta ku hadasha luqadaha badan waxay kula kulmaan afaf badan oo guryahooda, bulshooyinkooda, iyo/ama goobaha daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada hore, waxayna u horumariyaan oo u isticmaalaan luqadda siyaabo isbedbedalaya. Gudaha xirfadan shaqo, carruurtan waxaa badanaa loogu yeeraa bartayaasha labada luqadood, ama DLLs.

# Kartiyaha

## A. Collaborate to ensure that all adults interacting with multilingual children support language development

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| X.A.1 | Wuxuu aqoonsadaa qoysasku inay yihiin isha koowaad ee uu ka yimaado macluumaadku<br><br>a. Wuxuu soo helaa macluumaadka ku saabsan muhiimadda ay leedahay in la dhiso wada shaqayn, xiriir sinnaan leh oo lala yeesho qoysaska carruurta ku hadla luqadaha badan, daryeelayaasha, iyo asxaabta shaqada si kor loogu qaado horumarinta luqaddooda iyo barashada<br><br>b. Wuxuu u fiirsadaa sida hab dhaqanka wada shaqaynta shakhsi ahaaneed iyo barnaamijku ay ka duwanaan karaan sida ay qoysasku rabaan inay uga qaybgalaan oo u raadiyaan macluumaadka ku saabsan hab dhaqamada iskaashiga sinaanta oo dhaqan ahaan iyo luqad ahaanba warqab ah | Wuxuu ula shaqeeyaa qoysasku inay yihiin isha koowaad ee uu ka yimaado macluumaadku<br><br>a. Wuxuu tusaaleeyaa dhisidda wada shaqayn, xiriir sinnaan leh oo lala yeesho qoysaska carruurta ku hadla luqadaha badan, daryeelayaasha, iyo asxaabta shaqada wuxuuna la wadaagaa macluumaadka si kor loogu qaado horumarinta luqaddooda iyo barashada<br><br>b. Wuxuu u fiirsadaa sida hab dhaqanka wada shaqaynta shakhsi ahaaneed iyo barnaamijku ay ka duwanaan karaan sida ay qoysasku rabaan inay uga qaybgalaan oo u raadiyaan macluumaadka ku saabsan hab dhaqamada iskaashiga sinaanta oo dhaqan ahaan iyo luqad ahaanba warqab ah | Wuxuu difaacdaa xaqa ay qoysasku u leeyihiin inay u adeegaan ilaha aasaasiga ah ee macluumaadka<br><br>a. Wuxuu tusaaleeyaa dhisidda wada shaqayn, xiriir sinnaan leh oo lala yeesho qoysaska carruurta ku hadla luqadaha badan, daryeelayaasha, iyo asxaabta shaqada wuxuuna la wadaagaa macluumaadka si kor loogu qaado horumarinta luqaddooda iyo barashada<br><br>b. Wuxuu abuurtaa, iyadoo uu la kaashanayo qoysaska, fursadaha nidaamka si loo xaqiijiyo hab dhaqan iskaashi sinnaan leh oo dhaqan ahaan iyo luqad ahaana warqabka ah oo loogu talagalay dhammaan qoysaska |

**Hab dhaqamada skaashiga ee ka warqaba sinaanta iyo dhaqan ahaan iyo luqad ahaanba waxay xaqiijiyaan**

- Ka qaybgalka iyo wada shaqaynta qoysaska ku hadla luqadaha badan
- Ka qaybgelinta qoysaska ku hadla luqadaha badan waa mid khuseeya
- Xaqa ay u leeyihiin qoysaska ku hadla luqadaha badan in ay si macno leh ugala shaqeeyaan barayaasha carruurnimada hore iyo shaqaalaha waxa ku saabsan horumarka luqada iyo waxbarashada in la taageero

## B. Waxay soo ururiyaan macluumaadka ku saabsan hiddaha dhaqamada carruurta ku hadasha luqadaha badan iyo luqadaha la maqlay ee la isticmaalay wakhti hore iyo hadda si loo taageero horumarinta luqadda

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| X.B.1 | Wuxuu muujiyaa baahida loo qabo in si xushmad leh loo soo ururiyo macluumaadka ku saabsan hab dhaqamada carruurta ku hadasha luqadaha badan, luqada, iyo aqoonta akhris-qoraalka<br>a. Wuxuu muujiyaa doorkiisa in uu yahay arday baranaya marka uu soo ururinayo macluumaadka<br>b. Wuxuu waydiistaa dadka waaweyn ee kale siyaabaha dib loogu milicsado caqiidooyinka shakhsi ahaaneed iyo hab dhaqabada hidda dhaqameed, hab dhaqamada barnaamijka iyo si loo hubiyo eexda (ay ku jirto eexda xun ee ku wajahan lahjadaha, lahjadda, doorashada kelmad, luqad bedelaada (code-switching), iwm.) | Wuxuu isticmaalaa la falgalka ilmaha iyo qoyska, warbixinta qoyska, iyo khayraadka kale si uu si xushmad leh u ururiyo macluumaadka ku saabsan hiddaha dhaqameed, luqadda, iyo waayo-aragnimada aqoonta akhris-qoraalka ee ilmaha<br>a. Wuxuu tusaaleeyaa in uu yahay arday baranaya marka uu soo ururinayo macluumaadka<br>b. Wuxuu dib u milicsadaa caqiidada shakhsiyeed, hab dhaqamada hiddaha dhaqameed, iyo hab dhaqanka barnaamijka; wuxuu ka hubiyaa eexda marka la ururinayo macluumaadka (ay ku jirto eexda xun ee ku wajahan lahjadaha, lahjadda, doorashada kelmad, luqad bedelaada (code-switching), iwm.) | Wuxuu u doodaa oo ka wada shaqeeyaan abuurista nidaam xog ururin joogto ah oo ku saabsan hab dhaqamada hiddaha dhaqanka ee habka carruurta luqadaha badan ku hadasha ay ay u adeegsadaan luqadda, iyo khibrada akhris-qoraalka, oo ku salaysan ixtiraam, wada xiririi laba-jiho ah iyo cilaaqaadka qoysaska<br>a. Wuxuu dib ugu beddelaa doorka barayaasha in ay yihiin arday ahaan marka ay xog ururinayaan<br>b. Wuxuu kula taliyaa kuwa kale wax ku saabsan dib u milicsiga joogtada ah iyo aqoonta sii kordheysa ee la xiriirta caqiidooyinka shakhsi ahaaneed iyo hab dhaqabada hidda dhaqameed, hab dhaqanka barnaamijka, iyo eexda (ay ku jirto eexda xun ee ku wajahan lahjadaha, lahjadda, doorashada kelmad, luqad bedelaada (code-switching), iwm.) |

## C. Wuxuu aqoonsadaa oo isticmaalaa waxa ay ku xoogan yihiin, khayraadka, iyo waayo-aragnimada carruurta ku hadasha luqadaha badan si ay u taageeraan oo kor ugu qaadaan horumarinta iyo barashada luqadda

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| X.C.1 | a. Wuxuu qeexaa hab ku salaysan waxa ay ku xoogan yihiin oo lagula shaqeeyo carruurta luqadaha badan iyo qoysaskooda<br><br>b. Wuxuu magacaabayaa dhowr tusaale oo ku saabsan waxa ay ku xooganyihiin, khayraadka, iyo waayo-aragnimada carruurta ku hadasha luqadaha badan, qoysaskooda, iyo bulshooyinku | Wuxuu daadihiyaa waxqabadyada iyo dhaqamada ku salaysan waxyaabaha lagu xoog badan yahay, khibradaha, xiisaha, hiddaha dhaqanka, suugaanta, iyo dhaqanka luqadaha ee carruurta ku hadasha luqadaha badan, qoysaskooda, iyo bulshooyinkooda | Wuxuu naqshadeeyaa oo abuuraa manhaj ku salaysan waxyaabaha lagu xoog badanyahay, khibradaha, xiisaha, hiddaha dhaqanka, suugaanta, iyo dhaqanka luqadaha ee carruurta ku hadasha luqadaha badan, qoysaskooda, iyo bulshooyinkooda |

## D. Wuxuu soo ururiyaa, falanqeeyaa, oo dib u milicsi ku sameeyaa macluumaadka si uu diiradda u saaro dabiicadda korriinka iyo sifooyinka gaarka ah ee barashada luqadda ee carruurta ku hadasha luqadaha badan iyo horumarka

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| X.D.1 | Wuxuu u soo ururiyaa macluumaadka in uu<br><br>a. In uu ku kordhiyo fahamka iyo aqoonta ku saabsan dabiiciga isbedelaysa iyo sifooyinka gaarka ah ee horumarinta luqadda carruurta luqadaha badan<br><br>b. In uu meesha ka saaro malaynta fikradaha khaldan ee laga qabo horumarinta luqadda carruurta ku hadasha luqadaha badan (oo ay ku jirto fikrada khaldan ee ku wajahan lahjadaha, lahjadda, doorashada kelmad, luqad bedelaada (code-switching), iwm.) | Wuxuu ku muujiyaa macluumaadka la soo ururiyay in<br><br>a. In uu ku kordhiyo fahamka iyo aqoonta ku saabsan dabiicadda isbedelaysa iyo sifooyinka gaarka ah ee horumarinta luqadda carruurta luqadaha badan<br><br>b. In uu meesha ka saaro malaynta fikradaha khaldan ee laga qabo horumarinta luqadda carruurta ku hadasha luqadaha badan (oo ay ku jirto fikrada khaldan ee ku wajahan lahjadaha, lahjadda, doorashada kelmad, luqad bedelaada (code-switching), iwm.) | Wuxuu dhisaa hababka iyo nidaamyada loogu talagalay ururinta, falanqaynta, iyo dib u milicsiga macluumaadka in uu<br><br>a. In uu ku kordhiyo fahamka iyo aqoonta ku saabsan dabiiciga isbedelaysa iyo sifooyinka gaarka ah ee horumarinta luqadda carruurta luqadaha badan<br><br>b. In uu meesha ka saaro malaynta fikradaha khaldan ee laga qabo horumarinta luqadda carruurta ku hadasha luqadaha badan (oo ay ku jirto fikrada khaldan ee ku wajahan lahjadaha, lahjadda, doorashada kelmad, luqad bedelaada (code-switching), iwm.) |

**E. Adeegsadaa macluumaadka la soo aruuriyay ee ku saabsan carruurta ku hadasha luqadaha badan: dhaqamadooda, sida ay u isticmaalaan luqadda, iyo horumarka luqaddooda, waxyaabaha ay ku xoogganyihiin, iyo khayraadka**

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| X.E.1 | a. Wuxuu wadaagaa muhiimada ay leedahay in la soo uruuriyo iyo adeegsiga macluumaadka ku saabsan carruurta ku hadasha luqadaha badan, qoysaskooda, iyo bulshooyinkooda marka ay qorsheynayaan waxbarashada<br><br>b. Wuxuu caawiyaa in la aqoonsado fursadaha lagu baaqo qoysaska inay ka qayb qaataan waxbarashada carruurta iyo waayo-aragnimada akhris-qoraalka iyadoo lagu salaynayo indho-indhaynta iyo macluumaadka la soo ururiyay | a. Wuxuu adeegsadaa macluumaadka la soo aruuriyay ee ku saabsan carruurta ku hadasha luqadaha badan, qoysaskooda, iyo bulshooyinkooda marka ay qorsheynayaan waxbarashada<br><br>b. Wuxuu la shaqeeyaa qoyska iyo xubnaha bulshada si ay wada-jir u abuuraan agab ayna uga wada-shaqeeyaan waxbarashada carruurta iyo waayo-aragnimada akhris-qorista. | a. Wuxuu abuuraa macluumaadka la soo aruuriyay ee ku saabsan carruurta ku hadasha luqadaha badan, qoysaskooda, iyo bulshooyinka oo loogu talagalay qorsheynta waxbarashada<br><br>b. Wuxuu abaabulaa kala qaybgelinta qoyska iyo xubnaha bulshada barayaasha kale si ay wada-jir u abuuraan agab ayna uga wada-shaqeeyaan waxbarashada carruurta iyo waayo-aragnimada akhris-qorista |

**F. Wuxuu ugu fiirsadaa isticmaalka iyo horumarinta luqadda ee carruurta ku hadasha luqadaha badan siyaabo kala duwan oo joogto ah iyo waayo-aragnimada waxbarasho maalinta ee dhan dhammaan goobaha daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada hore**

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| X.F.1 | a. Wuxuu tilmaamid ka bixiyaa sida ku dhaqanka luqadda ee carruurtu u kala duwanaan doono iyadoo ku xiran xaaladda iyo hiddaha dhaqameed<br>b. Wuxuu u fiirsadaa is dhexgalka luqadda ee carruurta ku hadasha luqadaha badan oo ku jirta xaalado kala duwan, oo ay ku jiraan dhexgalka qoyska, facooda, iyo dadka waaweyn, iyo haddii ay suurtogal tahay, bulshada dhexdeeda | a. Wuxuu sheegaa xiriirka ka dhexeeya ku dhaqanka luqadda, macnaha guud ee dhaqan bulsheed, iyo hab dhaqamada hiddaha dhaqameed<br>b. Wuxuu jadwal u sameeyaa indho-indhayn joogto ah ee caruurta ku hadla luqadaha badan ku xiriirkooda luqadda iyaga oo ku jira xaalado kala duwan, oo ay ku jiraan isdhexgalka/la falgalka qoyska, facooda, iyo dadka waaweyn, iyo haddii ay suurtogal tahay, bulshada dhexdeeda | a. Wuxuu muujiyaa muhiimada ay leedahay la socoshada isdhexgalka luqadaha ee carruurta ku hadasha luqadaha badan oo ku jirta xaalado kala duwan iyadoo la siinayo tusaalooyin ku saabsan dhaqamada hab luqadaha kala duwan<br>b. Wuxuu dejiyaa qorshe kormeer joogto ah oo ku saabsan isdhexgalka luqadda ee carruurta ku hadasha luqadaha badan oo kujirta xaalado kala duwan, oo ay ku jiraan isdhexgalka qoyska, asxaabta, iyo dadka waaweyn, iyo haddii ay suurtagal tahay, bulshada dhexdeeda |

**Ku dhaqanka/ku celcelinta luqaddu waa siyaabaha carruurtu u isticmaalaan luqadda si ay macno u sameeyaan.** Sida ilmuhu u isticmaalo luqaddu way kala duwanaan doontaa iyadoo ku xiran luqadda iyo dhaqanka ay yaqaanaan, aqoonsigooda, iyo meesha, cidda, sida, iyo sababta ay u isticmaalayaan luqadda. Si kale haddii loo dhigo, ku dhaqanka luqadda ee ilmaha ayaa waxaa qaabeeya xaaladda dhaqan-bulsheed. Xaaladaha dhaqan-bulsheed ee barashada luqadda carruurta yaryar ayaa waxay inta badan ka dhacdaa guryahooda dhexdooda, bulshooyinkooda dhexdooda, iyo goobaha daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada hore.

Tusaale ahaan, wiil ku jira goobta daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada hore ayaa laga yaabaa inuu isticmaalo Isbaanishka si uu boombalo u weydiisto saaxiibkiis. Laakin waxa laga yaabaa in uu ku magacaabo boombalaha af Ingiriisi, sababtoo ah waxa uu markii ugu horraysay ku ciyaaray boombalaha oo uu wax ka bartay goobta daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada hore, taas oo ah goob assaasi ahaan Ingiriisi ku hadasha. Si kastaba ha ahaatee, mar dambe, marka uu af Isbaanish kula hadlayo walaalkiisa guriga (halkaas oo Isbaanishka inta badan lagu isticmaalo), waxaa laga yaabaa in uu doorto inuu af Isbaanish ku sharaxo waxa uu

boombaluhu yahay, halkii uu isticmaali lahaa magaca Ingiriisiga. Kadib waxaa laga yaabaa in ilmuhu uu ku“baro” walaalihii magaca boombalaha af Ingiriisi, sababta oo ah ilmuhu waxa uu u qaadanayaa doorka “macalinka” walaalkiisa ka yar.

## G. Wuxuu isku xiriiriyaa halbeegyada luqadda iyo halbeegyada waxbarashada carruurnimada hore iyo habraacyada si uu manhajka uga dhigo mid la heli karo oo macno u leh carruurta ku hadasha luqadaha badan

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| X.G.1 | Wuxuu sharaxaad ka bixiyaa muhiimada ay leedahay in manhajka lagu soo daro danaha carruurta ku hadasha luqadaha badan iyo ku dhaqanka luqadda | Wuxuu tusaaleeyaa sida loogu soo daro danaha carruurta luqadaha badan ku hadasha iyo ku dhaqanka luqadda manhajka la socda halbeegyada horumarinta luqadda ee loogu talagalay carruurta ku hadasha luqadaha badan iyo halbeegyada waxbarashada carruurnimada hore | Wuxuu hagaajiyaa halbeegyada - iyadoo lagu salaynayo waxbarista si loogu soo daro danaha carruurta luqadaha badan ku hadasha iyo ku dhaqanka luqadda manhajka la socda halbeegyada horumarinta luqadda ee loogu talagalay carruurta ku hadasha luqadaha badan iyo halbeegyada waxbarashada carruurnimada hore |

**Marka xirfadlayaasha carruurnimada hore ay ka hadlaan ka dhigista manhajka mid la heli karo oo macne leh** waxaan u ololeyneynaa manhajka carruurta ku salaysan oo ay ku jiraan noocyada kala duwan ee luqadda, akhris-qoraalka, iyo hab dhaqamada hiddaha dhaqameed ee carruurtu ay la yimaadaan goobta daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada hore. Manhajku waa inuu ku dhisnaado habdhaqannadan si danaha carruurta iyo hababka ay wax u qabtaan ay uga muuqdaan deegaanka, hawl maalmeedka, isdhexgalka bulshada, iyo waayo-aragnimada waxbarasho.

Tusaale ahaan, si loo xaqiijiyo macno lahaanshaha, u fiirso agabka ku jira goobtaada daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada hore marka ay koox cusub oo carruur ahi soo galayso sannad kasta. Miyey jiraan alaabo taalla meesha ciyaaha riwaayada ah oo ay caruurtu yaqaanaan iyo waxyaabo ay ku arki lahaayeen gurigooda iyo bulshadooda? Luqadaha guriga ee caruurtu miyey ka muuqdaan deegaanka oo lagu soo dhaweeyay goobta?

## H. Wuxuu aqoonsadaa baahida luqadda tacliimeed ee ku habboon korriinka ee jadwalka joogtada ah, isdhexgalka bulshada, iyo waayo-aragnimada waxbarasho

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| X.H.1 | a. Wuxuu la wadaagaa qaar ka mid ah hababka isbeddelka iyo hal-abuurka leh ee carruurta ku hadasha luqadaha badani ay u isticmaalaan luqadda marka ay ku jiraan goobahooda daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada hore<br>b. Wuxuu qeexaa siyaabaha ereyada iyo dhaqanka luqadda ee ay adeegsadaan carruurta luqadaha badan ku hadlaan ay uga duwanaan karaan ereyada la isticmaalo inta lagu jiro isdhexgalka iyo waayo-aragnimada goobta daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada hore. | a. Wuxuu bixiyaa tusaalooyin ku saabsan dhaqanka luqadda oo isbedbedelaya ee carruurta ku hadasha luqadaha badan ay ku isticmaalaan goobta daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada hore, qoysaskooda, iyo bulshada dhexdeeda<br>b. Wuxuu aqoonsadaa haddii iyo meesha ay jirto kala go'a ku dhaqanka luqadda carruurta ku hadasha luqadaha badan iyo hab dhaqanka ku habboon koriinka hab dhaqanka luqadda tacliimeed ee goobta daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada hore | a. Wuxuu ku sii dul dhisaa hababka ku dhaqanka luqadda oo isbedbedelaya ee carruurta ku hadasha luqadaha badan ay ku isticmaalaan goobta daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada hore, qoysaskooda, iyo bulshada dhexdeeda<br>b. Wuxuu kala shaqeeyaa carruurta iyo qoysaska si ay u isticmaalaan luqad dhab ah oo ka tarjumaysa kala duwanaanshaha luqadeed iyo dhaqameed ee carruurta goobta daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada hore |

## I. Wuxuu naqshadeeyaa khibradaha barashada luqadda iyadoo la tixgalinayo xaaladda dhaqan-bulsheed

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| X.I.1 | Wuxuu wayddiistaa taageero xagga ogaanshaha sida loo tixgaliyo macnaha dhaqan-bulsheed iyo hab dhaqamada luqadeed iyo hab dhaqanka hiddaha dhaqameed ee carruurta ku hadasha luqadaha badan marka la qorsheynayo waayo-aragnimadas barashada iyo isdhexgalka luqadda | Wuxuu bixiyaa tusaalooyinka waxa uu yahay macnaha in la tixgeliyo macnaha dhaqan-bulsheed iyo hab dhaqamada luqadeed iyo hab dhaqanka hiddaha dhaqameed ee carruurta ku hadasha luqadaha badan marka la qorsheynayo waayo-aragnimadas barashada iyo isdhexgalka luqadda | Wuxuu qiimeeyaa hababka kala duwan ee loo tixgeliyo macnaha dhaqan-bulsheed iyo hab dhaqamada luqadeed iyo hab dhaqanka hiddaha dhaqameed ee carruurta ku hadasha luqadaha badan marka la qorsheynayo waayo-aragnimadas barashada iyo isdhexgalka luqadda |

## J. Wuxuu fursado siiyaa dhammaan carruurta ku hadasha luqadaha badan si ay u sameeyaan fikir heer sarreeeya ah

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| X.J.1 | Wuxuu badiyaa hababka dhaqamada ugu wanaagsan ee ka caawiya carruurta ku hadasha luqadaha badan inay galaan macno samayn iyo hawlo ku salaysan su'aalo kuwaas oo ka tarjumaysa ku dhaqankooda luqadda iyo hiddaha dhaqanka¬ | Wuxuu daadihiyaa luqad ahaan iyo dhaqan ahaanba fursadaha warqabka ah ee carruurta ku hadasha luqadaha badan si ay u galaan macne samaynta iyo waxqabadyada ku salaysan su'aalaha kuwaas oo ka tarjumaysa ku dhaqankooda luqadda iyo hiddaha dhaqanka.¬ | a. Wuxuu u sharaxaa asxaabta iyo qoysaska sida carruurta ku hadasha luqadaha badani ay u muujin doonaan macne samaynta iyo weydiinta siyaabo kala duwan oo ka turjumaya dhaqankooda luqadda iyo hiddaha dhaqanka.<br><br>b. Wuxuu ku soo daraa luqad ahaan iyo dhaqan ahaanba fursadaha warqabka ah ee carruurta ku hadasha luqadaha badan si ay u galaan macne samaynta iyo waxqabadyada ku salaysan su'aalaha inta lagu jiro manhajka iyo barnaamijka.¬ |

## K. Wuxuu aqoonsadaa ujeedada laga leeyahay luqadda la isticmaalo inta lagu jiro hawlaha joogtada ah iyo waayo-aragnimada waxbarasho

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| X.K.1 | Wuxuu u fiirsadaa si uu u aqoonsado ujeedada laga leeyahay luqadda la isticmaalo inta lagu jiro isdhexgalka, jadwalada joogtada ah, iyo waayo-aragnimada barashada | Wuxuu go'aamiyaa ujeedada laga leeyahay luqadda la isticmaalo inta lagu jiro qaar ka mid ah isdhexgalka, jadwalada joogtada ah, iyo waayo-aragnimada barashada | Wuxuu naqshadeeyaa isdhexgalka luqadda si loo siiyo carruurta ku hadasha luqadaha badan ujeeddooyin kala duwan oo loogu talagalay ku isticmaalka luqadda hawlo kala duwan iyo waaya-aragnimada waxbarasho |

**Carruurtu waxay u isticmaalaan luqadda ujeedooyin kala duwan.** Marka aynu ka hadlayno ujeedada luqadda, waxaynu ula jeednaa waxa carruurtu ay ku sameeyaan luqadda. WIDA waxay aqoonsay saddex adeegsi oo fure u ah luqadda ee goobaha daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada hore: Ismuujinta/Sheegashada Nafeed, Dib-u-eegis/Xasuusasho, iyo Weydiin (WIDA, 2016). Iyadoo la eegayo sida carruurtu u isticmaalaan luqadda inta lagu jiro hawlaha caadiga ah, isdhexgalka bulshada, iyo hawlaha waxbarashada, barayaashu waxay qorsheyn karaan siyaabaha lagu siinayo carruurta fursado ay ku ballaariyaan ku dhaqanka luqaddooda iyo siyaabo kala duwan ee ay u isticmaalaan luqadda.

## L. Wuxuu u qorsheeyaa baridda iyo barashada luqadda meelo gaar ah oo horumarinta iyo waxbarashada ah

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| X.L.1 | Wuxuu soo ururiyaa habab kala duwan si uu u fududeeyo isticmaalka luqadda ee carruurta luqadaha badan ku hadasha iyo isdhexgalka luqadda ee meelaha cayiman ah ee horumarka iyo waxbarashada | Wuxuu wax baraa isaga oo adeegsanaya xeelado kala duwan si loo fududeeyo isticmaalka luqadda ee carruurta luqadaha badan ku hadasha iyo isdhexgalka luqadda ee meelaha cayiman ah ee horumarka iyo waxbarashada | Wuxuu ku tababaraa dadka kale xeelado kala duwan si loo fududeeyo isticmaalka luqadda ee carruurta luqadaha badan ku hadasha iyo isdhexgalka luqadda ee meelaha cayiman ah ee horumarka iyo waxbarashada |

## M. Wuxuu isticmaal taageerooyinka luqadda si ay u caawiyaan istaajinta horumarinta iyo barashada luqadda

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| X.M.1 | Wuxuu raacaa tilmaamaha dadka kale ee waaweyn si uu u diyaariyo agabyo kala duwan oo loo isticmaali karo in lagu taageero isticmaalka luqadda iyo macno samaynta carruurta ku hadaasha luqadaha badan ¬ | Wuxuu hirgeliyaa oo fududeeyaa carruurta ku hadasha luqadaha badan in ay isticmaalaan agab kala duwan si ay u taageeraan isticmaalkooda luqadda iyo samaynta macnaha | Wuxuu ku taliyaa oo ay ku tababaraa dadka kale sida loo dhiirigaliyo loona fududeeyo carruurta ku hadasha luqadaha badan in ay isticmaalaan agab kala duwan si ay u taageeraan isticmaalkooda luqadda iyo macno samayntooda¬ |

## N. Wuxuu bixiyaa fursado badan oo macno leh oo loogu talagalay carruurta ku hadasha luqadaha badan si ay u isticmaalaan luqadahooda

| Furaha | Heerka 1: Wuu Daahfuraa | Heerka 2: Wuu Hirgeliyaa | Heerka 3: Wuu Qaabeeyaa oo Hogaamiyaa |
|---|---|---|---|
| X.N.1 | Wuxuu indha-indhayn ku sameeyaa in dhammaan heerarka horumarinta luqadda, carruurta ku hadasha luqadaha badan ay u adeegsan doonaan ku dhaqanka ururka luqadeed marka ay dhexdhexaadinayaan fahamka, samaynta macnaha, iyo muujinta aqoonta | a. Wuxuu tusaaleeyaa qiimeeyaa/muhiimad siiyaa dhammaan isticmaalka ururka luqadeed ee carruurta ku hadasha luqadaha badan<br>b. Wuxuu bixiyaa fursado badan oo macne leh oo loogu talagalay carruurta ku hadasha luqadaha badan si ay u adeegsadaan ku dhaqanka ururka luqadeed marka ay dhexdhexaadinayaan fahamka, samaynta macnaha, iyo muujinta aqoonta | Wuxuu u doodaa qiimaynta nidaamka barnaamijka iyo hirgelinta manhaj mudnaanta siinaya horumarinta fursado badan oo macne leh oo loogu talagalay carruurta si ay u adeegsadaan ku dhaqanka ururkooda luqadeed marka ay dhexdhexaadinayaan fahamka, samaynta macnaha, iyo muujinta aqoonta |

**Ururka luqadeed (Linguistic repertoire) waxaa loola jeedaa dhammaan noocyada luqadda uu ilmuhu la kulmay oo uu baranayo.** Ilmaha Ingiriisiga kaliya loo soo bandhigay ayaa wuxuu yeelan doona urur luqadeed oo ka kooban siyaabo kala duwan oo qoyskooda iyo bulshadoodu ay u isticmaalaan Ingiriisiga. Sidoo kale, ilmaha loo soo bandhigay wax ka badan hal luqad ayaa wuxuu yeelan doona urur luqadeed oo ka kooban siyaabo kala duwan oo qoyskooda iyo bulshadoodu ay u isticmaalaan dhammaan luqadahooda.

# Eraybixinta

**Khibradaha Carruurnimada ee Xun:** Waayo-aragnimada carruurnimo ee xun (ACE) waxay qeexaysaa waayo-aragnimada naxdinta leh ee nolosha qofka ee ku dhacda kahor da'da 18 jir ee qofku xasuusto isaga oo qaangaaray oo ay ku jiraan: xadgudub jireed, xadgudub galmo, aflagaado, jirro maskaxeed oo xubin qoys ah, khamri cabka dhibka leh ama khamri cabkaa xubin qoyska ah, isticmaaalkaa daroogaga waddada oo sharci darro ah ama isticmaalka daroogada ee xubin qoyska ka mid ah, furiinka ama kala tagga waalidka, rabshadaha qoyska ee ku wajahan waalid, iyo xiritaan xubin qoyska ka mid ah.

**U doode:** Qaadista tallaabo iyo/ama bixinta taageerada dadweynaha iyadoo ku hadlaya magaca dadka kale, gaar ahaan, kuwa ka socda bulshooyinka ama kooxaha ay la kulmay takoorid iyo/ama cadaadis.

**Xusuus qor kooban:** Qoraallo gaagaaban oo la qoro inta lagu jiro ama ka dib cashar/waayo-aragnimo ardaydu u shaqeeyaan kooxo ahaan ama si gooni ah.

**Hababka wajahidda Waxbarashada:** dabeecadda, dhaqanka iyo qaababka barasho ee carruurtu u isticmaalaan xaaladaha bulshada iyo marka ay baranayaan macluumaad cusub.

**Heshiisyada Aqoonta (Articulation Agreements):** Heshiis rasmi ah oo u dhexeeya laba machad oo tacliinta sare ah kaas oo ogolaanaya buundooyinka lagu kasbado kulliyadda bulshada in loo wareejiyo kulliyad ama jaamacad afar sano ah.

**Qiimaynta:** Uruurinta xogta ilmaha iyadoo loo marayo habab kala duwan, sida baaritaanka: xallinta mushkiladaha diiradda la saaraya, sharraxaadda meelaha ay ku wanaagsan yihiin iyo meelaha ay liitaan, u fiirsashada, tijaabinta, ama la socodka horumarka, si loo gaaro go'aanno waxbarid oo warqab ah. Xusuusin: Qiimayntu waxay khusaysaa xog ururinta.

**Ku xiriirsanaan:** Xiriir adag oo shucuureed oo u dhexeeya ilmaha (dhallaanka, socod baradka iyo wixii ka dambeeya) iyo qof weyn oo daryeela oo qayb ka ah nolol maalmeedka ilmaha. Marka xiriir sugan lagu sameeyo muddo, ilmuhu wuxuu door bidaa oo ku tiirsan yahay xiriirka uu la leeyahay qofka weyn. Ilmuhu waxa uu qofkaas u isticmaalaa in uu u yahay saldhig ammaan ah oo uu ka sahamiyo iyo in uu u yahay isha ammaanka iyo raaxada marka loo baahdo.

**Sifo:** Tayada, sifada ama astaamaha uu leeyahay shay ama qof. Wax aad oran karto wuu leeyahay (sida cabbirka ama midabka).

**Tusaale:** Sifooyinka eyga waxaa ka mid ah dhererka, xawaaraha iyo midabka.

**Horumar/korriin aah caadi ahayn:** Hab dhaqan ama xirfad ayaa waxay u horumartaa si ka duwan kan facooda (taas oo ka baxsan heerka caadiga ah ama heerka la filayo).

**Qiimayn Dhab ah:** Dhaqannada qiimaynta ee ku salaysan waayo-aragnimada waxbarasho ee maalinlaha ah, ee bixiya waxqabad dhab ah oo loo sameeyo ilmo, oo ka qaybgeliya carruurta habka qiimaynta (McAfee, 2004).

**Dhaqamada ugu Wanaagsan:** Xeeladaha, hababka, farsamooyinka iyo halbeegyada tayada sare, korriinka ku habboon, barnaamijyada carruurnimada hore iyo isdhexgalka kuwaas oo ku salaysan aqoonta hadda jirta iyo caqiidada la wadaago oo si joogto ah u muujiya natiijooyin ka sarreeya hababka iyo xeeladaha kale.

**Eexda/qof jeclaysiga:** Waxa ay tilmaamaysaa eexda cad iyo midda qarsoon labadaba; mawqifyada ama fikradaha qaldan ee u xaglinaya ama ka soo horjeeda koox(kooxo) oo laga doorbido kuwo kale.

**Daryeel bixiye:** Qof kasta oo weyn oo daryeel siiya ilmo yar.

**Bartame ahaanshaha Dhaqanka:** Doorka guud ee la wadaago ee nidaamyada caqiidada - siyaabaha garashada, samaynta, iyo ahaanshuhu - ay ka qaataan fahamka aduunka iyo meesha aynu ku leenahay. Nidaamyadan caqiidadu waxay saameeyaan sida aan ula falgalno, qiimeynteena, iyo waxyaabaha aan mudnaanta siino.

**Xarunta Daryeelka Carruurta:** Ganacsiyada xanaaneeya oo wax ku bara carruurta yaryar meel ka baxsan goobta guriga: Xarunta daryeelka carruurta ama xarumaha horumarinta, barnaamijyada maalin-buuxa ama qayb-maalintii ah.

**Barnaamijka Cuntada Daryeelka Dadka Waaweyn (CACFP):** Barnaamij ay maalgaliso dawlada dhexe oo ka caawiya barnaamijyada caruurnimada hore qorshaynta iyo bixinta cunto nafaqo leh iyo cuntooyinka fudud oo la siiyo caruurta.

**Waayo-aragnimada/khibradaha kiliinikada:** Ku meelaynta ardayda shahaadada koowaad ee jaamacadda waayo-aragnimada goobta (diirad saarid meel khaas ah oo hal dhinac oo fasalka ah ama barshada ah) iyo waxbaridda ardayda (dhexgelinta dhammaan dhinacyada waxbaridda) si ay khibrad uga helaan goobta fasalka.

**Luqad Bedelaada (code-switching):** "ku isticmaalka qaybo ka yimid laba luqadood odhaahda hal hadal oo isku mar ah ama isla hal qayb oo hadalka ah" (Paradis, Genesee, & Crago, 2011, p.88); Habka ugu badan ee carruurta yaryari ay isku daraan laba luqadood waa in ay jumlad ku bilaabaan hal luqad, ka dibna u beddeshaan mid kale.

**Wada shaqayn:** Dhammaan xubnaha kooxda oo u wada shaqaynaya ujeedo guud.

**Kartida:** Muujinta lahaanshaha xirfad ama karti. Kartida asaasiga ahi waxay tilmaamaysaa kartida looga baahan yahay waxqabasho muhiim u ah qofka in loo ogolaado in uu ka shaqeeyo xirfadaas shaqo, aqoon ama xirfado la arki karo oo la cabbiri karo. Aqoonta iyo xirfaddu waa inay kala soocaan hawl-wadeennada gudashada sare (ama waxqabadka ku dayashada leh) iyo kuwa kale.

**U hogaansanaanta:** U hogaansanaanta xeerarka iyo sharciyada, u dhaqmida si waafaqsan sharciyada.

**Wadaag bulsheed, Ku tiirsanaan, iyo Madaxbanaani:** Xirfado joogto ah oo u dhexeeya la wadaaga qof kasta oo ka tirsan kooxda (wadaaga bulsheed), isla wadaagga xubnaha qaar ka mid ah ka dhexeeya (isku-tiirsanaanta), in qofku keligii shaqeeyo (madaxbanaani).

**Qarsoodi ahaanta (Asturnaanta Xogta):** Ilaalinta xogta la ururiyay ama laga hayo shakhsiga, iyadoo la raacayo xeerka asturnaanta macluumaadka ee xirfadlaha lagula xisaabtamo (sida, FERPA, HIPAA, Xeerka Asturnaanta Macluumaadka ee Minnesota).

Xogta uu maamulo sharciga gobolka ee lagu sifeeyay wax aan ahayn in tahay xog dadweynaha u furan waxaa loo kala saaraa mid ka mid ah siyaabaha soo socda:

- Mid gaar loo leeyahay: xogta tilmaamaysa shakhsi oo uu heli karo qofka keliya ama lagu heli karo ogolaanshaha qofka (Minn. Stat. §13.02, subd. 12).
- Qarsoodi ah: xogta tilmaamaysa shakhsi oo uuna heli karin cid ka baxsan cidda xogta haysa, oo uu ku jiro shakhsigu (Minn. Stat. § 13.02, subd. 3).

**Nuxurka/mawduuca Aagga:** Qaybaha loo isticmaalo in lagu abaabulo loogana hadlo tiro badan oo macluumaad ah (sida, waxbarasho). Mawduuc kastaa wuxuu leedayay saldhig aqooneed iyo xeelado loogu talagalay in wax lagu baro.

**Horumarin joogto ah:** Dadaal socda oo lagu horumarinayo xeeladaha, xirfadaha, hababka iyo barnaamijyada.

**Lamaanaha la maaraynta isxakamaynta:** Doorka muhiimka ah ee ay daryeelayaashu u ciyaaraan dhallaanka iyo carruurta yaryar si ay u bixiyaan amniga cilaaqaadka iyo xeelado ula kac ah si ay uga caawiyaan inay maareeyaan heerkooda kacsanaanta, taas oo ka caawisa inay u furnaadaan waxbarasho cusub.

**Qiyamka Muhiimka ah:** Qiyamka si qoto dheer loo aaminsan yahay oo la siiyo mudnaanta ugu sarraysa.

**Dhibco ku salaysan (Credit-based):** Koorso ama tababar lagu helayo "dhibco" ama cutub qiimo ah. Dhibcaha waxaa lagu bixiyaa heerka adkaanshaha ama shuruudaha wakhtiga ee koorsada tacliinta ee laga qaato machad waxbarasho, sida kulliyadaha iyo jaamacadaha laba sano iyo afar sano ah.

**Dhaqamadu wadaagaan:** Fikradaha, qiyamka, ama hab dhaqamada la wadaago ama ay isla fahmaan laba ama in ka badan oo koox dhaqameed ah.

**U hogaansanaanta:** u hogaansanaanta sharciyada, xeerarka, halbeegyada ama qawaaniinta khuseeya.

**Hiddaha Dhaqanka:** Caqiidooyinka, hab dhaqamada, iyo caadooyinka qoomiyad, koox diin ama koox bulsho.

**Dhaqanka Hiddaha Dhaqanka:** Dhaqan ama caado dhaqameed qawmiyad gaar ah ama koox dhaqameed kale.

**Isku Xirka Dhaqanka iyo Bulsho:** siyaabaha ay dadku isugu xiran yihiin. Waxay noqon karaan deegaan juqraafi, tusaale ahaan dadka ku nool meel isu dhow. Waxay sidoo kale noqon karaan xiriir ka dhexeeya dadka wadaaga dano xooggan, qaab nololeed gaar ah, ama hiddo gaar ah. Shabakadahani waxay noqon karaan maxali, gobol/deegaan, qaran iyo/ama mid caalami ah.

**Urur Dhaqan ahaan la mid ah:** Urur si ballaaran u wadaaga aragtida adduunka, malo-awaalka, iyo qiyamka ka qaybgalayaasha oo hoggaamintooda iyo shaqaalahoodu ay ka tarjumayaan hiddadaha dhaqanka. Urur dhaqan ahaan taageero bixiya waa mid ka tarjuma oo xaqiijiya ka qaybgalaha aragtidiisa adduunka, malo-awaalka, iyo qiyamka, oo ay ku jiraan hoggaan aqoon leh iyo shaqaalaha safka hore.

**Dhaqan salka ku haysa/ku xiriirsan:** In lagu saleeyo qaab gaar ah oo loo arko adduunka si waafaqsan fikradaha iyo qiyamka qofka dadkiisa.

**Dhaqan ahaan gaar ah:** Fikradaha, caqiidooyinka, iyo hab dhaqamada aadka muhiim ugu ah koox dhaqameed gaar ah, laakiin laga yaabo in aanay muhiim u ahayn ama xitaa aysan aqoonsanayn dadka kale. Fikradahan asaasiga ah, caqiidooyinka, iyo dhaqamada ayaa waxay noqon karaan albaabbada barashada ee carruurta iyo buundooyinka in la fahmo qoysaska iyo bulshada.

**Manhajka:** Waa qaab habaysan oo qeexaya nuxurka ay tahay inay carruurtu bartaan, hababka ay carruurtu ku gaaraan himilooyinka la aqoonsaday, waxa ay macallimiintu sameeyaan si ay carruurta uga caawiyaan inay gaaraan yoolalkan, iyo macnaha guud ee barida iyo waxbarashadu ku dhacdaan (Rosegrant, 1992).

Qeexida Parent Aware ee manhaj waa xirmo qalab qoran ah oo ay isticmaalaan daryeel-bixiyeyaasha/barayaasha caruurnimada hore si ay u horumariyaan waayo-aragnimada waxbarasho oo hawlgelin leh oo loogu talagalay carruurta yaryar.

**Horumarka:** Horumarku waa geedi socod adag oo isbedbedalaya oo lagu garto xilliyo habacsanaan iyo korriin ah (la xiriira taabbo galka maskaxda) waxayna dhacdaa iyada oo loo marayo taxane la qabsiyada waayo-aragnimada shakhsiyeed ah.

**Marxaladda korriinka:** Waa xilliga horumarka ee ay sifooyin ama awoodo gaar ahi ay guud ahaan soo muuqdaan, mararka qaarkoodna loo yaqaanno horumarro.

**Hab dhaqanka Koriinka Ku Haboon (DAP):** Isticmaalka xeeladaha waxbaridda ee ku salaysan aqoonta sida carruurta yaryar u koraan oo wax u bartaan, waxa ilma kasta ka dhigaya mid kuwa kale ka geddisan, iyo bulshada iyo dhaqanka qoyska iyo luqadda guriga ee ilmaha. Hawlaha DAP maaha kuwo aad u adag ama aad u fudud, laakiin waa kuwo ku habboon (Growing Glossary of Early Childhood Terms).

**Farsamo lahaansho:** Xirfadda isticmaalka gacmaha si loo maareeyo walxaha.

**Lahjad:** Waxa loola jeedaa "... kala duwanaanta luqadda ay sameeyaan dadka ku hadlaa marka ay koraan oo ay la falgalaan bulshooyinka ku salaysan deegaan juqraafi, jinsiyadda, koox, qowmiyadda, ama calaamadaha kale oo aqoonsi." (Finegan & Rickford, 2004; Hudley & Mallinson, 2011; Valdes et al., 2005 in Bunch, 2013, p. 303)

**Naafanimada:** Fadlan tixraac goobta ku habboon si aad u hubiso inaad isticmaalayso qeexida cayiman ee xaaladaada gaarka ah:

- ADA Qoraalka hadda ee Xeerka Maraykanka Naafanimada leh ee 1990 oo ay ku daraya isbeddelada lagu sameeyay Xeerka Waxka bedelka ADA ee 2008 (http://www.ada.gov/pubs/adastatute08.htm#12102)
- Head Start: Iyada oo loo marayo Xarunta Waxbarashada Carruurnimada Hore iyo Xarunta Aqoonta (ECLKC): Section 637 (http://eclkc.ohs.acf.hhs.gov/hslc/standards/Head%20Start%20Act#641-c)
- Qaybta C (Dhalashada ilaa 2) §303.21 Infant or toddler with a disability (http://www.ecfr.gov/cgi-bin/text-idx?c=ecfr&SID=07769158a96f85d5ac1abd0eb7fdd1e3&rgn=div8&view=text&node=34:2.1.1.1.2.1.102.21&idno=34)
- Qaybta B (3 ilaa fasalka Kindergarten) IDEA 2004 Statute: TITLE I / A / 602 / 3 (http://idea.ed.gov/explore/view/p/%2Croot%2Cstatute%2CI%2CA%2C602%2C3%2C)
- Khaas u ah Minnesota (https://www.revisor.mn.gov/statutes/?id=125A.02)

**Dabeecadda:** Dareenka caadiga ah, niyadda ama u janjeedhida; dhismaha dabeecadda; iyo sida ay macquul u tahay in uu qofku si cayiman u dhaqmo oo ay keenayaan duruufaha jira ee niyadda caadiga ah ama dabeecadaha qofka ee ku aaddan nolosha.

**Fikirka Duwan:** Fikirka hal-abuurka leh ee abuura xalal cusub oo asal u ah dhibaatooyinka.

**Kala duwanaanshaha:** Kala duwanaanshaha doorsoomayaasha tirakoobka, sida jinsiyadda, diinta, jinsiga, asalka qaran, naafanimada, luqadda lagu hadlo, heerka dhaqan-dhaqaale iyo asal meesha qfku ka yimid.

**Waaxda (Domain):** Meelaha ugu muhiimsan ee horumarka.

**Bartayaasha Labada Luqadood:** Carruurta barata luqadda qoyskooda iyo sidoo kale luqadda bulsho weynta labadaba.

**Bare:** Waa qof qaangaadh ah oo mas'uul ka ah bixinta taageero waxbarasho iyo mid shucuureed oo la siiyo carruurta ku jirta goobta daryeelka iyo waxbarashada; waxaa ka mid ah dadka la macaamila carruurta ku jirta barnaamijyada iskuulka ku salaysan, Head Start, preschool-ka, iyo xarumaha daryeelka carruurta.

**Cimilada Dareenka Shucuurta:** Dareenka la xiriira isdhexgalka rasmiga ah iyo ka aan rasmiga ahayn, jawaabaha dabeecada, iyo diiranaanta, ku raaxaysiga iyo ixtiraamka la muujo. Tayada isdhexgalka bulsheed iyo shucuureed ee u dhexeeya carruurta iyo dadka waaweyni waxay noqon kartaa mid togan iyo/ama xun.

**Bartaha Ingiriisiga:** Isticmaalka ama barashada Ingiriisiga ee qof leh af hooyo oo aan Ingiriisi ahayn.

**Anshaxa:** Barashada saxa iyo khaladka, mas'uuliyada iyo waajibaadka.

**Haqamada iskaashiga sinaanta iyo hiddaha dhaqanka iyo luqadda warqabka u ah:** Hab dhaqamada hubinaya in a) ka qaybqaadashada iyo wada shaqaynta qoysaska ku hadla luqadaha badan b) ka qaybgalka qoysaska luqadaha badan ku hadla in uu yahay mid ku habboon iyo c) In xuquuqaha qoysaska luqadaha badan ku hadla inay si macno leh ugala shaqeeyaan barayaasha carruurnimada hore iyo shaqaalaha waxa ku saabsan horumarka luqada iyo waxbarashada carruurtooda in la taageero.

**Qiimayn:**

- **Guud:** Miisaanka caddaynta si loo go'aan qaato. Qiimayntu waxay ku saabsanaan kartaa nidaamyada, barnaamijyada iyo dadka.
- **Qiimaynta barnaamijka:** Habka uu barnaamijku ku cabbiro waxtarka iyo natiijooyinka iyadoo lagu salaynayo jaangooyooyin la dejiyey inta lagu jiro hirgelinta hawlaha barnaamijka.
- **Qiimaynta Ardayga (isticmaalka ugu badan ee erayga):** Habka ay ilmaha ku qiimeeyaan koox takhasusyo kala duwan leh meelaha baahida ee lagu aqoonsaday baarintaanka carruurnimada hore, si loo go'aamiyo u-qalmitaanka ilmaha ee adeegyada waxbarashada gaarka ah.

**Dhaqamada Caddaynta Ku Salaysan:** Faragelin/wax ka qabasho, xeelad ama qayb ka mid ah waxbarista oo la xaqiijiyay, iyada oo loo marayo cilmi-baaris xog ku salaysan, si ay u noqoto mid wax ku ool ah oo lagu wanaajiyo natiijooyinka shakhsiyaadka marka dhaqanka lagu fuliyo si daacadnimo loo raacayo (sida, sida saxda ah ee hab dhaqanka ama faragelinta loogu talagalay in loo fuliyo).

**Shaqaynta Garaadka:** Xirfadaha garashada ee ka caawiya qofka inuu gaaro yoolalka. Shaqaynta Garaadka waxaa ka mid ah awoodda: maaraynta wakhtiga iyo dareenka, beddelashada diirad saaridda, qorshaynta iyo habaynta, xusuusta faahfaahinta, xakamaynta hadalka ama dhaqanka aan habboonayn, iyo isku-dhafka waaya-aragnimada hore iyo ficil hadda jira.

**Qoysaska:** Waxaa ku jira waalidiinta, mas'uuliyiinta, walaalaha, awoow/ayeeyada, xubnaha qoyska ee korinta ku meel gaarka ah, iyo dadka kale ee ku lug leh daryeelka iyo waxbarashada ilmaha

**Daryeelka Caruurta Qoyska:** Ku daryeelka iyo waxbarashada ilmaha goob ah guri ka baxsan guriga ilmaha oo joogto ah, qayb uun ka midah 24-ka saac.

**Cuntada Qaabka Qoyska:** Adeegga cuntada ee qaabka qoyska macnihiisu waa in cuntada lagu qaybiyo baaquli ama suxuun miiska saaran; carruurta waxaa lagu dhiirigeliyaa inay naftooda u adeegaan, ama naftooda u adeegaan iyagoo caawimo ka helaya qof weyn.

**Daacadnimo:** U hirgelinta wax ka qabashada, barnaamijka, manhajka ama qiimeynta qaabkii ay ugu talagaleen dadka soo sameeyey si loo gaaro natiijooyinka la rabo.

**Waayo-aragnimada goobta:** Waa hab lagu isku darayo daraasaadka akadeemiyadda iyo xilliyada shaqada ama waayo-aragnimada iskaa-wax-u-qabso ah ee la xiriirta goobta waxbarashada. Ardaydu waxay wax ku bartaan iyagoo samaynaya mashruucyo adduunka dhabta ah oo si dhow loola socdo.

**Qiimaynta qaabaynta:** Habka ay adeegsadaan macalimiinta iyo ardaydu inta lagu guda jiro waxbarida taas oo bixinaysa rayi celin si loo hagaajiyo waxbarida iyo waxbarashada socota si loo horumariyo guusha ardayda iyo natiijooyinka laga rabay (Sarkaal, 2008).

**Hagitaan:** Habka lagu hago, saxo oo loogula bulsheeyo dhexgalka carruurta siyaabo ka caawinaya inay horumariyaan is-xakamaynta, sameeyaan doorashooyin fikir leh, oo ay qaadaan mas'uuliyadda ficilkooda. Habkani waxa uu diiradda saarayaa in la baro carruurta waxa ay tahay in ay sameeyaan halkii la bari lahaa waxa ay tahay in aan la samayn.

**Head Start:** Barnaamij horumarineed oo dhameystiran oo federaalKu maalgeliyo oo u adeega carruurta da'doodu u dhaxayso 0-5 sano, haweenka uurka leh, iyo qoysaskooda. Waa barnaamij diirada saaraya ilmaha oo hadafkiisu yahay in la kordhiyo diyaargarowga iskuulka ee carruurta yaryar ee qoysaska dakhligoodu hooseeyo.

**Dhaawaca Masiibada ee Sooyaalka ah:** Heerar kala duwan oo dhaawacyada jireed, shucuureed, maskaxeed, iyo dhaqaale ah ee jiilalka koox dad ah oo dhan loo geysto, iyadoo lagu salaynayo aqoonsigooda, ee ka muuqata

xubnaha dadka kooxdaas.

**Fulin:** In la dhaqan geliyo iyo/ama la fuliyo.

**Ku darida:** Siyaasadaha, nidaamyada iyo aaminsanaanta in dhammaan carruurta lagu daro goobaha carruurnimada hore, oo ay ku jiraan kuwa leh dib u dhac koritaan ama naafonimo; carruurta hibada iyo kartida leh; carruurta ay qoysaskoodu dhaqan ahaan iyo luqad ahaanba ku kala duwan yihiin; iyo carruurta ka socota dhammaan kooxaha dhaqan-dhaqaale.

**Barnaamijka Waxbarashada Shakhsiyeed:** Qorshe ama hage si sannadle ah dib loo eego oo loogu talagalay in wax lagu baro ardayga naafada ah, faahfaahinaya heerka kasbashada ee hadda, yoolalka iyo xeeladaha, oo ay dejiyaan macallimiinta, waalidiinta, takhasusayaasha iyo marka ay habboon tahay, ardaygu.

**Qorshayaasha Adeega Qoyska ee Shakhsiyeed:** Dukumeenti qoran oo lagu qeexay Sharciga Waxbarashada Shaqsiyaadka Naafada ah (IDEA) si uu u hago hirgelinta adeegyada wax ka qabashada hore ee carruurta laga bilaabo dhalashada ilaa da'da saddex jir iyo qoysaskooda. Waxa lagu abuuray wada-hadal iskaashi dhexmaray qoysaska iyo xirfadlayaasha ku hawlan qiimaynta iyo bixinta adeega.

**Ku habboonaysiinta Shakhsiga:** soo qaadashada ama beddelka hawlaha si looga jawaabo danaha iyo qaababka waxbarasho ee ilmaha.

**Cudur la is Qaadsiiyo:** Waa cudur ama xaalad ay keenaan noolaha sida bakteeriyada, fayrasyada, fangaska ama dulinnada kuwaas oo gala kuna kora jirka dhexdiisa.

**Qorshayaasha Wax ka Qabashada Shakhsiyeed ee Hay'adaha u Dhexeeya:** Qorshe qoran oo qeexaya barnaamijyada iyo adeegyada ay heli karaan carruurta naafada ah ee u qalanta ee da'doodu u dhaxayso 3 ilaa 21.

**Kaabayaasha:** Xeerarka, habka, xarumaha, iyo adeegyada looga baahan yahay si uu u shaqeeyo nidaam ama urur.

**Adeega/shaqada ku jira:** Tababarka loogu talagalay dadka horayba shaqaalaha u ahaa.

**Hababka ama Xeeladaha waxbarida:** Xeeladaha iyo farsamooyinka loo doortay waxtarkooda in ay caawiyaan ardaygu inuu barto fikrad gaar ah.

**Waxbaris ula kac ah:** Waxbaris leh ujeeddo cad oo tixgelisa habka ugu wanaagsan ee kor loogu qaadayo korriinka carruurta (carruurtu hagto, qaan-gaarku hago, ama isku darka labadaba).

**Wax ku Barashad Dhaqdhaqaaqa (Kinesthetic Learning):** Hab-waxbarasho oo ardaygu uu si fiican wax ugu barto dhaqdhaqaaqa jireed iyo qabashada.

**Barashada Luqadda:** Awoodda saarka iyo sidoo kale fahamka luqadda si loola xiriiro dadka kale.

**Adeegsiga Luqadda:** Siyaabaha ay carruurtu u isticmaalaan luqadda si ay macno u sameeyaan. Sida ilmuhu u isticmaalo luqaddu way kala duwanaan doontaa iyadoo ku xiran luqadda iyo dhaqanka ay yaqaanaan, aqoonsigooda, iyo meesha, cidda, sida, iyo sababta ay u isticmaalayaan luqadda.

**Ka qaybgalinta Qoyska ee Luqadda Diirada-saaraysa:** Waxay ilaalisaa baahiyaha gaarka ah iyo waaya-aragnimada carruurta ku hadasha luqadaha badan iyo qoysaskooda, oo ay ku jirto horumarinta luqadda, oo udub dhexaad ugu noqota goob kasta oo ah guriga iyo daryeelka carruurta iyo goobta daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada hore. Waxay xisaabta ku daraysaa tixgalinta muhiimka ah ee lagu qeexay WIDA ABCs ee Ka qaybgalinta Qoyska; waxay qiimaysaa oo ay xaqiijisaa dhaqamada iyo hadafyada luqadaha qoyska; waxay si macne leh ugu gudbisaa macluumaadka ku saabsan barnaamijyada ku salaysan guriga-, xarunta-, iyo barnaamijyada luqadda iskuulka ku salaysan, hab dhaqanka iyo yoolalka; waxayna ku salaysan tahay xaqiijinta, hab waxa lagu xoogganyahay ku salaysan.

**Qorshaha Casharka:** Tilmaamaha casharka oo ay ka mid yihiin hadaf (waxa uu macallinku rabo in carruurtu

bartaan), hababka loo marayo si loo gaaro yoolkan (qaabka casharka), iyo sida uu macallinku u cabbirayo in hadafkii la gaaray (muujinta fahamka).

**Ururka luqadeed (Linguistic repertoire):** Dhammaan noocyada luqadda ee ay ilmuhu la kulmay oo uu baranayo

**Akhris-qoraalka:** Kartida wax akhrinta iyo qoraalka.

**Xisaabta:** Barashada fikradaha tirada iyo xisaabinta, qaababka iyo xiriirka, xiriirada cabbirka meelaha, cabbirka iyo sababaynta.

**Macne samaynta:** Waa hab si firfircoon loogu isticmaalo khayraadka/alaabta qofku haysto si uu u sameeyo macnaha fikradaha, ifafaalaha xaaladaha jira, aragtida, khibradaha, ama xaaladaha. Carruurtu waxay isticmaalaan luqadda si ay macno u sameeyaan.

**Halka uu marayo horumarku (Milestones):** Karti ama xirfad ay carruurta badankoodu ku gaaraan da' gaar ah.

**Carruurta luqadaha badan ku hadasha:** Carruurta kala duwan dhaqan iyo afba, da'dooduna u dhaxayso dhalasho ilaa shan sano, kuwaas oo baranaya laba ama in ka badan luqado ah. Carruurta ku hadasha luqadaha badan waxay kula kulmaan afaf badan guryahooda, bulshooyinkooda, iyo/ama goobaha daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada hore, waxayna u horumariyaan oo u isticmaalaan luqadda siyaabo isbedbedalaya. Gudaha xirfadan shaqo, carruurtan waxaa badanaa loogu yeeraa bartayaasha labada luqadood, ama DLLs.

**Tababbarka Aan Dhibcaha ku salaysnayn ama Tababarka Aan Dhibcaha lahayn (Non-credit Based or Not-for-Credit Training):** Tababarka uuna qofku ku helin buundooyinka kuleejka.

**U fiirsasho/indha-indhayn:** Waa hab ay adeegsadaan barayaasha carruurnimada hore si ay u daawadaan, u dhegaystaan, oo ay u duubaan ficillada carruurta, muujinta dareenka-shucuurta wejiga, luqadda jirka, dhawaaqyada, erayada, iyo midaarka. Barayaashu waxay u isticmaalaan macluumaadka si ay u bartaan ilmaha iyo xirfadahooda oo ay u qorsheeyaan siyaabo lagu taageero laguna xoojiyo korriinka xirfadda ilmaha.

**Adeegyada Carruurnimada Hore ee Kale:** Ujeeddooyinka dukumeentigan, tani waxay tixraacaysaa xirfadlayaasha kala takhasusyo duwan ee la shaqeeya carruurta yaryar, qoysaskooda iyo daryeel bixiyayaasha, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn bixiyeyaasha daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada hore, adeegyada ilaalinta ammaanka carruurta, faragelinta/waxka qabashada dib u dhaca carruurnimada hore, booqashada guriga. , bixiyayaasha daryeelka caafimaadka maskaxda iyo jirka. Xirfadaha Dareenka: Xirfadaha u baahan iskuduwidda garashada, dareenka iyo awoodaha dhaqdhaqaaqa muruqyada si uu qofku ula falgalo deegaankiisa.

**Farriinta Dhaqanka oo Togan:** Waxay kor u qaadaa qiyamka iyo xirfadaha bulshada dhexdeeda la jecelyahay ah.

**Tababarada shaqo ee ardayda jaamacada (Practicum):** Waayo-aragnimada goobta shaqada ee uu qofku caawiyo, u fiirsado, ama uu leeyahay masuuliyado xaddidan. Guud ahaan waa wakhti dhiman iyo muddo wakhti gaaban.

**In la Saadaalin karo:** In la saadaalin karo, oo ay weheliso in la xakamayn karo iyo taageerada bulshada, ayaa loo aqoonsaday inay gacan ka geystaan maaraynta jawaabta maskaxda ee welwelka. (Preventing Child Abuse & Neglect, 2006). Siinta dhallaanka iyo socod baradka hab-nololeedka la saadaalin karo, luqadda iyo deegaan ayaa ah xeelado muhiim ah oo lagu caawinayo carruurta inay yeeshaan dareenka ammaan iyo awoooda hanashada barasho

**Dugsiga hoose ka hor:** Da'da saddex ilaa gelitaanka dugsiga barbaarinta.

**Adeega Shaqaalaynta ka hor (Pre-service):** Tababarka iyo waxbarashada uu qofku qaato shaqada kahor.

**Daryeelka Aasaasiga ah:** Daryeelka Aasaasiga ah, ilmo dhallaanka/socod barad kasta waxaa lagu meeleeyaa hal macalin oo gaar ah oo mas'uul ka ah daryeelka ilmahaas.

**proprioception (Dareenta meelaynta jirka iyo dhaqaaqyada):** Maclumaadka dareenka ee ku saabsan booska, dhaqdhaqaaqa iyo dheellitirka ee u ogolaanaya qofka inuu xakameeyo gacmihiisa iyo lugihiisa isaga oo aan si toos ah u eegin.

**Daabacaad qani ku ah:** Deegaan waxbarasho oo siiya carruurta agabyo badan oo kala duwan oo ay wax ku akhriyaan iyo wax ku qoraan, iyo wakhtiga iyo fursadaha loogu isticmaalo ujeeddooyin maalmeed oo kala duwan oo dhab ah. Goobaha waxbarasho ee noocan oo kale ah waxaa ka mid ah buugaagta, majaladaha, iyo noocyada kale ee daabacaadda; calaamadaha iyo calaamadeeyaha lagu gudbiyo macluumaadka; iyo waraaqaha iyo qalabka wax lagu qoro ee laga helo qolka oo dhan.

**Kobcinta Xirfada:** Shakhsi ahaan waayo-aragnimada waxbarasho ee uu qofku ku hawlan yahay si uu u horumariyo, u kobciyo ama u dhiso aqoontooda iyo xirfadahooda oo uu ugu dabaqo aqoonta ficil ahaan. Waxaa ku jiri kara waayo-aragnimada waxbarasho sida shaqada koorsada, shirarka, fasallada tababarka ama khibradaha waxbarasho ee xiriirka ku saleysan sida hagitaan iyo tababarid.

Nidaamka- waxqabadyada waxbarasho, taageerooyinka iyo agab ee la heli karo si kor loogu qaado xirfadaha, aqoonta, iyo kartida xubnaha xirfada shaqo.

**Bartay/yaqaana:** Dhammeeyay ama karti u leh.

**Qodobbada Ilaalinta:** Shan arrimood oo ilaalin ah ayaa lagu taxay inay yihiin waxyaabaha ugu muhiimsan qoyska xooggan: adkeysiga waalidka, xiriirka bulshada, taageerada la taaban karo ee wakhtiyada baahida, aqoonta barbaarinta iyo korriinka ilmaha, iyo kartida bulsho iyo shucuureed ee carruurta.

**U gudbin u diris:** Ku talinta meel laga helo caawimaad, adeegyo ama macluumaad.

**Milicsi:** Inaad ka fikirto ficillada si aad u horumariso hab dhaqanka.

**Nidaamyada la Xiriira:** Taageerada qoyska, caafimaadka, iyo caafimaadka maskaxda.

**Xiriirka:** Waxay ku lug leedahay isku xirnaanta dareenka, waaraya muddo wakhti ah, ee leh macno khaas ah oo ka dhexeeya laba qof, wuxuu ku dhisan yahay kalsooni wuxuuna u abuuraa xasuus iyo rajooyin dadka ku lug leh.

**Cilmi-baaris ku salaysan:** Istaraatiijiyadaha wax-barida iyo maareynta ee lagu muujiyay cilmi-baaris in ay saamayn togan ku yeeshaan natiijooyinka ardayda.

**Adkeysiga:** Kartida looga gudbo dhibaatooyinka ama lagula qabsado xaaladaha adag ama isbeddelka.

**Daryeel Bixin Warqab ah:** Si degdeg ah ugu dhaqanka siyaabaha la xiriira waxa dhallaanka, socod baradka ama ilmaha yari kuu sheego, siyaabo ka caawinaya

iyaga baahidooda; waxay diiradda saartaa korriinka ilmaha ee dareenka fayo-qabka, ka mid ahaanshaha, sahaminta, wada hadalka/xiriirka.

**Badbaado u ah Hurdada:** Tallaabooyinka ka caawin kara ilmaha inuu si badbaado leh u seexdo oo yarayn kara khatarta Cilladaha Dhimashada Degdeg ah ee Dhallaanka (SUIDS) iyo sababaha kale ee hurdada la xiriira ee dhimashada dhallaanka.

Taageerid Taageerada dadka waaweyn ee la bixiyo inta lagu jiro habka waxbarashada ilmaha, mid si shakhsi ahaan loogu habboonaysiiyey heerka xirfada ilmaha iyo qaabka waxbarashada.

**Iskuulka Ku Salaysan:** Barnaamijyada Caruurnimada hore ee ay maamusho degmada iskuulku.

**Wakhtiga Shaashada:** Wakhtiga lagu qaato daawashada telefishinka ama isticmaalka kombayutarada, telefoonada iyo qalabka kale ee elegtarooniga ah ee madadaalada.

**Baaritaanka:** Nidaam baaritaan kooban, fudud oo loo isticmaalo in lagu aqoonsado dhibaatooyinka iman kara ee caafimaadka ama korriinka ee dhallaanka iyo carruurta yaryar ee u baahan kara qiimayn caafimaad, qiimayn ogaanshaha cudurka ama qiimayn waxbarasho.

**Dhaawaca Masiibada la isu gudbiyo/daalka naxariista:** Cadaadiska shucuureed ee ka dhasha marka uu qofku maqlo wax ku saabsan waaya-aragnimada naxdinta leh ee uu la kulmay qof kale. Calaamadeheedu waxay u egyihiin kuwa Cudurka murugada dhibka ka dib (PTSD). Sidaas si waafaqsan, shakhsiyaadka ay saamaysay dhaawaca masiibada ee la isu gudbiyo ayaa waxay isku arki karaan inay dib u soo laabteen dhaawaca masiibada shakhsiyeed ama ay ogaadaan kororka dareen kacsanaan ah iyo falcelinta iska fogaynta ah ee la xiriira soo-gaadhista dhaawaca masiibada ee aan tooska ahayn. Waxa kale oo laga yaabaa inay isku arkaan isbeddel ku yimaada xusuusta iyo aragtida; isbeddelka dareenkooda wax-ku-oolnimada; xaalufka khayraadka gaarka ah; iyo khalkhal ku yimaadda aragtidooda badbaadada, kalsoonida, iyo madaxbannaanida. (NCTSN.org)

**Qaybaha/waaxaha:** Daryeelka carruurta, Head Start/Early Head Start, preschool-ka Dadweynaha/Waxbarashada Hoose, iyo Faragelinta/wax ka qabashada Hore/Waxbarashada Gaarka ah.

**Wax ku barashada dareenka (Sensorimotor):** Waa xilliga koritaanka dhallaanka marka ay naftooda iyo adduunkooda wax kaga bartaan dareenkooda (tusaale, aragga, maqalka, taabashada) iyo dhaqdhaqaaqa jirka.

**Is-xakamaynta:** Kartida lagu dhaqmo iyadoo la ilaalinayo danta mustaqbalka fog iyo awoodda is dejinta ee marka la xanaaqo.

**isla-hadalka nafta:** Ilmuhu wuxuu isla hadlaa; faallooyinka uma jeedino qof kale.

Qof weyn ayaa ka hadla ficilkiisa, fikirkiisa ama dareenkiisa si uu luqadda ugu tusaalayn karo ilmaha; faallooyinka looma jeedinayo ilmaha.

**Goobaha:** Xarumaha, iskuulada iyo guryaha.

**Cilladaha Ilmaha la Ruxay (Shaken Baby Syndrome):** garaacid halis ah, wax ku dhufasho, ama gariirin nooc dhaawac madaxa ah oo loo arko xad-gudub ilmo, oo ay sababto ruxid, tuurid.

**Taageerada Bulshada:** Xiriirada ku xeeran ilmaha ama qoyska ee ka caawiya ilmaha inuu la qabsado waxa dhacaya. Sababtoo ah carruurta yaryari waxay si buuxda ugu tiirsan yihiin daryeelayaasha si ay u badbaadaan, waxay u baahan yihiin waayo-aragnimada ogaanshaha in daryeelayaasha muhiimka ah ay halkaas u joogaan si ay u ilaaliyaan iyaga, in ay ka caawiyaan inay maareeyaan dareenkooda iyo dareenkooda, oo ay daboolaan baahidooda. Waxay ku saabsan tahay joogitaanka 'la joogista' ilmaha, dhiirigelinta, la saadaalin karo, korinta naxariista leh.

**Ujeedada Dulucda Dhaqan-Bulsheed:** Isku xirka afka iyo dhaqanka iyo bulshada lagu isticmaalo; Inta lagu jiro sanadaha hore, tan waxaa ku jira macnaha guud ee dhaqan-bulsheed ee qoyska ee isticmaalka luqadda iyo xiriirka dadka waaweyn ee daryeelka iyo waxbarashada carruurnimada hore iyo deegaanka bulshada ee carruurtu ku horumariyaan luqadda

**Baahiyaha Daryeelka Caafimaadka Gaarka ah:** Carruurta leh ama ugu jira khatar sii kordhaysa ee jireed, korriin, dabeecad, ama xaalad shucuureed oo sidoo kale u baahan caafimaad iyo adeegyo la xiriira oo ah nooc ama qadar ka baxsan inta ay u baahan yihiin carruurtu guud ahaan (McPherson, 1998).

**Taxadarka caadiga ah:** Taxaddarka caadiga ah ayaa loo isticmaalaa si loo dhimo khatarta gudbinta cudurada faafa ee dhiiga ka dhasha iyo cudurada kale ee faafa ee ka yimaada ilaha la yaqaano iyo kuwa aan la aqoonin. Waxaa ka mid ah gacma-dhaqidda, hab dhaqanka habboon ee neefsashada iyo qufaca, isticmaalka alaabada difaaca (gacmo-gashiyada, goonnada, maro-gashiyada, maaskarada, indho-xirka ilaalinta ah), ka-hortagga mudista irbadda ama dhaawacyada qalabka kale ee fiiqan iyo hababka lagu nadiifiyo, iyo jeermiska looga dilo walxaha iyo dusha sare ee meelaha.

**Halbeegyada:** Halbeegyada lagu cabbiro waxqabadka. Wax la dejiyeyoo ay dejisay hay'ad in uu ahaado qaanuunka lagu cabbirayo tirada, miisaanka, xadka, qiimaha, ama tayada.

**Fikir khaldan:** Fikir hore oo fikrad khaldan, sawir, ama aaminsan qof ama koox dad ah laga aaminsan yahay.

**Ardayda:** Dadka ka diiwaangashan barnaamijyada diyaarinta ee carruurnimada hore.

**Cilladaha Dhimashada Degdeg ah ee Dhallaanka:** Dhimashada ilmaha yar ee ku dhacda si degdeg lama filaan ah, oo aan sababta dhimashada isla markiiba la fahmin.

**Qiimaynta Kooban:** Qiimaynta loogu talagalay in lagu qiimeeyo ama lagu cabbiro waxay ardaydu darteen ka dib markay ka gudbeen marxalad gaar ah oo waxbarashadooda ah: tusaale, koorso ama cutub waxbarasho kadib (Growing Glossary of Early Childhood Terms).

**Matalaadda Astaanta ah:** Awoodda garashada ee hal shay uu ka dhigan mid kale (tusaale ahaan, in loo isticmaalo shay si iska yeelyeel ah).

**Taabashada:** La xiriira dareenka taabashada.

**Daqiiqad Wax Laga Baran Karo:** Waxbarid lama filaan ah marka ilmuhu muujiyo xiisaha mawduuc ama marka xaalad ku habbooni dhacdo.

**Macallin:** Qofka dhammeeyey barnaamijka shatiga macallinimada ama maamulka oo si guul leh u qaatay shatiga waxbaridda.

**Kaalmada Farsamo:** Kaalmada Farsamo (TA) waa bixinta taageerooyin la bartilmaameedsanayo oo la habeeyey oo ay bixiyaan xirfadle(xirfadleyaal) yaqaana mawduuca iyo aqoonta waxbarasahada dadka waaweyn iyo xirfadaha si loo horumariyo ama loo xoojiyo hababka, fulinta aqoonta, ama fulinta adeegyada ee qofka qaata kaalmada farsamada (National Association for the Education of Young Children and National Association of Child Care Resource and Referral Agencies).

**Horumarinta Xirfadlaha ee Ku Salaysan Xiriirka (Relationship-Based Professional Development (RBPD) waa erey ballaaran oo loo isticmaalo in lagu tilmaamo afar nooc oo kaalmo farsamo ah oo u adeegsata cilaaqaadka aasaas ahaan:** tababarid, hagid, latashiga iyo la talin (DHS).

**Teknolojiyada:** Qalabka, aaladaha iyo mashiinada kale ama qalabka keena warbaahinta, oo ay ku jiraan telefishinada, kombayutarada, taleefanada casriga ah, raadiyaha, daaraha MP3, gacanka ciyaaha muuqaalka ah (video game consoles), qalabka wax laga akhristo (eReaders) iyo tabledyada (Levin, 2013).

**Dabeecada:** Hab-dhaqanka dabeecada shakhsiga iyo jawaab celinta shucuureed ee lagu garto.

**Dhaawaca masiibada:** Dhacdooyinka loo arko inay khatar ku yihiin nolosha ama sharafta jireed ee ilmaha ama qof muhiim u ah ilmahaas; taasoo keenaysa saamayn jireed oo daran sida wadne garaaca xoogga ah, neefsasho degdeg ah, gariirid; oo si buuxda u harqinaysa xeeladaha soo kabashada ilmaha ee la heli karo. (NCTSN.org)

**Kicinta Dhaawaca Masiibada:** Xusuusinta waayo-aragnimada naxdinta leh ee laga yaabo in ilmuhu uu yeesho falcelin aad u daran, oo ay ku jiraan gariir, xanaaq, murugo, cabsi ama ka fogaansho. Jawaabahani waxay noqon karaan kuwo aan la saadaalin karin oo jahawareer ku keeni kara daryeelayaasha. (NCTSN.org)

**Nidaamka dareenka dheelitirka (vestibular):** Dareen, ilaalin oo dib u soo ceshashada dheelitirka iyo halka jirka iyo qaybaha jirku ay joogaan.

**Carruurta Yaryar:** Carruurta marka ay dhashaan ilaa da'da siddeed.

MINNESOTA